

**War and Peace:
An anthology of Somali literature**

Suugaanta Nabadda iyo Colaadda

**War and Peace:
An anthology of Somali literature**

**Suugaanta Nabadda
iyo Colaadda**

Introduced and edited by / Iskudubbaridkii iyo gogoldhiggii
Rashiid Sheekh Cabdillaahi ‘Gadhweyne’

Collected by Axmed Aw Geeddi
and Ismaaciil Aw Aadan

Ururintii Axmed Aw Geeddi
iyo Ismaaciil Aw Aadan

Translated by Martin Orwin
with help from Maxamed Xasan ‘Alto’

Turjumaaddii Martin Orwin
oo uu caawiyey Maxamed Xasan ‘Alto’

Published 2009 by Progressio and Ponte Invisibile

Progressio
Unit 3, Canonbury Yard
190a New North Road
London N1 7BJ
England

Ponte Invisibile
Via Pietro Giordani 4
56123 Pisa
Italy

© Rashiid Sheekh Cabdillaahi Xaaji Axmed 2009
English translation © Martin Orwin 2009

All rights reserved

A catalogue record for this book is available from the
British Library

ISBN 978-1-85287-329-5 (Progressio)

ISBN 978-88-88934-09-9 (Ponte Invisibile)

Progressio is the working name of the Catholic Institute for
International Relations which is registered in the UK as a charity
(number 294329) and a company (number 2002500)

Progressio gratefully acknowledges funding from Comic Relief
for this publication

Ponte Invisibile is the working name of REDSEA-ONLINE.COM
Language, Culture and Heritage Foundation, which is based in
Hargeysa and has its editorial branch in Italy

Ponte Invisibile gratefully acknowledges funding support from
Kayd Somali Art and Culture for distributing this publication
(www.kayd.org)

Design and typesetting: Twenty-Five Educational

Cover photo: Frederic Courbet/Panos Pictures

CONTENTS

Gogoldhig	1
Maragfurka Suugaanta	8
Dhismaha Bulshada Iyo Dhaqanka	15
Nabadda Iyo Dhaqankeeda	20
Kaalintii Suugaanta	27
Hadal Iyo Dhammaantii	31
Qaybta 1aad: Maansada Colaadda Iyo Nabadda	33
Hormada 1aad: Maansada Colaadda	33
Hormada 2aad: Maansada Nabadda	51
Qaybta 2aad: Sheekooyinka	77
Introduction To The English Translation	93
Introduction	103
The Testimony Of Literature	109
The Structure Of The Society And The Culture	117
Peace And Its Culture	122
The Role Of Literature	129
Conclusion	133
Part 1: The Poetry Of War And Peace	135
First Part: The Poetry Of War	135
Second Part: The Poetry Of Peace	163
Part 2: The Stories	197
Index to the Poems and Stories	214

GOGOLDHIG

Waxa qoray Rashiid Sheekh Cabdillaahi Xaaji Axmed

Ururinta suugaaneed ee halkan ku daabacani waxay ka kooban tahay tiro maansooyin iyo sheeko-murtiyeedyo ka mid ah soo jireenka hiddaha Soomaaliyeed ee werinta carrabka la isugu tebiyo; kuwaas oo ah sheekooyin, sida muuqata, ku saabsan waayaha noloshii xilli la soo dhaafay iyo waxyaalo laga soo maray. Suugaantaasi giddigeedba waa tu ku abtirsanaysa qaybta suugaanta Soomaaliyeed ee aan halkan erey bixin ahaan ugu tilmaamayno suugaantii sooyaalka ahayd.¹ Taas waxaan ka wadnaa ama uga jeednaa suugaanta asalkeedu ka soo jeedo bulshadii qabiillada iyo reeraha xoolo-dhaqatada reer-guuraaga ah u badneyd. Sababta aannu sooyaal ugu tilmaamaynaa waa iyadoo suugaantaasi tahay jirrida ay tu kasta oo ka daba timid ka fuftay; soona ahayd budulka raadka suugaanta Soomaaliyeed ee muddo dheer la iska soo daba marayey, lana odhan karo, run ahaan waa sowrac suugaaneed oo Soomaalidu gooni u lahayd, cid kastana ay kaga soocnayd.

Ururintan suugaaneed waxa ka dhexeeya ee lagu soo xulay waa dulucda colaadda iyo nabadda ay siyaalo kala duwan uga hadlayso; waayo, sida ka muuqata halkudhigga magaca qoraalkan, danta hawshan looga socdaa, marka horeba, waa kaalinta ay suugaanta Soomaalidu hore uga qaadan jirtay haddana uga qaadan karto, colaadda iyo nabadda bulshadeeda.

Mowduuca colaadda iyo nabadda doorashadiisa waxaa noogu wacan oo noo yeedhiyey, marka hore, waayaha dagaallada ba'an ee carradii Soomaalida ka dhacay, khasaaraha naf iyo maal iyo burbur bulshoba lehna keeney. Waxaa weliba intaas dheer, dibuheshiin iyo nabadayn dhammays ah oo loo dhan yahay, dhab ahaanna u hirgeli karta oo aad u adkaaday, dadaal marar badan loo galayna lagu guul-darraystay. Midda kale ee ka sii muhiimsani waa hadal-haynta badatay ee ku saabsan kaalinta uu dhaqanka Soomaaliyeed ee soo-jireenka ahaa, guud ahaantiiba, ka qaadan karo dibuheshiisinta iyo nabadaynta Soomaalida maanta. Marka la leeyahay dhaqankii Soomaaliyeed ee soojireenka ahaa waxaa badiba laga hadlayaa habkii iyo farsamadii ay qabaa'ilka iyo reeraha xoola-dhaqatada reer-guuraaga ahayd, ku damin jireen colaadaha dhexmara ee ay ku heshiin jireen. Ulajeeddadu waxa weeye, shirkii geedka ee ay odayaasha beeluhu ku kulmi jireen kagana wada hadli jireen dhibaatooyinka dhexdooda ka dhaca iyo weliba dhaqdhaqaaqii kooxaha bulsheed ee nabadaynta ka qayb qaadan jirey ee uu ka mid ahaa suugaanyahanku. Soomaali iyo addunka kaleba waxaa la isku raacsan yahay in mushkiladda Soomaalida lagu daaweyn karo jidkaas dhaqankeedu ahaa. Aragtidaasi, sida muuqata waxay

1 Ereyga 'sooyaal' waxaannu uga jeednaa macnaha ereyga af-Ingiriisiga ah *classical*.

salka ku haysaa xaqiiqada dhibaataada Soomaalida maanta oo loo arko isla colaadihii lagu yiqiinney qabaa'ilka iyo reeraha Soomaaliyeed ee xoolo-dhaqatada ah; kuwaas oo isku haya oo ku diriraya maanta masaalixda xukunka dawladeed. Sidaas darteed, waxaa la isla gartay in suugaantii, diintii (kaalintii wadaadka), gartii geedka iyo wax kasta oo dhaqankii nabadeynta ee qabaa'ilkaasi hore u adeegsan jirey sidoodii loo adeegsan karo laguna gaadhi karo natiijadii waayadii horeba lagu gaadhi jirey.

Aragtidaasi iyo xaqaa'iqaa dhabta ah ee mushkiladda Soomaalida maanta inta ay isu jiraan iyo ilaa xadka ay ka turjumayso nuxurka mushkiladda waqtigan jirta waa arrin dooddeedu dheeraan karto, murankeeduna badan karo; hase yeeshee aragtidaasi iyada intaas uma dhaafeyno oo halkaas ayaannu kaga hadhaynaa waayo ujeeddada qoraalkani wuxuu ku saabsan yahay laag mid ah oo ka tirsan laagaha soojireenkii dhaqan-nabadeedka Soomaaliyeed. Sidaas awgeed waxaynu hadda toos ugu ambabaxaynaa ujeeddadaas iyada ah.

Abbaarta uu hadalkeennan gogoldhigga ahi ilaa hadda u dhacayo waxaa ka muuqata ujeeddada aasaasiga ah ee suugaantan oo runtii ahayd haddanna ah in wax laga muujiyo kaalinta nabadeed ee suugaanta. Maxaa yeelay sida aynu hadda ka hor isu tusnay nabaddu waa baahida koowaad ee badanka carrada Soomaalida maanta wax kasta oo kaleba ka horreysa. Hayeeshee baahida nabadda loo harraad-qabo waxaa keeney colaadaha ba'an ee raagay. Sidaas awgeed ayaannu u doorannay israaca colaadda iyo nabadda. Macnuhu waxa weeye ulajeeddada ururintan suugaaneed ma aha oo qudha diwaangelinteeda iyo korodhsiga aqoonteeda ee waxa iyana meesha ku jirta hubsashada doorka ay suugaantu ka geli karto dibuheshiinta iyo nabadeynta Soomaalida maanta.

Marka aynu halkaas marayno waxaa ina hor imanaya laba su'aalood oo midiba marxaladdeeda goonida ah iyo halka ay jawaabteedu jirto inoo la kacayso. Ta hore waxa weeye, si aynu u ogaanno kaalinta suugaanta Soomaaliyeed ee ku aaddan nabadda xaggee baynu u noqonnaa oo xogteeda u raadsannaa? Waa tuma suugaanta kaalintaas hore ugu aadday ee la raadraaci karaa? Su'aashan jawaabteedu waxay ina la tegeysaa suugaanta ku abtirsaneysa bulshadii qaabaa'ilka iyo reeraha xoolo-dhaqatada reer-guuraaga soocan u badneyd, ee aanay nolol dhaqaale iyo dhaqan magaalo raad ku yeelan, himilo siyaasadeed oo reer-hebel ka shisheysa iyo hirasho ka weyn xidhiidhka tolliimona aanay wacyigeeda saamaynin. Jawaabta su'aashan hore, sidaas darteed, waxay inoo tilmaamaysaa suugaantii aynu hadda ka hor uga magac-dhigney suugaantii sooyaalka ahayd, taas oo noqon karta meesha aynu ka ogaan karno kaalinta nabadda ee suugaantii sooyaalka ahayd.

Su'aasha labaad ee inna horimanaysaa waa ta ku saabsan kaalinta nabadeed ee suugaanta waqtigan laga sugayo in ay gudato; maxay tolow suugaantu ka tari kartaa deminta colaadahan ba'an ee Soomaali wada

saameeyey kuna raagay? Sidii aynu hadda ka hor u tilmaannay, rukummada dhaqanka Soomaaliyeed ee marka laga hadlayo nabadaynta Soomaalida maanta aad carrabka loogu xejayo waxaa ka mid ah suugaanta iyo suugaanyahanka. Magaca la soo qaado ee had iyo jeer lagu celceliyaana waa gabayaaga oo badanaaba la yidhaahdo tix gabay ama geeraar ah ayuu dab colaadeed oo shidan ku demin jiray, maantana ku demin karaa! Inta badan, waxaa la daliishadaa dadka Soomaalida ah oo lagu tilmaamo dad ugu dhega-nugul una kal-debecsan ereyga suugaaneed, siiba hawraarta maansada, sidaas awgeedna ay fikirkooda iyo faldhaqankoodaba aad u saamayn ogtahay. Waxaa marar badan la sheegaa in uu gabayaagu, inta uu maanso tiriyo, uu beelo nabad ahaa dab colaadeed ka dhex oogi jirey; mar kalena, colaad fogaatay oo dhiiggeedu batay, cid walibana u maaro weydey uu tix maanso ku qaboojin jirey kuna dhalin jirey mar qudh ah jawi nabadeed oo hor leh. Iyada oo aan wax intaas ka badan la isweydiinnin, waxaa loo arkaa in ay suugaanta waagani isla saamayntaas la sheegayo ku yeelan karto fikirka iyo faldhaqanka dadka maanta nool. Maxaa tolow taas ka jira? Maxaa markeeda horeba ka run ah aragtidan tidhi bulshadii qabaa'ilka iyo reeraha xoolo-dhaqatada ahayd, maansadu dagaalka iyo nabaddaba way abuuri jirtey?

Runtii sida ugu habboon ee su'aalaha jawaabtooda lagu heli karaa waa daraaso taariikheed oo si ballaadhan u guud-marta dhacdooyinka dagaal iyo nabadaynta lahaa ee Soomaalida, horreyso iyo dambaysaba, u soo maray - intii warkeeda la hayo - iyo wixii murti suugaaneed laga yidhi ee laga hayo. Waxay nala tahay in halkaas laga ogaan lahaa dhacdo walba, haddii ay dagaal tahay iyo hadday nabad tahayba waxaa keenay ee ay ka dhalatay iyo wixii sabab toos ah u ahaaba; waxaana halkaas ka muuqan lahaa inta guud ahaanba ereyga suugaaneed loo celin karo. Hayeeshee taasi hadda naga hadhan; waayo waa wax aannaan halkan ugu yeel-haynin; isla markaana aan ku-taloggalkayaga ahayn.

Tolow hadalka suugaaneed laftiisa ma loo noqon karaa oo ma laga raadin karaa xog-warranka laga daliishan karo runta aynu baadidoonkeeda nahay? Ma lagala soo bixi karaa dabuubta hadalka suugaanta - sida maansada, maah-maahda, odhaahda iyo sheeko-muriteyda iyo wixii la mid ah - wax tilmaamaya xidhiidhka ay suugaantu la soo yeelatay colaadda iyo nabadda bulshadeeda.

Waxaannu xaashiyaha soo socda, ku dedaali doonnaa, in aannu suugaanta qoraalkani sido, hadday maanso tahay ama hawraar dareersan tahayba, obocdeeda dhexgallo oo falanqayno, kana raadino tilmaamo laga hilaadin karo qaybta ay suugaanta Soomaaliyeed, gaar ahaan, teedii sooyaalka ahayd, ka qaadatay nolosha siyaasadeed ee bulshadeeda colaad iyo nabadba.

Ka horse, inta aannan qodobkaas u gudbin, aannu wax yar ka nidhaahno suugaanta halkan ku qoran, tilmaamaheeda iyo majaraha xulashadeeda,

soo-ururinteeda iyo xaqiijinteeda.

Markii u horreysey ee hawsha ururintan la isla soo qaado waxaa la is tusay in loo baahan yahay tusaaleyaal suugaaneed oo ka tirsan ilaa saddex xilli ama marxaladood oo suugaaneed.

Tusaalayaasha xilliga koowaad waa suugaanta aannu hadda ka hor soo jeedinney in aynu ugu erey bixinno sooyaalkii suugaanta Soomaaliyeed. Ereyga sooyaal waxaannu uga jeednaa suugaanta ka dhalatay ee ka muuqaal-celineysa noloshii qabaa'ilka Soomaaliyeed ee u badnayd xoolo-dhaqatada reer-guuraaga ah. Suugaanta bulshadaas iyo taariikhdeeda ku abtirsanaysa isla markaana noqotay budul raad suugaaneed oo Soomaalida lagu bartay ayaannu gaar ugu tilmaamaynaa erey-bixintan iyada ah.

Tusaalaha suugaaneed ee labaadna waxa weeye suugaan laga soo ururiyo marxaladdii halgankii gumeysi-diidka iyo gobannimadoonka ilaa tobankii sano ee hore ee qarannimadii Soomaali ugu horreysey. Suugaanta marxaladdaasi waxay matalaysaa dhalashada fan iyo suugaan, qaab iyo dulucba, wejiyo cusub qaadanaaya. Waxaa soo baxay oo waqtigaas wacyiga dadka saamayn aad u weyn ku yeeshay suugaan baaqa dhambaalkeedu yahay gumeysi-diid iyo qabyaalad-diid; dhaadashadeeda iyo hirashadeeduna tahay walaaltinnimo, xornimo iyo midnima Soomaaliyeed. Tixdii maansada ee labada god-maanseed ee gabayga iyo geeraarka ku dabranayd, ayaa xadhiga furatay una tallowday godad-maamuuseeyo waqtigaa ka hor, heesaha cayaaraha miyiga iyo hees-hawleed mooye, ka caggaanaan jirey tixda uu gabayaa magac lihi kaga maansoodo adduun iyo taladii. Waxaa kale oo soo biirey qaabab fan iyo suugaaneed cusub oo ay ka mid yihiin sheekooyinka riwaayadaha loo yaqaan ee masrax ahaan loo daawado iyo heesaha muusigga lagu tumo. Midda kale ee muhiimka ahi waxaa weeye, majaraha qabyaalad-diidka iyo xornimaddoonka Soomaaliyeed wuxuu keeney in ay meel weydo, oo noqoto ama ku dhawaato, wax aan jirin suugaantii colaadda ee lagu yiqiinney bulshadii soojireenka Soomaaliyeed. Runtiina waa qodobkan dambe ka suugaantii waagaas xiisaha gaarka ah u yeelayaa, waayo, marka ay ujeeddadu tahay suugaanta iyo kaalinteeda nabadda, lama illaawi karo saamaynta ballaadhan ee ay suugaantu waqtigaas lahayd.

Tusaalaha saddexaad ee la is tusay wuxuu ahaa suugaan laga soo xusho marxaladda ka bilaabanta afganbigii uu keli-taliskii Siyaad Barre ka madaxda ahaa kula wareegey xukunkii dalkii Soomaaliya 1969kii ilaa waqtigan hadda ah. Waa marxalad ay soo biireen isbeddello siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsheed oo saamayn weyn ku yeeshay xidhiidhka suugaanyahanka iyo bulshadiisii hore ee soo-jireenka ahayd; kaalintiisii horena meesha ka saartay; xidhiidhka uu bulshada cusub iyo qaranka, gaar ahaan, xukuumadda la yeelan lahaana ka dhigtay mushkilad aad u murugsan. Waxaa soo baxay dano dhaqaale iyo siyaasadeed iyo dhibaatooyin loollan, hirdan iyo colaado giddigoodba noocooda aanay Soomaali hore u soo marin, aanuna jirin xeer

qabaa'ilka uga yaallay.

Maxay suugaantu ka tidhi waxyaalaha tirada ka batay ee dhacay? Maxaa laga odhan karaa saameynteeda? Suugaanta marxaladdani waa tu ulajeeddada shishe ee soo ururintan suugaaneed u leh qaayo dheeraad ah. Hayeeshee iyada iyo marxaladda labaadba maanta waa riyo aannu, haddii Eebbe nala qabto, niyeysan nahay inaannu waqtigeeda u hawlgallo.

Waxaynu hadda u gudbaynaa suugaanta halkan ku qoran iyo qaybaheeda iyo aasaaska lagu soo xushay. Waxay ka kooban tahay suugaan laba qaybood ah, taas oo guud ahaanteedba, toos ama dadab dulucdeedu ula xidhiidho colaadda ama nabadda. Qaybta hore waa qaybta maansooyinka oo ka kooban shan iyo labaatan maanso. Qaybta labaadna waa ta sheekooyinka aannu magac-tilmaameed uga dhigney sheeko-murtiyeedyo soojireen ah². Qaybta maansada waxaannu siinney culays gaar ah, sababtoo ah waa iyada, maansadu, ta had iyo jeer loo tiriyo kicinta colaadda iyo dejinta nabadda labadaba; maansoyahankuna waa ninka la xusuusan yahay nufuuddii siyaasadeed ee uu ku lahaa qoladiisa. Taas ayaa keentey in ururintan inteeda badani ay noqoto maansooyin.

Annaga oo raacayna dulucda labada ujeeddo ee ah colaadda iyo nabadda, waxaannu u kala saarnay laba israac oo ka hore yahay maansooyinka ku saabsan colaadda, ka labaadna yahay kuwa ku saabsan nabadda. Waa maxay astaamaha mid walba gaar yeeley ee lagu tilmaansan karayaa?

Marka aannu ku koobnaanno ujeeddada qoraalkan, maansada colaadda oo kale, waxaannu ku tilmaansannay kulana soo baxnay, marka laga eego sida ay, duluc ahaan, ula xidhiidh leedahay colaaddii iyo dirirtii qabaa'ilkii iyo reerihii miyiga, in ay noqoto laba midkood.

Maanso toos ugu baaqaysa ama u dhiirrigalineysa colaadda iyo dirirta. Maansada noocan ahi wejiyo badan bay leedahay; waxaana ka mid ah tix diro-diro ah, oo laba qolo ama ka badan colaad iyo dil ka dhex-dhaca ku guubaabineysa. Tixda sidaas ahi badiba waxay ahayd tu nabarro hore iyo utun soo tiilley dib u faadh-faadha oo ladhka xusuustooda soo noolaysa; ama waxay ahayd maanso qolo laga lib-hayo marna canaanaysa, marna tiratireyneysa oo aargoosi ku boorrineysa. Tixaha noocan ah ee halkan ku qoran waxaa ka mid ah Salaan Carrabay iyo tixdiisa caanka noqotay ee *Mayn*, Cali-Dhuux Aadan iyo tixdiisii ay ku bilaabantay silsiladdii gabayadii la baxay *Guba*, iyo tix iyana uu leeyahay Maxamed Cabdille Xasan oo halkan halku-dhegga aannu u doorannay yahay *Cabdillaahi Waxa Loo Qudh-Jaray*.

Midda labaad waa maanso si dadban u dhiirrigalineysa colaadda.

2 Waa sheekooyin ka mid ah soojireenka hadalka afka lagu tebiyo (*oral traditions*); sida badiba ka muuqata ama la malayn karna waa kuwo ka warbixinaya waxyaalo soo maray ama ka dhacay degaanka iyo xilliga ay sheeko waliba ku saabsan tahay, raad aad u wayna kaga tegey noloshada dadka. Sheekooyinkaas qaar badan oo ka mid ahi waxay noqdaan kuwa tafa oo u degaamo kale oo badan u gudba, isla markaana waa kuwo maskaxda dadka u furan oo cidiba si u weriso, laguna daro hawraaro murti leh, iyo dhacdooyin khiyaali ah oo laga yaabo in aanay dhab ahaan wax u dhacay ahayn, hayeeshee giddiba waa murti xikmad lagala baxayo.

Maansada noocan ahi waa tu dulucdeedu ku aroorayso oo isla mar ahaanna xoojineysa dhaqan-colaadeedkii qabaa'ilka xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed. Waxaa tusaale u ah tixaha ay dulucda ujeeddadoodu u socoto qiyamta iyo si-aragga isla-weynida qabiillo, awood-sheegashada iyo amar-ku-taagleynata, fara-sheegashada, libin-ku-faanka, dhiirrigelinta dhaca (geela, dhulka, ceelka, haweenka i.w.m.) nabad-diidnimada iyo in la kala xidhiidh-go'o iyo dhulka oo lagu kala tago. Maansooyinka sidaas ah, in kasta oo aanay cid gaar ah colaad toos ugu guubaabinaynin, haddana waa kuwo noolaynaya dareenka colaadda, si dadbanna u dhiirrigelinaya. Sidaas awgeed, maansooyinka wejigan leh waxaannu isugu geyney qodob gooni ah oo aannu u bixinney 'Maansada Dhaqanka Colaadda Xoojisa'.

Maansada nabaddana, marka laga eego dulucdeeda ku saabsan nabadda bulshadii ahayd kooxaha kala abtirsiinta qabiil, iyana isla labadaas weji baynu kala soo baxaynaa. Sidaas darteed, waxaannu iyana u kala dhigney laba meelood. Meesha hore waxaannu isugu geyney maansooyin si toos ah nabadda ugu baaqaya; waxaana lagu garan karaa goorta iyo goobta iyo dhacdada ay ku saabsan tahay iyo ujeeddadeeda nabadeed ee tooska ah. Tusaaleheedu waa tix goob dagaal laga mariyo oo laba col oo isu soo hub-gurtay, ama isku soo maqan laga hor-tiriyey, si dagaalkooda loo joojiyo. Tusaalaheeda ururintan ku jira waxaa ugu horreeya labadii tixood, ee uu Salaan Carrabay ka dhex-tiriyey laba col oo isku dhammaan lahaa; labadaas tixood oo ah geeraarkii *Waar Tolow Colka Jooja* iyo gabaygii *Nimanyahow Tolnimo waa Dugsije*.

Meesha labaad ee maansada nabadda, waxaannu isugu geyney tixo si dadban ula xidhiidha nabadda; waayo waa kuwo aan toos ugu saabsanayn ama aan ka hadlaynin dagaal dhacay ama dhacaya ama soo socda oo laga cabsanayo; waxaana runtii ka mid ah tixo dulucda waxay ka hadlayaan iyo ulajeeddada curiyaheedu ka lahaa, aanay dagaal iyo nabadi meella ka soo gelin. Hayeeshee mar walba waa kuwo baaqa murtidoodu xoojineyso, mabaadida iyo qiyamta aasaaska iyo tiirka u ah nabadda. Waxaannu taas ugu jeednaa maansada murtida ay siddo ee lagala bixi karaa ay salka u dhigeysa ee ay adkaynayso ku-dhaqanka samaha guud ahaanba; sida mabaadida caddaaladda iyo sinnaanta, naca dulmiga iyo gar-darrada; is-xaq-dhawrka iyo xurmaynta dadka kale, magac iyo meeqaamba; dhawridda qiyamta anshaxa biri-ma-geydada Soomaaliyeed; anshaxa Alla-ka-cabsiga iyo guud ahaanba fal-dhaqanka kasta oo dadnimadu farayso i.w.m.

Suugaanta noocan ahi, waa tu sees adag u dhigeysa dhaqanka ay nabaddu goor walba u baahan tahay, haddii ay tahay marka colaad jirta la deminayo ee heshiisiin la wado ama tahay goorta nabadda lagu jiro ee ilaalinteeda loo baahan yahay intaba.

Qaybta labaad ee aannu uga magac-dhigney 'Sheekooyinka' waxay ka kooban tahay toddoba sheeko. Sheekooyinkaasi dhammaantoodba waa werin-afeed soo jireen ah oo ku saabsan xaalado waqtiyo hore soo maray

deegaannada qabaa'il iyo reero kala duwan; xusuusta dadkana raad weyn oo go'i waayey kaga tegey.

Badiba sheekooyinka noocan ah hawlyari looguma kala sooci karo kuwo colaadeed iyo kuwo nabadeed; waayo sheekada qudh ahi waxay xambaarsan tahay oo dhexdeeda ku hirdamaya qiyamtii dhaqanka colaadda iyo qiyamtii dhaqanka nabadda ee bulshadii waagaas. Sidaas darteed sheekooyinkaasi waxay qoraalkan ugu dhigan yihiin qayb mid ah.

Taas macnaheedu ma aha in aanay sheekadaasi lahayn ulajeeddo iyo hirasho sugan oo la yaqaan ama la garan karo. Runtii sheeko kastaba nuxurka murtideeda kama-dambaysta ahi wuxuu in badan qaayo siinayaa qiyamta dhaqanka nabadda ee aynu wax ka soo tilmaannay.

Inta aynaan u gudbin maragfurka suugaantan, waxaannu qaybtan hore ku soo gebogebeyneynaa dhibaatooyinka aannu soo ururinta suugaantan kala kulannay.

Ugu horeyn sugaantani badankeedu waa suugaan aan meelna ku qorneyn oo ku filiqsan xusuusta dad badan oo dhul aad u kala fogfog kala jooga, ayna adag tahay in si hawl yar lagu gaadho, oo laga soo qoro wixii ay xusuustoodu hayso. Waxaa wehelisa, iyadoo ay dadkaasi badiba yihiin dad aad u gaboobay, oo ilowshiiyuhu ku badan yahay. Guud ahaana, xusuusta maskaxdu waxay leedahay wax badan oo ay lumiso iyo wax badan oo ay isku qaladdo, halkaas oo ay ka dhalato in ay tixdu isku dhex daadato oo qofba kuugu weriyo si gooni ah; mararna ay isku qaldamaan magacyada ciddii tirisay iyo sababtii loo tiriyey.

Midda labaadna, xaaladda maanta jirta waxay na hor keentey dhibaato ah in aannu dadkii aannu suugaantan ka raadin lahayn isla weyno; waayo, magaaloooyinkii waaweynaa ee Soomaali ka dhexeeyey kuna kulmi jirtey, cid walbana laga heli jirey maanta ma jiraan; wayna adag tahay in aad laba qof oo aad u wada baahneyd isku meel ugu tagtaa.

Midda saddexaad ee noo raacday waxay noqotay, dhaqaalodarro aannu karti u weyney in aannu in badan oo dhulka Soomaalidu degto ah gaadhi kari weyno. Sidaas darteedna, waxay nagu keliftey in aannu suugaantan ka soo ururinno gobolladii aannu gaadhi karney ama warkoodu na soo gaadhi karey. Inkastoo la odhan karo, suugaantani waa mid degaanno gaar ah u badan, haddana waxaannu isku qancinney in ay suugaantii bulshadii soo-jireenka xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed ay si aada isugu mid tahay, suugaanta halkan ku qoranina ay tusaale u wada noqon karto.

Ugu dambeynta, mar walba waxaannu ka afeefaneynaa galdaloolo badan oo dhinacyo leh oo ka muuqan karta suugaanta halkan ku qoran in aanay ahayn wax ku yimi ula-kas ama fudaydsi; waxaannuna cid walba ugu baaqaynaa in ay wixii dhaliila ee ay ku arkaan noo soo tebiyaan oo ay qaladaadka ku jiri karana nala saxaan, si aannu wixii daabacaaddan ka dambeeya u sii hagaajinno qoraalka suugaanta.

MARAGFURKA SUUGAANTA

Maxaynu hadda kala bixi karnaa tixaha maanseed iyo sheeko-murtiyeedyada halkan ku qoran ee marag-muujiin u noqon karaya qaybta ay suugaantii sooyaalka Soomaaliyeed ka soo qaadatay colaadda iyo nabadda bulshadeedii qabaa'ilka reer-guuraaga ahayd?

Su'aashu ma aha saamaynta suugaantaas ee colaadda iyo nabadda la xidhiidha, sababtoo ah xaqiiqada kaalinta ay suugaantu ku lahaan jirtey noloshii siyaasadeed ee bulshadii soo jireenka qabaa'ilka Soomaaliyeed ma aha wax cidina muran gelin karto; mowduuca colaadda iyo nabaddana, gaar ahaan, iyaga hadalkoodaba daa; markase ay su'aashu ku saabsan tahay waayadaas hore wixii ay ka kici jireen ee u sabab ahaan jirey dagaalladii kooxaha kala qoloda ah, suugaantan iyo wararka laga hayo xogogaalka soojireenka taariikheed ee ku saabsan dhacdooyinka colaadihii qabaa'ilkaas midkoodna kama marag-kacayo in ay suugaantu, guud ahaan, iyo gaar ahaan tix maanseed, toona ka mid ahayd sababaha caam ahaan keena colaadda iyo nabadda laba qabiil. Badi waxaa la xusaa xaaladda ay tix maanseed baajisey dagaal ay laba qabiilo oo colloobay birta iska asli lahaayeen (tusaale Salaan Carrabay iyo Faarax Nuur); hayeeshee natiijadaasi ma aha wax maansada keli ah lagu gaadhi karayey. Marka uu umalka colaadeed kar-jabo, caqliguna soo miiraabo ee codka nabaddana loo dheg-nugul yahay, murtida odayga hadal-yaqaanka ah iyo wacdiga wadaadkaba isla natiijadaas oo kale waa lagu keeni jirey.

Teeda kale ee ah xaalad ay tix maanso ahi, iyada oo aanay sabab kale, haba yaraatee jirin, ay keentey dagaal laba qabiil, iyada taas kama hadlayno, waayo ma ahayn ifafaale caam ah oo taariikhda qabaa'ilkaas ka mid ahaa. Xataa haddii ayba wuxuun ka jiri karaan, waa wax dhif iyo naadir ah oo aan wax ka soo qaadi lahayn.

Su'aasha muhiimka ah ee ina hortaal waa tan ku saabsan wixii kicin jirey ee keeni jirey colaadihii iyo dirirtii dhex-mari jirtey beelihii qabaa'ilka xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed ee ay u badnayd bulshadii soojireenka ahayd. Ahmiyadda gaar ahaaneed ee su'aashanu waa ujeeddada ay abbaarayso oo ah meesha ay tahay in laga eego waxa colaadahan hadda Soomaali ka dhex dhacay iyo kuwii waayadaas hore dhici jirey ka dhexeeya; wax ay iskaga mid yihiin iyo wax ay ku kala duwan yihiinba. Waa meesha ay nala tahay in lagala soo bixi karo ee si cad looga ogaan karo waxtarka uu yeelan karo soojireenkii dhaqanka Soomaaliyeed.

Jawaabta su'aashan waxaannu marka hore ula noqonnay dad aqoon u leh soojireenka taariikhda afka la isaga tebiyo, iyo qoraallo ka mid ah cilmi-baadhista hadda ka hor lagu sameeyey arrintan iyada ah. Sida muuqata, waxa jira sababo la isku raacsan yahay in ay keeni jireen dagaalka qabaa'ilka; waxaana ka mid ah hantida xoolaha nool, weliba si gaar ah geela iyo fardaha; daaqa iyo ceelka biyaha; haweenka iyo dhaqankii bulshadaas

(Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas 1997 p. 11³). Waxaa lagu daraa mararka qaarkood, dhawrsoonidda sharafta iyo magac-samida qabiilo (Lewis, I.M. 1982 p. 243⁴), iyo qabka iyo gardiidka (Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas 1997 p. 18⁵). Hayeeshee, waxaa laga yaabaa in labadan arrimood ee dambe, inta badan, ahaan jireen wax ku xidhan kana dhasha sababaha kale ee kor ku xusan qaarkood iyo waxyaalo kale oo ka soo jeeda waayaha nolosha bulshadii soojireenka Soomaaliyeed ee waqtiyadaas hore. Taas awgeedna waxay u badnayd in colaad sabab kale ka dhalatay ay isla-weynida, madax-adayga, iyo quudhsigu, xoojin jireen dagaalka soona dedejiin jireen. Tusaale ahaan, gabadh Reer-Hebel ka dhalatay ama nin Reer-Hebel ah u doonnan ama u mehersan, oo niman qolo kale ahi faro-xumeeyeen ama khasab kula tageen, falkaas waxyeelladiisa maaddiga ah, ee gaar ahaan gabadha u soo gaadhay, waxaa kale oo ku lammaanaa dheg-xumo iyo ceeb raacda magaca qolada ay gabadhu ka dhalatay ama u dhaxday ama ay u doonnaneyd. Dhacdadan oo kale oo warkeedu deg-deg u faafi jirey, aadna qabaa'ilka dhexdooda looga faalleyn jirey, marar badanna gabayo ayaa laga tirin jirey; waxay lahayd dhaawac soo gaadha sharafta qabiilka; sidaas darteed, waxay aad u xoojin jirtey dagaal dhaqsoba u dhaca oo 'ceebta la iskaga maydho'.

Sidoo kale kibirka ama isla-weynidu inta badan sabab toos ah uma noqon jirin colaad iyo isku dhac dagaal oo laba qolo dhexmara ee waxay taas uga badneyd in ay isku gudubto ama diciifiso fursadda wada-hadal iyo shir-nabadeed la isugu yimaado oo lagu heshiiyo; waxayna dhiirrigelineysay dil iyo aargoosi dhaca.

Badiba waxay u dhici jirtey dil quudh-gooyo oo dhaca sida ku cad sheekada *Adduun I Qatal* ee buuggan qaybtiisa dambe ku qoran; ama dhaawac, ama sabab kaleba, ka dibna qolada falka dambi loo tirinayaa haddii ay qolada kale quwaddeeda quudhsato in ay garba u soo fadhiisan weydo. Runtii xoogga cududda dagaal ee ay beelaha qabaa'ilka isku daaqa iyo waraabka ahaa is dheeraayeen, siyaalo badan bay u raadayn jirtey xidhiidhka u dhexeeya qabaa'ilka aragti ahaan iyo fal-dhaqan ahaamba. Xataa haddii wax kasta oo kaleba laga tago, shakiga qolada laga tirada badan yahay ka qabto in la quudhsanayo, ama aan dirirtooda wax laga soo qaadaynin, intuba waxay mararka qaar keeni jireen in ay iyagu (qolada tirada yari) nabadda diidaan, ilaa ay marka hore duullaan qaadaan oo ay dhiig daadiyaan.

Ugu dambeyn, waxaynu odhan karaynaa, sababta dagaalka laba qolo, hadday geel la dhacay tahay ama daaq iyo biyo la isu diiday tahay ama dhiig tahay, ama wax kaleba tahay, dhaawaca sharafta reerku wuxuu ahaa wax ku jira oo la socda khasaaraha maaddiga ah ee qabiilka soo gaadhay.

3 Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas, *Biri-Ma-Geydo (Lama-Dilaan)*, February 1997.

4 I.M. Lewis, *A Pastoral Democracy*, Oxford University Press, London, 1961.

5 Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas, *Biri-Ma-Geydo (Lama-Dilaan)*, February 1997.

Hadda waxaynu u imanaynaa suugaantan oo ah meesha saddexaad ee aynu ka raadineyno jawaabta su'aasha wixii ay ka dhalan jireen colaadihii iyo dagaalladii beelaha qabaa'ilka xoolo-dhaqatada iyo reer-guuraaga Soomaaliyeed ee waayadii la soo dhaafay.

Jawaabta aynu ka akhriyeyno ururintan suugaaneed, nuxur ahaan waxba kama diiddana sababaha aynu ka soo tebinney aqoonta soojireenka taariikhda afka la isugu tebiyo, iyo wixii ku soo arooray cilmibaadhisyo hore loo sameeyey oo mawduucaas isaga ah ku lug leh; hayeeshee wacaaleyaal kale oo la xidhiidha dhismihii bulshadaas iyo dhaqankeedii, ayaa iyana suugaantan laga daliishan karaa, oo ah asaaska sababaha colaadaha iyo nabadduba salka ku hayeen.

Taas hore ee ah sababaha xidhiidh toos ah la lahaa colaaddii qabaa'ilka reer-guuraaga Soomaaliyeed, suugaantan waxaynu ugu imanaynaa oo aynu kala soo bixi karnaa sababahan:

dhiig⁶ oo ah badiba dil qudhooyin ah (dhaawacna wuu noqon karaa);
dhaca geela;
daaqa iyo ceelka;
haweenka.

Afartaas sababood waa kuwa aynu ku hayno suugaantan ee aynu ka akhrisan karno dulucda ujeeddada waxa ay ka hadlayso, erey-tusmeedyada sarbeeban iyo suuraymaha (imagery) suugaaneed ee ku jirta maansooyinka iyo sheekooyinka. In kasta oo aynaan odhan karin waa iyaga oo qudha kuwa ay colaadda qabaa'ilkaasi ka dhalan jirtey, haddanase waxay noo la badan tahay, beelaha qabaa'ilka ahaa xoolo-dhaqatada reer-guuraaga soocan ee aanay xirfad kale u wehelin; sababta tooska ah ee iska-horimaadkooda iyo colaaddoodu in aanay afartaas ka baxaynin.

Tixda ugu horreysa qaybta maansooyinka oo uu leeyahay Salaan Carrabay, dulucda ujeeddadeeda oo tirtirsi ah, wuxuu maansayahanku u marayaa godobta rag la laayey oo ku kala maqan qabaa'il degaanka Togdheer ku wada noolaa. Qolo walba wuxuu xusuusinayaa nin Hebel la odhan jirey oo beeshiisa magac iyo meeqaan weyn ku lahaa oo uu diley Hebel oo qoloda kale ahaa. Alle ha u naxariistee, Xaaji Muuse Galaal oo cajalad uu duubay aannu tixdaas ka qorney, wuxuu sheegayaa in uu Salaan ka mariyey tixdaas goob ay fadhiyeen rag ay ka mid yihiin niman nin walba

6 Dhiig, halkan, waxaannu ugu jeednaa, isla macnihiisii u-yaalka ahaa (*the symbolic meaning*) ee uu ku lahaa dhaqanka iyo xeerarka u dhexeeya kooxaha qabaa'ilka iyo reeraha xoolo-dhaqatada isku-degaanka ahaa, kaasoo tilmaamaya, qof, siiba nin ah, oo ku dhintay gacanta nin ama niman qolo kale ah. In kasta oo uu badiba dagaalka laba qolo ka dhalan jirey dilka qudhooyada ah, lana odhan karayo isagaa keeni jirey aargoosi deg-deg ah (ninkii la diley oo nin loogu aaro) ama qaylo-dhaan iyo lallabo colaaddeed iyo duullimaad dhakhso ahba.

ninkii aabbihii diley wiilkiisii uu hortiisa soo fadhiyo, iyada oo ay labaduba haystaan bundukh.

Bilowga u horreeya ee tixdaas, tusaale ahaan, waxaa ka mid ah:

Dhoolaha Beday kaga rideen dhagaxi Beereede
Waatii waraabuhu dharqaday dhinacyadiisiiye

Ulajeeddada labadan bayd uu gabayaagu ka lahaa waa inuu dhiidhi geliyo qolada uu ka dhashay nin magaciisa la odhan jirey Bede oo meesha Beer la yidhaahdo (bari ka xigta Burco) lagu diley.

Baydad kale, isagoo qolo ficilo gelinaya oo godob hore soo xusuusinaya wuxuu Salaan Carrabay isla tixdaas *Mayn* ku leeyahay:

Cabdi-Qodaxna waa lagu dhugtamey suu dhalool yahaye
Dhaayaha wejiga saanaddii dhab uga qiiqaysey
Hadba waxan la dheellimanayaa dhicitinkiisiiye

Meelo kale, isaga oo ka hadlaya dilkii ninka la odhan jirey Aadan Jugleh iyo ninkii diley oo isna la odhan jirey Nabadshe wuxuu Salaan yidhi:

Isagaan dhib qabin Aadan bay wax u dhawaaqeene
Dhadhabkaa hurdada ugu warramay dhaasasiyo beene
Dhalanteedka waa kii la kacay dhuga la'aaneede
Dhabtuu Nabadshe warankowgu ridey dheehay aadmiguye

Wuxuu Salaan Carrabay gunaanadka tixda u imanayaa sababta dumarka oo isagana markaas gaar u sii taabanaysay, illeyn gabayganba waxaa ka keeney waa colaadda uu ka qaaday qisadii gabadha Qarad la odhan jirey oo nin ay Salaan isku reer ahaayeen lagala baxay. Isaga oo uga tusaale qaadanaya qisadii Qaabiil iyo Haabiil, wuxuu tuduca u dambeeya ku bilaabayaa saddexdan bayd ee tilmaamay sababta dumarka:

Ma dhurmuminin Qaabiil kolkuu dhacayey Haabiile
Dhibaad-jiid haween buu ka kacay dhiriftankoodiye
Dheddigoodku Aadmiga horay uga dhawaaqeene
Cilmi-Dhuub shantuu dhalayba waa dhababka loo jiidye
Ma sii dhugan Bah-Reer Dood kobtay kaga dhaqaaqeene
Anuun bay dhaxantu xalay iigu timi dhimirsigii ciile
Dheg xumada aniyo baa maso ah dheecdan Reer Gude'e

Tusaale kale oo aannu suugaanta halkan ku qoran ka soo qaadannay waa tixdii Cali Aadan 'Cali-Dhuux' ee bilowga u ahayd silsilo-maanseeddii magaca *Guba* ku caan-baxday. Tixdaas oo aannu qoraalkeeda ururintan ku

jira halku-dheg (magac ahaan) uga dhigney *Doollo* in kasta oo badiba loo yaqaan *Doqonkii Ogaadeen Ahaa* waa tusaalaha – sida ay nala tahay – ugu habboon uguna muhiimsan ee la soo qaadan karo ee laga raadin karo waxa ay colaadaha qabaa'ilka reer-guuraaga Soomaaliyeed, waayadii hore, ka kici jireen. Waayo, marka hore, haddii aynu eegno ujeeddada dulucdeeda tiratiraynta iyo guubaabada dagaalka qabiil ah, waxay noogu muuqataa tix ay yartahay, haddii ay jiri kartoba, tix ku la mid ah heerka ay ka gaadhay ujeeddadeeda baaqa colaadda ah. Marka labaadna, inta maanso ururintan ka mid ah, waa tixda badanka sababaha toos iyo dadabba, u keeni jirey colaadihii qabaa'ilka laga wada helayo ee ku wada talax-tagtay. Dhinaca kalena, waxay tixdani ina tusaysaa in aanay maansadu sideeda ugu sabab noqon jirin dagaalka qabaa'ilka; waayo haddii kale tixdan baa keeni lahayd dagaal uu dhiig badani ku daato; waana mid aan dhicin taasi.

Tixdan tafaasiisha tusaalayaalsha ku jira ee tilmaamaya sabab iyo wacaal kaleba, wixii qabaa'ilku awel iskaga hor iman jireen, halkan uguma weel-hayno. Sidaas awgeed, innaga oo meel kale kaga hadli doonna dhismaha bulshadaas iyo dhaqankeedii soojireenka ahaa, waxaannu halkan si isdaba-taxan u soo bandhigney tusaalayaalsha maanseed ee ina tusaya sugnaanta afarta sababood ee aynu u soo dhigney in ay colaaddu ka dhalan jirtey.

Inkasta oo aynu hore u muujinney inay sababta koowaad ee colaadda qabaa'ilku ahayd dhiigga (dilka), haddana tixdan Cali-Dhuux, tusaalayaasha sababaha colaadda ee aannu ka soo saarray waxaannu u soo hormarinney daaqa iyo ceelka; waayo waa qodobka u culus ee uu maansoyahanku u adeegsanayo ulajeeddada uu maansadan ka leeyahay.

Baydka u horreeya ee Cali Aadan 'Cali-Dhuux' ku furayo tixdaas ayaa duudduub inoo tusaysa sababta dhulka daaqa iyo ceelka biyaha ee uu ku dhiidhi-gelinayo qabiilka uu la hadlaayo. Wuxuu baydkaasi ku odhanayaa:

Doqonkii Ogaadeen ahaa Doollo laga qaadye

Doollo waa dhul ballaadhan oo biyo iyo baadba, dad iyo xoolo badan qaada, hayeeshee gabayaaga Cali-Dhuux, marka uu ilaa xadkaas buunbuuninayo mushkilad aan jirin, ama haddii kale aan ahayn wax weyn oo laba qabiil isku dilaan, ulajeeddadiisu waa in dagaal dhaco.

Waxaa ku xiga baydkaas guud-marta ah:

Loo diid Danood iyo hadduu degi lahaa Ciide
Niman baa dalkoodiyo xukuma labada daaroode
Daratoole iyo Faafan oo wada duraabaaya
Deegaanta Haradii ku taal daaqi ma hayaane

Darar kagama maalaan Cammuud diiqa iyo xoore

Ceelasha uu tirinayo ee uu Cali-Dhuux u adeegsanayo sabab colaadeed waxaa ka mid ah Wardheer, Dixda Qarandi, Dixda Reygaleed, Gargaar, Doox, Dul iyo Faafan iyo kuwo kale. Sadarrada uu ku soo qaadayo rag la laayey waxaa ka mid ah:

Dadka waa la wada leynayee wow darreydeene
Dubbihii ku dhacay Bah Ina Cali doogta weli haysa
Waa waxay la dabandeebayaan dakharadoodiiye

Ina Raabbi waa tii la diley waana Reer Dalale
Dumar kuma sagootiyin kuwii dahay ugaaskiiye
Dan baa tidhiye lama duudsiyeen diricii dheeraaye

Sababta geela oo uu gabayaagani iyadana aad u rux-ruxayo waxaa u tusaale ah sadarradan odhanaya:

Daahyaale geelii la heley waa kan Deyr dhalaye
Duudweyn ma jiro Haaman iyo Daba-Cadaadeede
Derrinkii, Afkii Daad-Madheedh kama dareershaane
Dahab waa tan iyo qaalmihii deyr cadka ahaaye
Dafuf quruxsanleeyey ma foga dalawadiiniiye
Danbarkiiisu weydiin uraa waana dabataane
Iyadoo dil-diliihii bishiyo dacashi haaneed leh
Oo wada dunuunucabayuu idin dul joogaaye

Sayid Maxamed Cabdille Xasan tixda uu ururintan ku leeyahay, oo aannu u doorray halku-dhegga *Cabdillaahi Waxa Loo Qudhjaray* dulucdeeda tiratiraynta qabiilo ah waxaa muujinayay sadarradan soo socda ee ka warramaya dilka nin la odhan jirey Cabdillaahi oo aan loo aarin. Isagoo dhalliil culus iyo dhaleecoba dusha ka saaraya qolada ninkaasi ka dhashay wuxuu leeyahay:

Cabdullaahi waxa loo qudh jaray waa qabiil li'iye
Qoon adag hadduu leeyahoon loo quturi haynnin
Qooq laguma toogteen ninkii qaaliga ahaaye
Qarqarada jinaadkii dhurwaa kuma quraacdeene

Laga bilaabo sadarradaas ilaa tixda dhammaadkeeda sababta uu gabayaagu lulaayo ee uu qolada uu u dan-leeyahay ku dagaal-gelinayaa waa dilka ninkaasi.

Xarbi Ismaaciil oo ururintan ku leh laba tixood, isaguna wuxuu sugayaa sababta geela. Tixda hore oo calaacal iyo canaanba ah waxay ku saabsan tahay geel laga dhacay qolada uu ka dhashay oo lagala guryo-hoyday iyadoon lagu diririn. Sadarradan aannu ka soo qaadannay tixdaasi waxay

ina tusayaan ahmiyadda geela ee ka dhigtey sabab lagu dagaallamo:

Sida qaylo beel kale timi waad barbariseene
Basarka caydhu leedahay nin ogi kama baqeen geele
Ba'ayeyda naaguhuna saw idinma beer qaaddo

Tixdiisa labaad oo ah tix guul-ku-faan ah, wuxuu Xarbi Ismaaciil tiriyey ka dib markii uu reer-tolkii jebiyey weerar ay isla qoladii hore, mar kale ku soo celiyeen. Dhawrkan bayd ee aannu tixdaas ka la soo baxnay waxay tilmaamayaan sababta geela ee ay qabaa'ilka xoola-dhaqatada Soomaaliyeed, waayadii hore, iskaga hor-iman jireen ee ay ku diriri jireen:

Iyadoo badhkeed gu'ga dhaloo baal-casaa wadata
Barqinkii hadday weerareen bahalihii waashey
Kamay baqane beerkay rasaas ugu balaadsheene
Boqol bay kob wada jiiifiyeen boobtadii hore'e
Ku bigaace Reer Sugullihii badhida weynaaye

Faarax Nuurna tixdiisa aannu halkan ku soo qornay, u lana baxnay *Sardan* iyada oo ay guud ahaanteedba ku saabsan tahay sababta geela, waxaynu, tusaale ahaan, halkan ku soo qaadaynaa saddexda bayd ee sida tooska ah uga marag-kacaya sababta geela:

Sinji iyo ab baa nagu ogaa sabada mayd yaalle
Sibreheeda waa oolli jirey soobir qaawaniye
Meeshii saqaafkeedu maro sababi waa taale

Dhinaca sheekooyinka marka aynu jalleecno, sheekada *Adduun I Qatal* oo ah ta sheekooyinka halkan ku qoran u mudan, ma ahayn sababta colaadda iyo dagaallada badan ee dhacay qabaalka la jebiyey. Sababta qabaalka waxaa ka dhashay isqabashada iyo dirirta laba nin. Marar badan bay dhici jirtey wax qiime yar oo laba nin isku qabataa, sida qabaalkaas oo kale ama wax ka sii qiime yar, sida koor geel iyo wax la mid ah; loomana qaadan jirin, mana ay noqon jirin colaad laba qabiil. Colaadda labada qabiilo waxay ku xidhneyd natiijada isqabashada, haddii uu dil qudh-gooyo dhaco. Waxaase jirey wax bulshadaas dhaqankeeda ku qaayo weynaa oo sidiisa colaadda qabaa'ilku uga dhalan jirtey, waana waxyaalaha aynu halkan kaga soo hadlaynay ee ah geela, dumarka, daaqa iyo ceelka oo kale.

Hadad iyo dhammaantii sheekadan *Adduun I Qatal* dagaalka labada qabiil kama dhicin qabaalka la jebiyey⁷ ee wuxuu ka dhacay ninka la diley iyo magta la diidey.

7 Haddii uu dagaal laba qolo ka dhasho wax qiimihiisu yar yahay, waxay badiba ahaan jirtey, marka lagu daro ee la muujiyo, kibir iyo awood-sheegasho iyo quudhsi iwm taasoo uu qabiilka lagu la kacaa ka xigi jirey dagaal.

Haddii kuwaas aynu soo sheegney noqdaan wixii toos u sababeeyey colaadihii iyo dagaalladdii kooxihii qabiilooyinka reer-guuraaga Soomaaliyeed, maxaa la odhan karaa mushkiladda Soomaalida maanta? Haddii wax kasta oo kaleba la isku khilaafo, laguma kala baydhi karo – sida ay nala tahay – in aanay colaadahan iyo dagaallada waayadan Soomaali ku baahay kuna raagay, ahayn geel, daaq, ceel iyo sababihii ay bulshadii soo jireenka ahayd iskaga hor-iman jirtey. Si kastaba ha ahaatee, kala-duwanaanshaha halkan laga oddorosi karayaa wuxuu ka hor-imanayaa uuna dood adag ka hor-keenayaa aragtida colaadaha maanta kala mid dhigeysa ee u haysata wax aan sina kaga duwanayn colaadihii lagu yiqiinney soo jireenkii bulshadii qabaa'ilka reer-guuraaga Soomaaliyeed.

DHISMAMA BULSHADA IYO DHAQANKA

Intaas ka dib, waxaynu hadda u gudbaynaa saamaynta dhismaha bulsho-siyaasadeed iyo dhaqankii soo-jireenka ahaa ee reer guuraaga xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed ku lahaa arrinta colaadda iyo nabadda bulshadaas iyada ah. Runtiina kaalintaasi isla sida sababaha tooska ah ee aynu kor ku soo faahfaahinnay oo kale ayey suugaantani uga muuqaal celineysaa. Hayeeshee bal aynu horta waxyar iska tusno dhismaha siyaasadeed ee bulshada aynu ka hadlayno iyo dhaqankeeda soo jireenka ah.

Sida laga warqabo, ee badiba ay isku raacsan yihiin dadka aqoonta cilmiyeed u leh soojireenkii bulshada soomaalida, kooxaha qabaa'ilka, raacatada Soomaaliyeed waxa raad weyn ku leh dhulka saxaraha xiga (*semi-desert*) ee ay biyaha iyo baadkuba ku yar yihiin. Ku noolaanshaha dhulkaasi wuxuu lama huraan ka dhigey habka xoolo-dhaqashada ku dhisan qaabka reer-guuraanimada; wuxuuna mudnaan iyo qiimo weyn u yeeley geela oo noqday meersiga xoolaad ee loogu jecel yahay deegaankaas (D.D. Laitin and Said Samatar p. 28⁸) sababtoo ah waa ka in badan u adkaysan karaya dabecada dhulkaasi kana samato-bixi karaya sannadaha abaareed ee deegaankaas ku soo noqnoqodka badan.

Sababta reer-guuraanimada waxa ka dhashay bulsho aan ku abtirsannin meel gaar ah oo ay si joogto ah ugu sugan tahay, haybteeda siyaasadeedna aanay ahayn magaca dhulka ay deggan tahay sida 'Reer Meel Hebla' oo kale. Waayo, aasaaska ururkooda iyo isku xidhnaanta noloshooda bulsho ahaaneed ayaan ahayn dhul ka dhexeeya oo la isugu imanayo sida loogu wada intifaacayo. Taas beddelkeeda, aasaaska ugu horreyn kulmiyaa ee uu isu-taggooda bulsheed ka unkamaa wuxuu noqday magaca adooga dhalasha ahaan, loogu wada abtirsado. Magaca siyaasadeed ee wadarta kooxeedna wuxuu noqday magaca abtirsiinta (badiba magaca adooga) la

8 D.D. Laitin and Said Sh. Samatar, *Somalia: Nation in Search of a State*, Westview Press, London, 1987.

wadaago. Waxaa halkaas ka abuurmay soo-jireenka bulshada Soomaaliyeed ee kooxaha qolo-qolada hoos ugu sii qaybsama jilib-jilib, jibsino iyo reero ay mid waliba abtirsiinta hoose ee xigtinnimo gooni isugu sii xidhantay, una leedahay taladeeda iyo yeelkeeda wadareed (*collective decision and action*).

Habka dhaqaalaha iyo bulshada reerguuraannimo iyo qaabka dhismaha siyaasadeed ee abtirsiinta la wadaago ku dhisani waxay isku gudbeen awood suldad dhexe iyo hab-maamul dawladeed ka dhex dhisma kooxaha qolo-qolada ah oo si madaxbannaani ah u kora una noqda quwad kooxaha abtirsiin wadaagta ah xukumi karta; waxayna keentey in hannaanka dawladdnimo uu taariikhda dadka Soomaalida, ku noqdo wax weligiiba debedda ka soo gala oo ay quwado shisheeye la yimaadaan (I.M. Lewis eeg).

Deegaanka dhulka khayraadka kooban, habka xoolo-dhaqashada reerguuraannimo iyo kooxaha bulsho-siyaasadeed ee ay abtirsiintu isu geysa, isla markiina kala qaybiso iyo weliba xaaladda bulshada dawlad la'aaneed, intuba waxay yeedhinayaan loollan, iska-horimaad iyo colaad joogto ah oo ka dhacaysa khayraadka daaqa iyo biyaha yar oo ay kooxaha kala qolada ah, mid waliba rabto in ay bursato, sidii aynu meel kale ku soo carrabbaabnay (I.M. Lewis eeg).

Waayahaas bulsho-siyaasadeed waxay khasbeen dhaqan gaar ah oo meel weyn kaga jira midnimada kooxda reer-hebelnimo iyo xidhiidhka wada-dhaqanka (*interaction*) kooxaha kala qolada ah. Colaadda iyo nabaddu, haddaba dhaqankaas ayey meel laf-dhabar ah kaga jiraan.

Qiyamta dhaqanka bulshadaas waxaa xuddun dhexaad u ahaa xidhiidhka tolliimo ee ku dhisan hiillada tolliimo. Runtiina marka aynu hoos u sii dhuganno dhaqanka bulsheed ee ku saabsan xidhiidhka isgarabsiga iyo iskaashiga iyo wax-wadaqabsiga ka dhexeeya kooxda abtirsiin-wadaagta ah, waxaynu ku arkaynaa dulucda ulajeeddada hiillada tolliimo ee qiimiga aad u weyn ku leh kooxda iyada ah dhexdeeda; weedhaha badiba ku soo arooray macnaha iyo qiimiga xidhiidhka tolliimo waxa ka mid ah: 'waxa tol loo yahay in wax la is taro'. Hayeeshee, marka ay dagaalka tahay arrintu way ka sii xag jirtaa! Waayo, qof kastaba, gaar ahaan, nin kasta oo rag ah oo gaashaanqaad caafimaad qaba ahi dagaalka hiillada tolliimo wuxuu ku ahaa waajib culus oo aan sina looga cafiyeynin, wuxuuna ahaa dagaalkaasi waxa uu ninku ku mutaysto ammaan iyo magac sharfan marka uu kaalintiisa si habboon u guto ama magac-xumada ugu ba'ani ka raacdo haddii uu muujin waayo dagaalyahannimo.

Midda kalena xidhiidhka tolliimo wuxuu lahaa quwad akhlaaqi ah, markii loo baahdana, maaddi ah oo qofka qabata, taasoo aannu qofna xeerkeeda ka bixi karin kana hor iman karin. Waa halka ay u dhacayso odhaah-murtiyeedda tidhaahda: 'Nin waalan tolkii baa u miyir-qaba' iyo maahmaahda tidhaahda: 'Fiqi tolkii kama janno tago', waxa kale oo ay odhan jireen: 'Nin waliba wixii tolkii yahay buu yahay'. Macnuhu waxa weeye

wax kasta oo uu rumaysan yahay ama uu fikrad iyo aragti gaar ah yeesho mowqifka reer-tolkii baa ku khasab ah in uu raaco; waayo, tiisa shakhsiga ah marna loo tirin maayo.

Sababtu waxa weeye, tolku wuxuu ahaa wadarta bulsheed ee uu qofku noloshiisa dhinac walba la kaashado ee dhibaato kasta oo ku timaadda uu ula irkado; nabadgelyada naftiisa, dadkiisa iyo duunyadiisubana ay, ta Alle ka dib, ku tiirsan yihiin. Waxa kale oo uu u ahaa xayndaabka wada-dhaqanka (*social interaction*) iyo wada xidhiidhka bulshada uu ka tirsan yahay una tirsan yahay ee uu kaalintiisa ka qaato, kartidiisana ka dhex muujin karo sidaas darteedna magac iyo martabo u qalanta ku yeelan karo dhexdeeda iyo debeddeedaba; waayo, nin waliba qadderinta uu reer-tolkii ku leeyahay ayey dadka kalena ku qiimeyn jireen. Waxa kale oo uu tolku ahaa waxa aqoonsiga is-ahaanta qofeed (*personal identity*) iyo bulsheed iyo siyaasadeedba (*social and political identity*) sugaya laguna aqoonsado. Waxaa lagula dhaqmi jirey oo reerkiisa lagu martiyi jirey oo baadida loogu celin jirey, oo lagula xididi jirey magaca qolada uu ka dhashay iyo haybadda ay qabaa'ilka dhexdooda ku leedahay. Halkaas ayey ka soo jeeddaa awoodda xoogga badan ee ay bulshada-tolliimo ku lahayd fal-dhaqanka qof kasta oo iyada ka tirsan.

Kooxda isku qolada ahi ma ahayn oo qudh ah abtirsiiin-wadaag ee isla markiina waxay ahayd xeer-wadaag. Xeerkaasi ma ahayn sharci qoran ee wuxuu ahaa heshiis dhaqameed ku saabsan xidhiidhka iskaashiga, isu-hiillinta iyo wadajirka kooxda abtirsiiin-wadaagta ah gudaheeda ka dhexeeya iyo, isla markaana, xidhiidhka kooxaha kala qolada ah ee daaqa iyo ceelka, isugu yimaada, colaad iyo nabadna ku kulma.

Qolo kasta oo magac Reer-Hebel sheegata waxaa isku xidha ee mawqif iyo ficil mideysan u yeela waxaa u horreeyey, uguna mudnaa, colaadda iyaga iyo qolo kale ka dhaxaysa; waxay isku darsadaan oo ay si buuxda iyo si isku mid ah u wada tirsadaan waxaa u mudnaa, cududdooda dagaalka. Sidaas darteed kooxda qabiilo marka laga eego dhinaca xeer-dhaqameedka isku xidhaya⁹ waxa la odhan karaa, waa bulsho isu bahaysatay dagaal ay la gasho kooxo qabiilooyin kale oo ay geela kala dhacaan, daaqana kala riixanayaan.

Xidhiidhka kooxaha kala qolada ah ka dhexeeyaa wuxuu ku dhisnaa oo colaaddooda iyo nabaddoodaba kaalin kama dambeys ah ka geli jirey xoogga dagaalka ee qolo waliba leedahay, taasoo ahayd faraha ama tirada ragga gaashaanqaadka ah iyo saanadda dagaalka ee qolo waliba heli karto. Quwadda qabiillo waxay ka mid ahayd waxyaabaha qaayaha weyn leh ee cid waliba jeceshahay in ay yeelato; waxaa loo arkayey, ayna ahayd runtii, waxa qudh ah ee suuro-geliya in qoladu hanato dhulka daaqeeda iyo ceelka

9 I.M. Lewis wuxuu xeer-dhaqameedka qabiillada reer-guuraaga Soomaaliyeed ku shabbahay wax u dhigma fikraddii falsafadda taariikhda ee qarnigii 18aad ee Yurub, taasoo ahayd (*social contract*) (eeg I.M. Lewis, 1961, p. 3)

waraabkeeda iyo nabadgelyada xoolaheeda. Isla markaa haybadda qabiil kastaa ku leeyahay qabaa'ilka dhexdooda waxay ku xidhneyd culayska quwaddiisa dagaal.

Waxyaabaha arrintaas ka dhashay waxa ka mid ah waxaynu ku magacaabi karno xaq, xoogga ama xaq-siinta xoogga (*the right of force*). Waxaannu uga jeednaa in xuquuqda cid kasta loo oggol yahay noqoto intii xooggeedu u gooyo. Sidaas darteed, xoolaha la dhaqdo waxa lagu xero-gashanayey oo lagu xalaashanayey waxay ahayd xoogga tolka; marka la kala dhacana waxa lagu soo ceshanayey xoogga tolka; haddii la kala garqaatana waxay sababtu ahayd iyadoo dhinacyada is hayay ay quwad ahaan isu aqoonsadeen isuna qaddariyeen. Waxay laba qolo xeer dhigan jireen, kuna wada socon jireen qodobada ay ku heshiyeen, markii ay quwaddoodu is celiso ee isu dhiganto. Haddiise uu miisaankaasi dhaco oo uu dhinac u ciiro ayna laba qolo oo isku deegaan ahi kala quwad bataan, sababtu wax kasta ha ahaatee, istixgelintii iyo nabaddii dhexdoodu way wiiqmi jirtey.

Arrintani waxay keeni jirtey in qolo waliba xiisayso in ay qabaa'ilka kale u muujiso xooggeeda iyo dagaalyahannimadeeda; taasina waxay keenaysay in dagaalku mar walba si fudud uga dhex dhaco qabaa'ilka dhexdooda; waayo, waxay rumaysnaayeen in aan dhiig, dhaqan iyo dhaqaale toona loo nabad gelineyn haddaan xooggooda iyo dagaalkooda wax laga arag. Waa meesha uu u dhacayo hogo-tusaalaha maahmaahda tidhaahda: 'Nin aan warankaagu gelin weedhaadu ma gasho'.

Bulshadaas midnimadeeda dhabta ahi waxay aad iyo aad uga muuqan jirtey xaaladda ay dagaal kula jirto qolo kale, arrin kasta oo kaleba way dhici jirtey in dooddeedu dheeraato, murankeeduna bato, taladeedana hore loogu heshiin waayo, ta dagaalkase, sida badan laguma raagi jirin, lagumana kala baydh-baydhi jirin. Sidaas darteed colaadda iyo nabadda, haddii la is barbar dhigo, waxay labaduba ka mid ahaayeen, kaalin muhiim ahna ku lahaayeen habka qiyamta ama qaayo-soorka dhaqanka bulshada aynu ka hadlayno. Hayeeshee labada midba heer buu kaga jirey habkaas. Nabaddu waxay ahayd himilada joogtada ah iyo hirashada hiyiga dadka. Waxay ahayd samaanta nolosha ee loo hadal-haynta badan yahay; bartii laba ku kulantana horta lays weyddiiyo. Duruufta bulshadaas haybta abtirsiinta qabiilo ku kala qaybsan, ee daaqa iyo biyaha dhulka qarfada ah u badan ku hardamaysa, awood suldad habaysan oo ka dhaxaysaana aanay kala hagaynin, nabaddu waxay noqotay himilo wacan oo ay sugiddeeda iyo joogteynteedu adag yihiin. Ficilka dagaalku sidaas darteed ma ahayn, sida la moodo, wax si walba uga soo horjeeda nabadda, ama burinteeda looga jeedo. Bal wuxuu qolo kastaba u ahaa tab iyo farsamo ay nabaddeeda gaar ahaaneed ku xaqiijineyso.

Bulshadaa tolliimo dadku, gaar ahaan raggu, siyaalo badan buu ku kala martabo roonaa; tusaale ahaan, waxyaabaha lagu kasban jirey xurmada bulshada waxaa ka mid ahaa, doodda, deeqda, dulqaadka, garashada

iyo aqoonta caqliga wacan, talada iyo garsoorka caddaaladda ah; cilmiga diineed, iwm; hayeeshee haddana intaas oo dhan laguma heli jirin magaca iyo martabada geesiga tolkii u dagaallama ee ka libin-keena uu reer-tolkii ku lahaa.

Tusaale ahaan, wuxuu raggu, guud ahaanba, u qaybsanaa laba qaybood oo ku kala magacownaa wadaad iyo waranle. Wadaad kaalinta uu bulshadiisa ku lahaa, waxay ahayd dhinaca baahiyaha diinta islaamka ku saabsan, arrimahase siyaasadeed – mashaakilka xidhiidhka qabaa'ilka iyo reeraha ka dhasha – kaalinta wadaad lagu ogyahay, ee laga fili jirey loona aqoonsan jirey waxay ahayd nabadda oo uu dadka ku wacdiyo; tirtirsiga colaadeed iyo gelidda dagaalkase wadaaddada laguma jecleyn, oo magac iyo martoba bulsheed kuma heli jirin, bal way ku waayi jireen (eeg sheekada *Aadan Jugle* ee qoraalkan ku jirta). Waranlaha kaalintiisu, sida magaca laftiisa laga dheegan karo, wuxuu ahaa dagaalka. Nin kasta oo gaashaan-qaad ah, haddii aanu ahayn wadaad diinta loogu noqdo, ama ahayn naafo laxaad la', ama nin gabow la tamar gabay, kaalintiisa koowaad ee uu reer-tolkiis kaga heli jirey ammaanta u badan, magaca iyo haybadda u weyn, ama ceebta iyo dheg-xumada ugu darani ka raaci jirtey, waxay ahayd dirirta. Guud ahaanna, waxaynu odhan karnaa, bulshadaas, qabaa'ilka abtirsiiinta wadaagta ee reer-guuraaga ahayd, wadaadku xuquuqda siyaasadeed lama sinneyn waranlaha; wadaadnimadana laguma kasban jirin darajada iyo awoodda (*authority*) siyaasadeed ee dagaalka (kaalinta waranlennimo) lagu heli jirey.

Arrin kale oo dhaqanka bulshadaasi lahaa, oo iyana colaadda qabaa'ilkaasi saameynteeda ku lahayd waa dhaqanka mas'uuliyadda wadareed ee uu xeerka cilaqaadka qabaa'ilkaasi ku dhisnaa. Ficilka kelida qofeed ma lahayn mas'uuliyad isaga oo qudh ah ku kooban, wixii ficilkiisaa ka iman karana kelidiis looma raacayn; xataa sida badan, isaga oo hebel ah looma celin jirin falkiisa, waxay u badneyd in la yidhaahdo: 'Reer-Hebel baa sidaa yeelay, ama waxaas falay'. Waliba marka ay tahay dhibaato cid loo geystey, inkasta ha leegaatee, xeerka rasmi ahaan loogu wada dhaqmayey wuxuu ahaa in loo raaco wadarta qabiilka abtirsiiinta wadaagta ee xeerna isku xidho (eeg I.M Lewis, 1961, p. 242). Xaaladdaasi dabcan, waa mid kelida qofeed ka dul-qaadaysa mas'uuliyada iyo natiijada ciqaabta falkiisa, taasoo, sida muuqata, fududaynaysay colaad wax yar ka kacda oo aan si hawl yar mar walba looga hortegi karin.

Waxaa kale oo dhaqanka colaadda dhiirri-geliya ee bulshadaasi lahayd, ka mid ahaa dhaca geela oo habka qiyamta bulshadaasi ammaan ku ahaa. Inkasta oo ay taasi ka soo horjeeddo mowqifka caqiidada diinta Islaamka ee ay dadkaasi si buuxda u aaminsanaayeen, ayna runtii dhaca geela, odhan jireen, waa xaaraan, haddana dhaqankooda ay ficil ahaan ugu socon jireen taas wuu ka soo horjeedey; waayo, dhaca geelu ma ahayn fal laga yaq-yaqsoodo, ama ciddii gasha lagu ceebeeyo, bal taas daaye, cududda tolka

ayaa isu urursan jirtey, oo dagaal iyo xoog baa loogu badheedhi jirey oo lagu soo kaxaysan jirey; nin kastaana taas nin rag ah (*hero*) buu ku ahaa oo waa lagu faani jirey. Qabaa'ilka dhexdooda, dhaca geelu qoladii ku guulaysata, bili iyo haybad lagu tixgeliyo ayuu u keeni jirey, qolada laga dhaco, haddii aanay soo dhacsannin oo lagala guryo-hoydo waxay ku noqon jirtey magac-xumo, iyo sabab loogu gabyo (eeg tixaha Cali-Dhuux, Faarax Nuur iyo Maxamuud Daallin). Sooyaalka suugaaneed siiba maansada, bulshadaas laga hayo oo ay ta halkan ku qorani tusaale dhab ah u tahay, waxay runtii ka marag kacaysaa arrintan iyada ah, waayo gebiga dulucdeeda ku saabsan geel la dhacay, waxa lagu arki karaa faan iyo ammaan, dhalliil iyo dhaleecayn, tirtirsi iyo gooddi iyo baaniso iwm; lamase helayo, cambaareyn ama dhaleeeyn iyo cebeeyn ku saabsan xaaraannimada falka dhaca geela oo loo jeedinayo cidda geela dhacday. Waxaa arrintan si toos ah u abbaaraysa tixda Faarax-Laanjeer ee ah *Ma Xayeesh Adhaan Dhacay* oo iyadu si qayaxan ugu doodaysa in aanu dhaca geelu xaaraan ahayn, aanuna la mid ahayn dhaca xoolaha kale. Inkasta oo laga yaabo in aan caqiido ahaan, cidina Faarax taas ugu raacin, haddana ficilka lagu dhaqmayey, sida uu tixdaas ku sheegey baa lagu tilmaami karaa.

NABADDA IYO DHAQANKEEDA

Ilaa hadda, waxaynu si faahfaahsan uga soo hadallay wixii sababo toos ah u noqon jiray colaadihii ay kooxaha qabaa'ilka xoola-dhaqatada Soomaaliyeed, siiba reer-guuraageedu; waageedii hore iskaga horiman jireen iyo wacaalayaashii la xidhiidhay dhismaha bulshadaas iyo dhaqankeeda ee iyaguna siyaalo kale ugu raad lahaa colaaddaha bulshadaas iyada ah. Waxa hadda la isweydiin karaa wixii nabaddana sidaas oo kale sabab toos ah ama shuruud kale u ahaa ee keeni jirey.

Hayeeshee nabaddu, waxaynu odhan karnaa, ma laha sababo iyada ka baxsan oo debedda kaga yimaadda; waayo nabadda iyo nolosha ayaa ah laba isku xidhan oo aan la kala furi karin. Nabaddu waa shardiga ay ku sugmi karto nolol deggan oo si dabiici ah u taranta una samaysa horumarkeeda taariikheed. Isla mar ahaan, nabaddu waa himilada iyo hirashada wacan ee la wada jecel yahay. Sida aynu ka wada war qabno baahida nabadgelyada, rabitaankeeda iyo ficilka badbaadinteedu, (markii ay halis gasho), ama raadinteedu (marka la la' yahay), waa dhalan uu Alle ku abuuray noole kasta; keli-keli, kooxo iyo bulsho weynba fal-celinta badbaadinta noloshoodu marka halis la dareemo halkaas ayey ka soo jeeddaa.

Nabaddu, sidaas darteed, iyada ayaa sideeda u ah wax la rabo. Rabitaankeeda dhalanka ah ayaa ah quwad tamar gelisa (*dynamic force*) oo dhaqaajiya xoogga u hawlgalkeeda, qaab iyo farsamo kasta ha lahaadee, xataa hadday dagaal tahay.

Bulshada aynu ka hadlaynana, sidaas darteed, dhacdada heshiinteeda iyo nabad-qaadashadeedu ma lahayn sabab kale oo toos ah oo ka weyn dareenka baahida nabadeed ee dadka. Awoodda farsamo iyo hannaanka nabadda lagu raadin jireyna waxay ka daba iman jireen rabitaanka nabadda oo loo dhammaado. Bayd gabay ah oo uu leeyahay Faarax Nuur kana mid ah tixda aannu halkan uga magac dhigney *Kala-Quusasho* ayaa arrintan murtideeda soo ururinaysa; wuxuu yidhi:

Haddaan nabadda loo wada qasdiyin wayska qiil jabane

Waxyaalo Nabadda Caawiya

Hayeeshee sidee nabaddu ku iman jirtey?

Iyada oo sideeda nabaddu u ahayd lagama-maarmaan iyo wax wacan oo lagu hirto, sabab iyada debedda ka ahna aanu doon-doonkeedu u baahnayn, haddana soo-xero-gelinteedu waxay lahayd hab-dhaqan, farsamo iyo awood ka talisa oo hirgelisa.

Marka hore waxaa jirey oo ay bulshadaasi waageedii hore lahayd wax sahlaya soo celinta nabadda qabaa'ilka daaqa iyo ceelka biyaha ku kulma. Tusaale ahaan, colaadda iyo nabaddu qabaa'ilkaas xoolo-dhaqatada reer-guuraaga ahayd ma ahayn wax ka baxsan tartanka iyo loollanka ku saabsan khayraadka deegaanka ay qabaa'il ahaan ku wada noolaayeen iyo difaaca haybadda siyaasadeed ee kooxda qabiilo. Sidaas darteed dagaalka iyo nabaddu waxay ahaayeen wax si mawduuci ah (*objective*) uga dhasha geeddi-socodka xidhiidhka wada-noolaanshaha kooxahaas; waxayna ahaayeen laba qaab oo loogu maaro-doono iska hor-imaadka qabaa'ilkaas.

Marka labaadna, dagaalka iyo nabadda, labaduba waxay lahaayeen ujeedo cad oo uu qof waliba garanayo, reer-hebelna isku wada raacsan yihiin. Qolo waliba dagaalka ay qolo kale kula jirto, sababta keentey iyo ulajeeddada ay u la dagaallamayso iyo waxa ay dagaalka kaga joogsan karto ee ay heshiis nabadeed ku geli karto intuba waxay ahaayeen wax la isla yaqaan, isku si loo qiimeeyo, oo isku si loo wada danaynayo loona rabo; isla markaas waxay ahayd, wax dagaalkeeda iyo nabaddeeda isku xeer laga yahay oo tashigeeda iyo go'aankeeda la isku raaci karo oo midnimo lagu wada hirgelin karo.

Marka saddexaadna, dagaalkooda laftiisu in badan ula-jeedo nabadeed buu lahaa; waayo, waxaa badanaaba dhici jirtey, marka u horreysa ee wax dhacaan, in dhaqsaba dhiillo colaadeed kala dhex gasho labada qolo; ka dibna qolo kastaaba nabadgelyadeeda dad iyo xoolaba, ay waranka caaradiisa saarto. Marka ay colaaddu heerarka qaarkood gaadho ee nabadi durugto, waxgaradka beeshu waxay ku dagaal geli jireen, raggoodana ku hoggaamin jireen in nabadi ka dhalato dagaalka. Waxay u arkayeen in xanuunka dagaalku keenayo in nabadda loo hilloobo, ka dibna wada hadal la oggolaado iyo in lays qaddariyo. Markaas ka dib ayey suurogeli jirtey in

la isa-soo hor fadhiisto lana wada hadlo oo la heshiiyo lana kala gar-qaato oo laysu garaabo.

Sidaas darteed, waxa la odhan karaa, bulshadaas qabaa'ilka reer-guuraaga soocan ahayd, qolo walba nabaddeedu waxay in badan ku xidhneyd dagaalkeeda, fikrad ahaanna sidaas ayey rumaysnaayeen, oo waatii aynu maahmaahdeeda hore u soo sheegney.

Marka afraadna, haddii bulshadaas uu xoogga cududda dagaalku kaalinta kama dambeysta ah ka gali jirey xidhiidhka qabaa'ilka dhaxdooda, qolo kastana xuquuqda ay heli karto ee ay dhab ahaan u yeelan kartaa inta badan ku xidhneyd xooggeeda, waxay ku dhaqmi jireen oo ay nabadda salka ugu dhigi jireen habka isbahaysiga reeraha ama jibsinaha qabiilada, kuwooda laga tirada badan yahay oo inkasta oo aanay abtirsiiin gaar ahi isu keenin xeer mideeya wada geli jirey, sidaana ku noqon jirey xoog mid ah oo qolo magac leh ah, una dhigma xoogagga kale; ka dibna sidaas lagu tixgeliyo. Runtii, mar haddii aanu xidhiidhka wada dhalashada abtirsiiintu keenaynin kooxo is tiro le'eg, waxay bulshadaasi jideysatey habka isu-tagga gaashaanbuurta ah ee xeer-wadaagta ah, kaas oo ahaa hab lagu xaqiijinayo isu-dhiganka xoogga dagaalka ee qabaa'ilkaas; taas oo ay nabaddu u baahnayd.

Marka shanaadna, dhaqanka nabadeed ee bulshadaasi ku dhaqmi jirtey waqtiga dagaalka, waxaa ka mid ahaa dhaqanka xeerka biri-ma-geydada oo ahaa mid faraya in la xarrago dagaallamo oo dagaalka dhexdiisa guud ahaan laga dhawrsado falxumo dhammaanteed, sida kufsiga haweenka, ama guryaha oo la galo oo wixii hoos yaalla la gurto, iyo ta ugu muhiimsan, in la dhawro oo aan waxba loo geysan dadka biri-ma-geydada ah oo ay ka mid yihiin odayga taliya, culumada diinta, gabayaaga iyo dadka jilicsan ee aan dagaal geli karin sida dumarka, carruurta, naafada iyo dadka gabowga la tamar beelay iwm. (tafaasiil intaa ka badan ka eeg Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas 1997).

Dhaqankan sida muuqata waxaa loo jideystey oo looga dan lahaa in aanu dagaalku reebin raad-xumo iyo nabarro gocoshadoodu raagto oo nabadda waqtiga loo baahan yahay isku gudba. Sidaas darteed wuxuu dhaqankani u faa'iideynayey nabadaynta dambe ee beelaha isdilaya.

Ta noogu dambeysa ee aannu qodobkan kaga hadhayno waxa weeye: nabadda beelaha qabaa'ilka aynu ka hadlaynaa, waxay lahayd hab iyo dow loo raaco (*institution and norms*) iyo cid u hawl gasha oo kaalin-gudashadeeda laga filo, laguna qadderiyo. Tusaale ahaan, wixii colaaddu ka kacday, wixii ka dhashay ee dhibaato ah dhinac walba ha ka jirtee, giddiba waa la soo bandhigi jirey; si ballaadhan iyo caddaanna waa looga wada garrami jirey; wax ku jirana lagama tagi jirin, wax aan ku jirinna laguma dari jirin; waxayna odhan jireen 'milil dusha lagama dhayo'. Aakhirkana waxay kaga heshiin jireen wixii xeer hore uga yiilley; xaajadii ugub ah ee dhacdadeedu ku cusub tahayna caqligooda ayey la kaashan jireen.

Nabaddu ma ahayn wax cidi gaar u wadato ee waxa ay ahayd wax ka dhexeeya oo laga sugo inta wadarta dirirta isugu hiilineysa. Sidaas darteed waa lagu raagi jirey, lagamana hadhi jirin ilaa rabitaankeeda loo dhammaanayo.

Waxa daymo gaar ah mudan, sida fudud ee ay kooxda qabiilo dagaalka u wada geli jirtey xataa iyada oo aan ka wada tashannin, nin raba iyo nin aan rabinna la isweydiinnin. Sidaas oo kale nabaddu ma ahayn; waxayna qaadan jirtey waqti dheer iyo dad badan oo hawlo badan u gala sidii loo abuuri lahaa dareen iyo rabitaan guud oo nabadda ah. Dagaalku iyada oo aan dadku qof iyo laba ama dhawr qof mooyee la dooneyn ayuu dhici jirey, waayo, waxaa ku fillaa qaylo soo yeedha oo keliya ka dibna gurmadka fadalka dheer leh ayaa xigey; nabadduse ilaa lagu wada qanco ama badanka dadku ku wada qanco xoogga reerkuna isku raaco ma soo xero-geli jirin .

Sidaas darteed, waxay nabadeynta beelaha ku raadiyaan waxa ka mid ahaa uguna mudnaa habka ergada. Ergadu wejiyo kala duwan bay lahayd. Mar waxay ahaan jirtey ergo ka socota oo ay isu diraan labada qolo ee dhibaatadu dhex taal. Ergadani fursaddeeda ugu habboon ee badiba la diri jirey waxay ahayd bilowga colaadda. Tusaale ahaan, marka dhibaatada u horreysa ee colaadi ka dhalan kartaa dhacdo haddii aanay jirin utunno hore oo ladh siyaado ah kiciyaa, waxaa dhici jirtey in labada dhinac midkood ergo nabadeed diro. Ergada noocan ahi waxay ku sii gaar ahayd oo inta badan isu diri jirey jilibada iyo jibsinaha isku daaqa iyo ceelka ah ayna ka dhaxayso abtirsiinta guud.

Labada sheeko ee *Adduun I Qatal* iyo *Suldaanow Kuma Caayin* labaduba waxay si wacan inoo tusayaan kaalinta ka hortagga dagaalka iyo nabadaynta ee ay lahayd ergada ay isu diri jireen beelaha degaanka iyo abtirsiinta wadaagaa. Sheekada hore ee *Adduun I Qatal* waxay dhibaatadu dhex martay laba reer oo isku qolo ah oo degaan qudha ku wada nool meel dheerna aanu colkoodu iskaga soo duulaynin. Sidaas darteed, markiiba ergadaa dhaqaaqday oo labada reer isaga dab qaaday waxaana lagu guulaystey in shir loo dhan yahay lagu kulmo laguna heshiiyo; magtii ninkii dhintay oo hali ka dhiman tahayna goobtaa la soo tubo.

Haddii uu heshiiskaasi socon waayo oo nabadi ka dhalan waydey, waxay ka marag kacaysaa bulshadaas qabaa'ilka reer-guuraaga ahayd ilaa xadka la-yaabka leh ee uu shididda dabka colaadeed iyo ficilka dagaalku ka sahlanaa kana dhowaa nabadda iyo ka hortaga dagaalka. Heshiiskii ay waxgaradka labada reer ku hawshoodeen ee si buuxda oo labada reerba u dhan yihiin la isula qaatey waxaa buriyey oo colaaddiina meeshii hore meel ka fog geeyey nin keli ah oo diiday inuu bixiyo hashii kaga soo hagaagtay magtii ninkii uu wiilkiisu dilay.

Ergada kale ee taas ka duwani waxay ahaan jirtey tu badanaaba ka socota qolo ama qolooyin saddexaad oo abtirsiin ahaan la siman labada qolo ee diriraya. Waliba si gaar ah waxay ergadani muhiim noqon jirtey

haddii arrintu faraha ka baxdo ama labada qolo ee is hayaa dhexdooda ka heshiin kari waayaan.

Si kastaba ha ahaatee reeraha kale ma daawan jirin dagaalka agtooda ka dhacaya ee waxay geli jireen ergo aan baaqa nabadda ka nasan. Marka ay nabaddu soo dhowaatana way isugu yeedhi jireen oo u shir qaban jireen weyna dhexdhexaadin jireen; sidaas ayeyna beelaha kale kaalin lagama maarmaan ah uga qaadan jireen nabadeynta labada qolo ee dagaalladu dhex maraan.¹⁰

Marka nabadda, mabda' ahaan iyo mowqif ahaanba, loo soo wada debco ee ay taladeedu qolo walba ka soo ururto, markan waxaa la raaci jirey hab-dhaqankii shirkii geedka ay odayaasha beeluhu isugu iman jireen, halkaas oo wixii dhacay iyo wixii ka dhashayba lagaga doodi jirey, habkaas ayaa mushkiladda colaadda loo daaweyn jirey nabaddana lagu soo celin jirey.

Hase ahaatee, sidii aynu hore u nidhi bulshadaasi waxay ka koobnayd kooxo kala wada madaxbannaan oo ku loollamaya khayraadka kooban ee degaankooda, aanayna dhex joogin quwad ka wada xoog roon oo dammaanad qaadda hirgelinta amniga dhexdooda.

Iyadoo sidaas ah haddana bulshadaas dhaqankeedu kama madhneyn waxyaalo nabadda xejiya intii waayaheedu ay u suuro geliyaan.

Ugu horreynta heshiiska nabadeed ee la wada galaa wuxuu dhab u hirgeli jirey marka qolo walba rabitaanka nabaddu ka dhab tahay. Waayo, sida badan, cidina cid ma khasbeynin ee marka la wada rabo nabadda ayuun baa loo wada hoggaansami jirey; inta ka horreysana waxaa socon jirey dhaqdhaqaaqa nabad-doonka iyo ergada, haddii kale oo aanu rabitaanka nabaddu heerkaas gaadhin heshiisku wuu adkaan jirey, haddii la gaadhana ma hirgeli jirin.

Joogteynta nabadda la wada gaadhay waxaa wax badan suurogelinayey oo lagu tilmaami karaa awooddii ay beelahaas nabaddoodu ku tiirsaneyd arrimahan soo socda.

Xidhiidhka Telliimo

Tolku sidii aynu soo sheegney wuxuu ahaa quwadda aanu qofna dhaafi karin ee uu go'aankeeda u hoggaansamo, haddii uu rabo iyo haddii kaleba. Haddii uu jiro nin ama dhowr nin oo aan ku qancin waxa tolkood isku raacay ee heshiis ku galay, waa lala hadli jirey oo waxaa la hoga-tusaalayn jirey danta ku jirta go'aanka tolku isku raacay. Ninkii diida, haddii laga baqo in uu ku kaco fal nabadda wax yeelaya, xoog iyo farsamo kaleba waa lagu qaban jirey; mar walbana waxaa lagu khasbanaa go'aanka tolku isku raaco. Waayo, jiritaanka qofka iyo danihiisu dhinac walba waxay ku xidhnayd tolkii; mana uu helayn meel uu tolkii uga kacayo oo uu ka helayo ilaalinta

¹⁰ Haseyeeshee taas ugama jeedno inaan beelaha kale dhibaato colaada sii hurisaa uga iman jirin waayo waxaa jirtey xaalado badan oo gabayo isku dira laga soo tiriyoo qabaa'ilka kale dhexdooda.

naftiisa, maalkiisa iyo xurmada qof ahaantiisa. Sidaas awgeed, maadaama uu tolku ahaa waxaan laga maarmin waa loo wada hoggaansami jirey.

Isla sida uu ugu dhago-nuglaa qayla-dhaanta dagaalka iyo muusanowga tolkii ee uu naftiisa ugu hurayey, ayuu aakhirka qof waliba, heshiiska nabadeynta ee tolkii galana u aqbalayey. Halkan ayey ka muuqataa ulajeeddada halhayskan odhanaya: ‘Nin waliba wixii reer-tolkii yahay ayuu yahay’. Waxaa laga wadaa in aan ninna ka bixi karin ama gooni ka noqon kareynin aragtida uu tolkii qabo iyo mowqifka uu qaato; waayo, xataa haddii uu ta tolkii wax ka duwan qabo, looma tirinayo, waxna laga soo qaadi maayo. Wixii tolkiis yahay kama baxsanayo. Taas ayaa nin walba ku khasbaysey in uu tolkii raaco.

Ilaalinta Magaca Gobannimo

Soo-jireenkii bulshada xoolo-raacatada Soomaaliyeed waxay aad u qaayo-siin jirtey sharafta magaca qabiilo taas oo saamayn aad u weyn ku lahayd anshaxa uu qof waliba ku dhaqmayo ee dadka kale ka arkayo. Goob kasta iyo xaalad kasta oo lagu kulmo, qofka bulshadaas tolliimo ka tirsan, una tirsan, waxaa duunkiisa garasho iyo damiirkiisaba aad ugu weynaa oo fal-dhaqankiisa hagaayey: ‘tolkaa dheg-xumo ka ilaali iyo gobannimada qolada aad ka dhalatay dhawr’.

Ereyga ‘gobannimo’ dhaqankii iyo hiddihii soo-jireenka ahaa ee bulshada reer-guuraaga Soomaaliyeed, ulajeeddooyin badan buu ku lahaa oo loo isticmaali jirey. Innaga oo ta hadda ina khusaysa ka raacayna, waxyaalaha uu ereygu tilmaamayey waxaa ka mid ahaa: tol xeer leh oo talo ka dhaxayso, talona ka soo baxdo oo iyaguna ku wada socda, dadka kalena ku la dhaqma; dad arrinkoodu meel uu ka go’o leeyahay, madaxdooda iyo minjahooda la kala yaqaan, isla markaasna taladooda ku meel-mariya awooddooda ay u madaxabannaan yihiin. Haddiise ay qabiilo ama koox tolliimo, wada-tashan kari weydo ama wax talo ahba isku raaci weydo, ayna guurti talisa oo la dhegeysto yeelan weydo, wax-aqoonteeda iyo waayo-araggeedana loo yeedhi waayo oo wax la weydiin waayo, qabiiladaasi ma sii jiri jirin; waxaana khasab ahaa in ay kala tagto oo ay qolo ahaan u baaba’do.

Qof walba waxaa, haddaba la qaali ahaa sugnaanta iyo dhawrsoonida gobonnimada reer-tolkii; wuxuuna tolkii aad ula necbaa oo uga tudhi jirey, ma aha oo qudha ceebta ay leedahay, aayo-xumada talo la’aan tolkii ku dhacda, oo gobannimadoodii dhaawacda. Sidaas awgeed, wax kasta oo uu qofku gaar u qabo, waxaa la xumaa oo uu iskiis uga dhawrsan jirey in uu tolkii badhi-furo ama uu taladooda doc-faruuro. Taasina markaas waxay kaalin ka qaadanaysay xejinta nabadda ay beeluhu ku heshiiyaan.¹¹

11 Masaladani waxay ka mid tahay dhaqanka aan sina uga muuqan kooxaha dagaalada Soomaalida maanta ku magac leh ee magacyada qabaa’ilka huwan.

Dhaarta iyo Cawaaqibkeeda

Ka dib marka colaadda laga heshiiyo, haddii ay labada qolo rabaan in aan la fududaysannin waxa ay ku heshiiyeen, ama aan dhayalsi cidina ku jebinnin, waxay heshiiskooda nabadeed ku khatimi jireen dhaar ay odayaasha labada qoloba ku maraan in ay dhawri doonaan qodobbada ay ku heshiiyeen.

Dhaartu, marka magaca tolka lagu galo, ee ay ku saabsan tahay wacad laba qolo ku galeen in ay mustaqbalka ku wada dhaqmi doonaan, aad baa looga dhawrsan jirey in la jebiyo; waayo waxaa la aaminsanaa in dhaarta laga baxaa leedahay cawaaqib-xumo aad u ba'an oo dad iyo xoolabana saamaysa. Si kastaba ha ahaatee, dhaartaasi iyana, waxaynu odhan karnaa, waa tub kale oo looga dan-lahaa xejinta iyo joogteynta nabadda.

Masalada halkan mudan daymada gaarka ah waxa weeye, xaaladda maanta, haddii la isku dayo, in qabaa'ilka Soomaalida cid laga dhaariyo lama heli karo cid dhaartaa lagu aammini karo; sababtoo ah kuwooda dagaallada maanta ku jiraa ma aha kuwo tolkood uga tudhaya ceeb iyo cawaaqib-xumo midna.

Magtii iyo Geela

Geelu, sidii aynu hore u soo sheegney wuxuu ahaa meersiga xoolaad, ee aad u saameeya, isku-xidhnaanta iyo midnimada siyaasadeed ee kooxda abtirsiiin-wadaagta ahayd. Wuxuu ahaa waxa ay kooxdaasi, daaqiisa iyo ceelka waraabkiisa wada difaacdo, ayna dhaciisa iyo dhicintiisaba isugu hiiliso. Dhinaca nabaddana wuxuu geelu ku lahaa kaalin aan taas ka dhicin. Meelaha kaalintaasi ka muuqato waxaa ka mid ahaa habka magta ama diyada qofka la dilo (qudha) iyo ka la dhaawocoba (qoonta) ee ay bulshadaasi u jideysatey in geel dhogor ah lagu qiimeeyo oo haddii aan labada reer xeer kale lahayn lagu bixiyo. Geelu sida aynu hore u nidhi, wax tolka ku qaali ah buu ahaa, waxaana loo maleeyaa in ay lexo-jecladiisu, ilaa xad, u adeegeysey joogtaynta nabadda jibsinaha abtirsiiin-wadaagta dhaw ah iyo beelaha isku deegaanka ahba.

Godob-Reebta Gabdhaha

Waxaa dhaqanka nabadaynta beelaha qabiilo ee reer-guuraaga Soomaalida ka mid ahaan jirey hablo labada qolo isa siiyaan oo loo guurin jirey rag ka mid ah xigtada ragga la laayey kuwo u sii abtirsiiin xiga. Bixinta hablahaas oo magta la raacin jirey waxaa lagu magacaabi jirey 'godob-reeb'. Sida ereyga laga fahmi karna waxaa looga jeeday in ubadka laga rajeynayo gabdhahaas lagaga bogsan doono xanuunka godobta kii dhintay. Arrintani geesta kalena waxay abuuraysay xidhiidh xididnimo iyo gacaltooyo ka dhalato oo gasha halkii colaadda. Sidaas darteed, habkan ahaa gabdhaha godob-reebta la isu siinayey, wuxuu lahaa ulajeeddo ah sidii nabadda loo xoojin lahaa, loogana jiri lahaa nabar hore oo soo kaca.

Waxaannu intaas kaga gudbaynaa qodobadan aannu u aragnay in ay

u door-roonaayeen hab-dhaqankii iyo tabihii si toos ah ama si dadban ugu adeegayey adkaynta ku dhaqanka heshiiska nabadeed ee ay wada geli jireen soo-jireenkii kooxaha qabaa'ilka xoolo-dhaqatada iyo reer-guuraaga soomaaliyeed ahayd.¹²

Waxaynu hadalkeenna qaybtan muhiimka ah, kaga hadhaynaa, colaadda iyo nabadda bulshadii soojireenka Soomaaliyeed ee reer-guuraaga soocan ahayd, waxay ka dhalan jirtey, hirdanka iyo loollan ku saabsanaa khayraadka dhaqaale ee daaqa iyo ceelka iyo xoolaha nool siiba geela iyo fardaha; iyo sharafta tolka; isla markaana waxay, colaadda iyo nabadda, labaduba ku xidhnaayeen oo aad u saamaynayey, hab-dhismeedkii bulsho-siyaasadeed iyo dhaqankii soojireenka ahaa ee ay bulshadaasi muddo dheer iska soo dhaxlaysay.

Sidaas awgeed, aragtida dad badan laga maqlo ee suugaanta, gaar ahaan maansada u nisbaysa kaalin gooni u ah oo ay keligeed dagaal iyo nabadba kicin jirtey, sahal laguma wada qaadan karo. Bal sida ay noogu muuqato, aragtidaasi kama turjumayso xaqaa'iqa mawduuciga ah.

KAALINTII SUUGAANTA

Inkasta oo aanay suugaantu ahayn sababta tooska ah ee colaadda iyo nabadda haddana lama dafiri karo xidhiidhka ay labadaba la lahayd. Hayeeshee, marka si guud loo eego suugaantu xidhiidhka ay la lahayd dhammaanba dhinacyada bulshadaas ayey colaadda iyo nabaddana la lahayd.

Waxaynu odhan karnaa, suugaantu waayadaas waxay ka dhigneyd sidii muraayad ka muuqaal celinaysa dhaqanka bulshada xoolo-dhaqatada reer-guuraaga Soomaaliyeed; waxay ahayd weelka ay dadkaasi ku shubaan dhaxalka waayo-aragnimada ay taariikhdooda ka kasbadeen.

Ta gaar ahaaneed ee ku saabsan mawduuca hadda ina horyaal, tusaaleyaalka suugaaneed ee halkan ku qorani waxay si la yaab leh uga muuqaal celinayaan dhaqankii colaadda iyo nabadda ee ay bulshadaasi hiddaha u lahayd; waxayna siyaalo kala duwan u cabbiraysaa sidii ay bulshadaasi u arkaysey adduunka ay ku noolayd dhinac kasta oo uu leeyahayba; mabaa'diidii iyo qiyamtii ay ku dhaqmaysey iyo wixii ay ku hiranaysey intaba. Haddii aynu si kooban meelo uga tilmaanno, waxa suugaanta halkan ku qorani ina tusaysaa qiimaha xidhiidhka tolliimo, hiillada tolliimo, mabda'a quwadda tolka iyo kaalinta ay intuba ku

12 Waxaase naga digniin ah: yaan loo qaadan in qodobbadan kor ku xusani si buuxda ugu fillaayeen hanashada nabadda joogtada ah ee kooxaha qabaa'ilkaas. Waayo qodobbadaasi waxay ka taagnaayeen xidhiidhka qofka iyo qolada uu ku abtirsanayo ka dhaxeeya, iyo saamaynta ay qoladiisu ku lahayd danaha noloshiisa dhinac walba; taasoo keeneysey in uu go'aankeeda u hoggaansamo. Hayeeshee taasi, si buuxda uma dammaano-qaadaynin nabadda. Waayo ma jirin quwad urursan oo qabaa'ilka ka baxsan una dhex ah oo arrinta nabadgelyada guud ahaan ka saarta gacanta kooxaha kala qolada ah.

lahaayeen colaadda iyo nabadda bulshadaasi. Tusaale ahaan, Cali-Dhuux Aadan tixdiisa ah *Doollo*, ujeeddadiisa tirtirsiga ah wuxuu u adeegsanayaa oo uu qolada Ogaadeen ku dhiidhi gelinayaa mabda'a hiillada tolliimo. Sidaas darteed, wuxuu ku celcelinayaa xusuusinta rag la laayey; waxa kale oo uu ku nuuxnuuxsanayaa dhaliisha dagaalyahannimadooda uu u jeedinayo, wuxuuna ku canaanayaa xoogga cududdooda dagaal oo uu leeyahay way ugu aari waayeen ragii la laayey, dhulkooda iyo xoolahoodana way ku dhacsan waayeen. Macnahan oo kale waxa muujinaya baydadka odhanaya:

Ilaah baa dabkoodiyo nasakhey danabadoodiye
Dadka ugu ma liitaane way diriri waayeene

Xataa isaga mawqifkiisa tirtirsiga Ogaadeen ah wuxuu ku sababaynayaa abtirsiinta Daarood ee uu la wadaago, taas oo ah mabda'ii hiillada tolliimo:

Aniguba dubkaan uga nixiyo diirka oogada'e

Qamaan Bulxan isaguna tixdiisa uu ugu jawaabayey Cali-Dhuux Aadan waxay cabbiraysaa isla dhaqankaas aynu soo sheegnay. Tusaale ahaan, isagoo qolada uu Cali-Dhuux Aadan ka dhashay ku eedaynaya waxyeellada qoladiisa kuna tilmaamaya in ay iyagu Isaaqa uga daran yihiin wuxuu odhanayaa:

Dubbihii ku dhacay Ina Barwaaq dayi ad maysaane
Daadduunka caydheed raggaa debedda meeraaya
Docmo iyo Hartaa lagu ogaa dalawadoodiye

Cali-Geriga Daadhiin shalay naga durduurteene
Waa kaa darfiyey caanihii Degiyo Heemaale

Mar kale wuxuu odhanayaa:

Daabaca ninkii kugu dhuftee daabka kuu celiyey!
Iyo kii duleeshay ku yidhi wax isma dhoorshaane
Dakanadeyda yaa kaa xigood igu danayn haatan?

Wuxuu halkanna Cali-Dhuux iyo qoladiisa ku canaanayaa in aanay tolliimo waxba ugu tarin ee ay liddoor uga waxyeelo bateen. Baydad kale oo tixdaas ka mid ah wuxuu si toos ah ugu dhaleecaynayaa Cali-Dhuux, haddii uu Isaaq Doollo ka qaaday ama geeloodii qaaday raggoodiina laayey, in aanu Daaroodnimo ugu hiilin:

Duunyada fardaha maalintaad Dalab ku qaadeysey
Sida duul Amxaara ah markaad nagu dabreyneysey
Intaad haatan ii laba dubleyn muu damqado jiidhku
Daarood Ismaaciil ahaan maad u soo dirirtid?

Meelo kale waxa tixda Qamaan Bulxan si cad uga muuqda dhaqanka dhalasho-ku-faanka qabiilka iyo dheg-xumo diidka. Wuxuu meelo tixdaa ka mid ah muujinayaa quwadda iyo haybadda reer-tolkii iyo sida aanu ugu quudhayn in Isaaq waxyeeli karo. Wuxuu muujinayaa haddii cidii libin ka hayso Ogaadeen, in uu libintaas u oggol yahay Daarood:

Aar soo dib jirey neef hadduu daacuftii geliyo
Uu kaga digsiyuu ilkaha dhiigga kaga daadsho
Dugaaggaa yaryari saw ka cuna duudka hadha maaha?
Aday dilaye goormaa Isaaq Doollo iga qaaday?
Maxaa libinta Daarood lahaa Daba-Cayun siiyey!

Salaan Carrabay, tixda *Mayn* ee diradiraynta ah, iyana waxa ay xambaarsan tahay wax badan oo dhaqankaas ka mid ah. Hubka ugu culus ee uu u adeegsanayo dhaqaajinta ficillada qabiillo iyo shididda dabka colaadeed waa qiyamta xidhiidhka tolliimo iyo si-aragga iyo fal-dhaqanka hiillada tolliimo ee ku xidhan. Ma aha maanso-colaaddeedaas *Mayn* oo quud ah, ee labada maanso ee kala ah *Waar Tolow Colka Jooja* iyo *Tolnimo Waa Dugsiye*, labadaba Salaan Carrabay ujeeddadiisa nabadaynta ah wuxuu u adeegsanayaa aragtida bulshadaas ee ku saabsan aayo-xumada dagaalka sokeeye iyo qiimaha xidhiidhka tolliimo ee ka dhexeeyey labada col ee is hor fadihey. Tusaale ahaan, gebagebada tixda dambe wuxuu Salaan labada colba hoga-tusaaleynayaa macnaha xeerka tolliimo ee ah in shisheeyaha la iska kaashado, in uu cadaawuhu kaga waabanayo isku duubnida quwaddooda, hadday isku jabaana in labadooda iyo intay magac wadaagaan oo dhan cadowgaasi ku soo dhiirranayo:

Ragna mudanihiisow dugsiya dah iyo gaashaane
Meeshii dalleenaa libaax dagi ka eegtaaye
Magacna waa diboo dhalashadii loo demeli waaye
Yaan idin diq-diqin waano aan durina aafayne
Damba kama leh Reer Faaraxaan docoginaayaaye
Wax belaayo lagu diimiyaa duul ku waajibaye
Colkan Habar-Jeclada loola dudi daw kalow furane
Allow yaa carruurahan durdurin kala dillaameeya

Guud ahaanba suuggaanta halkan ku qoran, waxa laga helayaa oo lagala soo bixi karaa adduun-aragga, fikirka iyo qiyamtii dhaqanka ay lahayd

bulshada xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed; mar haddii akhristuhu kala soo bixi karana tusaalooyinka kooban baannu kaga gudbaynaa.

Kaalin-gudasho kale oo ay maansadii colaadda iyo nabadda bulshadaasi lahayd waxa ka mid ah, saamaynta go'aanka siyaasadeed ee qabiilladeeda. Marar badan waxay tixda maanso ahayd mikirifoon dadka dhexdooda ka yeedha oo arrin cusub ku fura dood una hoggaamiya inay qabiilku go'aan ka qaato. Gabayaagu mar uu ku guulaysto iyo mar uu ku guuldarraysto labadaba way dhici jirtay; hayeeshee kaalintaa doodda siyaasadeed mar walba maansadu way qaadan jirtay.

Tusaale ahaan, Cali-Dhuux Aadan tixdiisa *Doollo* wuxuu uga dan lahaa in uu wax weyn ka beddelo xaaladda siyaasadeed ee ku saabsan xidhiidhka qabaa'ilka ku kulma degaanka uu ka hadlayo, gaar ahaan qaybo ka mid ah Ogaadeenka iyo Isaaqa. Si gaar ah wuxuu rabay in uu abuurto colaad Ogaadeen oo ku wajahan Isaaqa; sidaas darteed, wuxuu abbaar ka dhigtay in uu doodda siyaasadda dhex geeyo Ogaadeenka si ay mawqifkooda Isaaqa ku saabsan u beddelaan. Waxa la mid ah Salaan Carrabay tixdiisa *Mayn* oo uu isna uga socday in uu colaad ku beddelo xidhiidhka nabadeed ee wakhtigaa ilaa xad ka dhexeeyey qabaa'ilka Togdheer wada-dega.

Tusaale kale waxa weeye, Faarax Nuur tixdiisa *Kala-Quusasho* waxa keenay arrin cusub oo doodiisu dhex timi reer-tolkii, isna uu rabay in aan waxba laga beddelin mawqifkii hore ee ahaa colaadda. Sidaas darteed, tixdaasi waxay saamaysay mawqifkii siyaasadeed ee taagnaa waxayna u hoggaamisay in aan colaaddii markaa taagnayd waxba iska beddelin. Tusaale kale oo muhiim ahi waxa weeye Saahid Qamaan iyo tixdiisa *Sinnaan*. Tixdaasi waxay ku saabsan tahay arrin siyaasadeed oo aad u muhiim ahaa oo qolada uu Saahid Qamaan ka dhashay ka dhex taagnaa wakhtigaas, kaas oo ku saabsanaa mansabka suldaanka iyo nin markaa laysku hayey in laga qaado oo laga wareejiyo. Taas ayuu Saahid Qamaan qabiilkiisa tixdan ugu soo bandhigay doodiisa ku saabsan ninkaa iyo suldaanimadiisa. Aw-Jaamac Gacanlow isna tixdiisu waa sidaas oo kale oo waxay u socotaa mawqifka siyaasadeed ee dhex yaallay qolada uu ka dhashay iyo qolada uu la hadlayo.

Mar kale maansadu waxay qaadan jirtey kaalinta borobagaandada iyo faafinta mawqifka siyaasadeed ee qabiillada, waxayna ahayd weel gudbiya aragtida qabiillada iyo faanka qabiilka. Waxa u tusaale ah, tixaha *Sardan* (Faarax Nuur) *Habbis* (Maxamuud Daalin) *Warka Baar-Dilaacsadey* (Xarbi Ismaaciil).

Marka ay maansadu ugu dhow dahay xidhiidh toos ah oo ay la yeelato, tusaale ahaan, colaadda waa marka ay noqoto hubka ereyga ee lagu dagaal galo, markaas oo ay dhinaca ay la jirto u ahayd guubaabo. Mar walbana, suugaanta bulshada aynu ka hadlaynaa waxay tu kale oo dhan kaga duwan tahay, sida tooska ah ee ay ugu xidhnayd ugana turjumaysay bulshada ay ku abtirsanaysay iyo waayahay ku noolayd.

HADAL IYO DHAMMAANTII

Colaadda iyo nabadda qabaa'ilka xoolo-dhaqata Soomaaliyeed ee reer-guuraaga soocan ahayd waxay ahayd wax ku xidhan habkii ay bulshadaasi u noolayd iyo dhaqankii ay lahayd. Colaaddoodu waxay ka dhalan jirtey tartanka iyo loollanka ku saabsan khayraadka kooban ee dhulka saxaara-xigeenka ah iyo habka dhaqaale ee ahaa xoolo-dhaqatada reer-guuraaga ah; iyo isla markaas baahida difaaca haybadda siyaasadeed ee kooxda-qabiilo. Sidaas awgeed, dagaalka iyo nabaddu, waxay toos uga dhalanayeen baahida noloshooda iyo habka bulshadoodu u dhisnayd iyo geeddi-socodka xidhiidhka wada-noolaanshaha kooxaha kala qolada ah ee kala wada madaxa bannaan, ayna noloshooda ka maqan tahay awood suldad dawladeed oo u dhex ahi.

Midda kale, bulshada-qabiilo waxay dagaalka iyo nabadda labadaba ku geli jirtey aragti iyo mawqif ay ku midaysan tahay, dan iyo ulajeeddo iyo go'aan ay u dhan tahay; mana jirin wakhtigaas dad gaar ah oo dagaalka tolkood dano iyaga u gooni ah ka lihi. Dagaalka iyo nabadda midkoodna, ma laheyn sabab iyo dano ka baxsan xeerka kooxda-tolliimo isku xidha ee ay isugu hiilliso. Waayo, sababta tooska ah ee tolku isugu hiillin jirey, sidaynu soo tilmaannay, wuxuu ahaa dhiigga tolka (dilka qudh-gooyada ah), dhulka daaqa iyo ceelka waraabka, geela iyo haweenka. Dagaalkooduna wuxuu lahaa ujeeddo nabadeed, nabadduna waxay ku xasili jirtey, rabitaankeeda oo loo wada dhammaado.

Nabaddeyntu waxay lahayd dhaqan suura-geliya oo ay ka mid ahaayeen, ergada labada dhinac ee is-hayaa isu diraan, ergada dad beelaha kale ka socdaa geli jireen kuna dhexdhexaadin jireen iyo dhaqankii xeerka biri-mageydada Soomaaliyeed oo isaguna aakhirka nabadda fududeyn jirey. Ugu dambeynta, nabadda waxaa lagu soo xero gelin jirey shirkii geedka ee ay odayaasha beeluhu isugu iman jireen. Shirkaas, waxtarkiisa iyo awooddiisa nabadeyntu waxay ku dhisnayd, waxa laga wada hadlayo oo ahaa sababta runta ah ee ay colaadda iyo nabadduba ku xidhan yihiin. Tusaale ahaan, waxa laga wada hadlayey, wixii colaadda keennay, wixii dhacay iyo wixii ka dhashay oo dhab ah; intaas iyo wixii xeer uga yiillay iyo waliba wixii xaajo ugub ah ee ku soo kordha wixii ay ka yeelayaan.

Inkasta oo joogtaynta nabaddu aad ugu adkayd waayahaas dawlad-la'aaneed, waxa jirey dhaqan, illaa xad, suuro gelinayey xejinta nabadda, kaas oo uu ka mid ahaa, xidhiidhka tolliimo ee aanu qofna ka bixi karin, kana noolaan karin, sidaas darteedna uu ku khasbanaa in wixii tolkii isku raaco aanu sinaba uga hor iman; iyada oo ay gobonnimada qabiilku meel weyn kaga jirtey qiyamta hirashada ee qabaa'ilka, taasina ay qofka faraysay in aanu burinnin oo jabin go'aanka tolkii isku raaco; waayo macnaha gobonnimada waxa ka mid ah talada iyo mawqifka midaysan iyo is-maqaalka ka dhexeeya tolka.

Waxa kale oo nabadda xejjiye u noqon jirey, dhaarta magaca Alle oo qodobbada heshiiska nabadeed lagu gunti jirey, iyo magtii lagu bixin jirey geela dhogorta ah. Waxa iyana ka mid ahaa, waxyaalihii adkaynta nabadda loo wada-geli jirey gabdhii godob-reebta la isu siin jirey.

Ugu dambeyn, suugaanta waxaynu nidhi, bulshadaas iyo dhaqankeeda ayey si weyn u cabbiraysey, marna waxay ahayd madal doodeed oo mawqifka siyaasadeed ee qabiilka aad u saameysa, horseedna ka ah; mar kalena, waxay ahayd hubka borobagaandada iyo faafinta guusha iyo waliba faanka qabiilka, dagaalkana waxay u noqon jirtey hubka aftahanka ee colkiisana guubaabiya, ee geesinnimo geliya, cadowgana niyad jebiya.

QAYBTA 1AAD: MAANSADA COLAADDA IYO NABADDA

HORMADA 1AAD: MAANSADA COLAADDA

I: Colaad Toos Ah

Mayn

Salaan Maxamuud Xirsi ‘Salaan Carrabay’

[Ismaaciil Aw Aadan ‘Jaajuumow’: Waxaannu ka qorray cajalad uu duubay Muuse Ismaaciil Galaal.]

Sida uu werinayo Alle ha u naxariistee Muuse Ismaaciil Galaal, tixdan wuxuu Salaan Carrabay tiriyey wakhtigii laga soo baxay sannadihii la magac baxay Xaaraame-Cune. Waxayna ku timid tixdu haweenay la odhan jiray Qarad oo uu qabay nin ay is xigeen Salaan Carrabay oo dibedda kaga maqnaa.

Qarad oo maalin maalmaha ka mid ah is leh bal ninkii in uu lacag idiin soo diray ka wardoon, waraaq iyo khabaarna aad u dirtid, ayaa Cawed Quurshe arkay iyadoo Burco xarragoonaysa. Cawed Quurshe markii la is waraystey ee ay u sheegtay in uu nin qabo, uuse dhoof kaga maqan yahay, muddo dheerna ay war ka la’dahay, ayuu ku beer-laxowsaday in isaga ay guursato. Aakhirkiina Qarad way u deexatay hadalkii Cawed Quurshe. Ka dibna iyada oo gacan-taageero ka heshay Cawed Quurshe oo turjumaan u ahaa Ingiriiskii dalka xukumayey, ayey u tagtay qaaddigii Burco; dhawr markhaatina waa la horgeeyey oo waxay fureen in aanay Qarad ninkaas dhoofka kaga maqan shan sanno wax war ah iyo masruuf iyo marriin midna ka helin. Sidaas ayaa qaaddigiina uu warqad fasaq ah ku siiyey. Salaan markuu ogaadey, ayuu waran qaatay oo wuxuu damcay inuu Cawed Quurshe laba u kala gooyo. Arrinkii baa laga war helay, ninkii Ingiriis ee Burco xaakinka (D.C.) ka ahaa baa la isula tegey. Qaaddigii iyo markhaatiyadiina waa loo yeedhay, markaasey Markhaatiyadii yidhaahdeen isla sidii hore qaaddigiina wuxuu yidhi: ‘Sir, waa sax xukunku ee *sign*. Waa sidaas shareecaduna waa oggoshahay.’ Xaakinkii Ingiriisna waa ku raacay. Salaan oo markii hore ee uu damacsanaa in uu Cawed Quurshe dilo, la xidhay maxkamaddiina lagaga gar helay ayaa cadho daan-daankii Burco ka baxay oo miyi qabtay, lix bilood ayuu maqnaa, Cawed Quurshena Qarad buu guursaday. Arrinkiiba iyada oo layska illaawey ayuu Salaan Burco yimi, markaasaa lagu yidhi: ‘in doora ayaad naga maqneyd, aad baanaan kuu townay, sidaas awgeed waxaannu doonaynaa in aad hal habeen na maaweelisiid’. Salaan wuxuu yidhi: ‘habeen qudha idin maaweelin maayee,

toddoba habeen baan idin maaweelinayaa, laakiin meel weyna inoo soo qabta, dhii-saygana fasax iiga soo qaada'. Labadiiba waa laga yeelay, habeenkii u horreeyey ayuu gabaygan ku bilaabay. Wuxuuna yidhi:

Dheer-dheerti baa lagu galee dhederbi Reer Cawle
Waxba kagama dhibin Reer Xirsiga dheelallow kacaye
Dhoollaha Beday kaga rideen dhagaxi Beereede
Waatii waraabuhu dharqaday dhinacyadiisiye
Cabdi-Qodaxna waa lagu dhugtamey suu dhalool yahaye
Dhaayaha wejiga saanaddii dhab uga qiiqaysey
Hadba waxan la dheellimanayaa dhicitinkiisiye
Haddaa Maxamed Dhuubsada ku daray dhagarti saarrayde
Col u Joogna dhay iyo karuur kala dhex jiiifaaye
Wallee gacanta looguma dhakhsado dheehay aadmiguye
Dhood-dhootankii Cali Siciid dheelli kibirkiiye
Raggii Laanta Dhaanka ah la dhigay dhoofna laga sheegye
Xasan Xaajigii dhaadan jirey dhici colaaddiye
Aar baa dharruursaday wankii dhumucda weynaaye
Dhig ma jebinin Xayd Muusihii dhirifka waallaaye

Dhullaxuba wax buu kaariyaa dhawr cashoo idile
Iyagaan wax loo dhimin kuwii dhag iska siinaayey
Dharaar keliya baa Reer Xuseen dhigay Sulaaxiye
Nabsi laga dhursugo kii horuu dhawrayaa Arabe
Isagaan dhib qabin Aadan bay wax u dhawaaqeene
Dhadhabkaa hurdada ugu warramay dhaasasiyo beene
Dhalanteedka waa kii la kacay dhuga la'aaneede
Dhabtuu Nabadshe warankowgu ridey dheehay aadmiguye
La dhuyaaley Reer Weyd Siciid dhaawacuu qabo'e
Waakaa dhabbiyo ciil la tegey Dhamal dushiisiye
Iyagayska dhaantaynayee waa dhitinayaane
Hadduu dhubuqa ridey Reer Siciid dheefyey madhaxiye

Xasan Daahirii lagu dhugtamey dhabanna-hays reebye
Ka dhag siiye Cumar Daahirii dhaasiyee dilaye
Ku dhurmumiye Reer Xaamudkii dhiigga fuuqsadaye
Raggii dhuubsan jirey haatan bay kala dhignaadeene
Ay waliba dhood iyo shir iyo dheeryihiin amare
Dhallaankooda hadhay jeer dambay dhaxal u reebeene

Qastankii dhexgalay Ciidagale kala dhaleeceeey
Indha-Guba kuwii loo dhuree dhamamax loo diidey
Dhulka Eebbe leeyahay kuwii lagaga dhaar jiiidey
Dhallinyaro col-moogaa tashiga laga dhamaasaaye
Ugu dhiije Reer Ciisihii soo dhalaashadaye
Dhegsin buu ka helay Reer Gobdoon lamase dhaadayne
Dhoobada suldaankii la dhigay dhaymo lama siinne
Dhibtuu qabo hadday ugu dareen weliba dhiidhiye
Wax libaaxu dhacadiidiyaa goolu dhays bidaye
Goortuu dherгаа buu dugaag ugu dhawaaqaaye
Rag baa libinta maantuu dharqado dhaata abadkiye
Isagoo dhantacay Faarax Nuur dhuda ma luuqeeey

Haddaad dhimato geeridu mar bay nolosha dhaantaaye
Dhaqashiyo kol bay kaa yihiin dhereggu xaaraane
Dheddigaansho waa ceeb in aad dhamaqsataa meeel
Dhadhan malaha Aadmigu wuxuu kugu dhalliilaaye
Nin dhirbaaxo quudheed dugsadey dhaqayadeed tuugye
Dhashaaday sugtaa xaajadaad dhawrataa abide
Ma dhurmuminin Qaabiil kolkuu dhacayey Haabiile
Dhibaad-jiid haween buu ka kacay dhiriftankoodiye
Dheddigoodku Aadmiga horay uga dhawaajeene
Cilmi-Dhuub shantuu dhalayba waa dhababka loo jiidye
Ma sii dhugan Bah-Reer Dood kobtay kaga dhaqaaqeene
Anuun bay dhaxantu xalay iigu timi dhimirsigii ciile
Dheg xumada aniyo baa maso ah dheecdan Reer Gude'e
Wallee ama dhalafida laygu xidhay dhuugga qolo saaray
Wallee ama dhulkaba waan ka tegi dhaaman magaciye

Cabdullaahi Waxa Loo Qudh-Jaray
Sayid Maxamed Cabdalle Xasan

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow']

Maxamed Cabdalle Xasan waa hoggaamiyihii dhaqdhaqaaqii Daraawiishta, isla markaana gabayaagii caanka ahaa. Gabaygan wuxuu tiriyey waqtigii uu ku jirey la-dagaallankii Ingiriiskii haystay dalka. Gabaygan oo annu halkan uga magac dhignay *Cabdullaahi Waxaa Loo Qudh-Jaray* waxa uu ku saabsan yahay laba qolo oo nin kala dilay, kadibna uu gabayaagu qolada ninka laga dilay ku dhalliilayo kuna dhaleecaynayo aar la'aantooda ujeeddadiisuna waxaa weeye tira-tirayn iyo guubaabin uu qolada ninka laga dilay ku guubaabinayo aargoosi.

Waxa gabayga loo qaadayaa waa qalqaalsamiye
Waxa geela qaaliga ka dhigay qiimuhuu yahaye
Qarfo Hawda waxa loogu wadi waa qatimayaaye
Fardaha qoolka waxa loogu guri qoob ka orodkiiye
Wax loo qaadan gaashaan inuu qaashka celiyaaye
Qadhle awra waxa loo rartaa qaadka iyo xooge
Qarash waxa magliga loogu guray qaab hakuu galo'e
Wax qabiibka loo tumanayaa qaarar gooyada
Lo'da waxa qunbaha loogu luli qaabka dhayda ahe
Waxa qayli loo xidhanayaa qurux asluubeede
Qaraafiicda waxa loo toshaa saydha qodaxeede
Qoys weyn waxaa loo dhistaa qani gobaadeede
Waxa gabadh qaryada loo togtaa guur ha kuu qumo'e
Wax munaafaq loo quudhsadaa qawlka beenta ahe
Waxa qoorta loo jari kufriqa qiil ku waajibaye
Waxa qaari loo raadsadaa waa qisada diine
Culimada waxaa loo quweyn waa qob iyo dhowre
Qalin duurre waxa looga tegey waa Qur'aan yariye
Cabdullaahi waxa loo qudh jaray waa qabiil li'iyee
Qoon adag hadduu leeyahoon loo quturi haynnin
Qooq laguma toogteen ninkii qaaliga ahaaye
Qarqarada jinaadkii dhurwaa kuma quraacdeene
Intuu qalamsadoo cuno gadaal qaaqda ma hayeene
Qalbigay xumuunsada markaan qaalanow dayo'e
Qab iyo luuli qaabkuu lahaa qeeyadii midabka
Qarqarootintii socodka iyo qalanja laafyoodka
Qun u hadalka qaadhaanka geed quudka bixintiisa
Qasadkii buruudkiyo markay Qaawo ololayso
Qayraamintii waranka iyo qabas kulaylkiisa
Fulay baa qamaadee ninkii qalo la'aantiisa
Goortaan qiyaas fiiriyaa lay qunbiciyaaye
Qori deleb sidiisaa wadnaha lay qadh-qadhiyaane
Anaa quusan waayee bahdii qoonsi malahayne
Huwan qoorigeeda ha xushiyo qaara geedo lehe
Haw xilato qabay xoorleh iyo Qadow karuurkeede
Qol dugsoon intay jiiifsadaan qaac ha loo shido'e
Kulligoodba qayl qayl dhaliyo qaraf ha eedeene
Waa qaran maxaa loo lahaa qolada Haaruuna?

Doollo (Guba) Cali Aadan 'Cali-Dhuux'

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ka qorey cajalad hore loo duubay.]

Gabaygani wuxuu kamid yahay silsiladdii Guba; waana kii u horreeyey. Waana gabay si toos ah u kicinaya dagaal. Sida la sheego, Cali-Dhuux wuxuu gabaygan tiriyey mar uu ceelka Wardheer yimi isagoo hal wata uuna halkaa ku arkay geelal aad u badan oo Isaaq ah oo halkaa ka cabayey, ka dibna, uu doonay in hashiisa loo waraabiyo. Waxa la sheegay in uu halkaa ay uga muuqatay in gabay ku jiro, ka dibna wuxuu tiriyey tixdan caanka noqotay ee ay ka dhalatay silsiladda la magac baxday Guba. Sida tixda dulucdeeda ka muuqata ujeeddadiisu waxay ahayd dagaal ka dhex dhaca qabiilka Ogaadeen iyo qolooyinka Isaaqa ah ee uu ku arkay ceelka Wardheer ee ay ka cabbayeen.

Cali-Dhuux Aadan, wuxuu gobolka Sool imminka la yidhaahdo ku dhashay qiyaastii badhtamihii qarnigii sagaal iyo tobnaad, wuxuuna ahaa gabayaa wakhtigiisii caan ka ahaa degaankiisa iyo degaanada kale ee qabaa'ilka xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed.

Doqonkii Ogaadeen ahaa Doollo laga qaadye
Loo diid Danood iyo hadduu degi lahaa Ciide
Niman baa dalkoodiyo xukuma labada daaroode
Daratoole iyo Faafan oo wada duraabaaya
Deegaanta Haradii ku taal daaqi ma hayaane
Doox kama madheedhshaan halkey Debec ku beerreyde
Marka duraha Jiilaal dhacee doogga la idleysto
Duurkiyo dayada Hawd markay Debec ku soo oonto
Laaskuu ku dalandooli jirey loogu degi waaye
Alla dawguduudii Wardheer kama durduurtaane
Dawadeedu waa Jeerinleey uga dul geeraare
Laaskii biyaha diirranaa loogu degi waaye
Dixda Qarandi deerey Mataan loo dar-dari waaye
Maantana dukaanaa la dhigay degelkii Gaafoowe
Darar kagama maalaan Cammuud diiqa iyo xoore
Dixda Reygaleed iyo Gargaar laysu dacareeye
Deyr baaba lagu meeriyoo loo dabbaal degaye
Wardheer oon dagaal xumi ka dhicin digiyo baaruudi
Dooxiyo Duliyo Faafan way soo dalbanayeene
Kuna dalaaqe naagii inaaney dib uga laabmeyne
Ildoor siduu damacsanaa loo diyaafadiye
Hadba dunida duul baw kacoo diin la soo shira'e

Dar Ilaahay uun baa xaggiis looga soo diraye
Saw sida Darwiishkii Isaaq duub cad uma qaadan
Makaahiilku Doy uma kaceen degayey Hiiraane
Daacuunku meeshuu ku layn uma dalluumeene
Daal iyo hadhuudh kuma cuneen degelkii Haarweyne
Habar Yoonis bey uga durkeen degaladoodiye
Dullinimo iney qaayibeen waxaw daliilkiya
Dadba weli ma arag Reer Subeer duul ka soo qaxaye
Dooyiyo dabriyo weerariyo malaha duullaane
Nina uunka kama dawladsana Dir iyo Daarode
Ilaah baa dabkoodiyo nasakhey danabadoodiye
Dadka ugu ma liitaane way diriri waayeene

Afartaa sidii dalab la ridey maysu daba joojey?
Da'daan kaga bilaabiyo miyaan dawgi ka haleeyey?
Ma daleeyey deelqaafku? Waa kaa dilaa gabaye
Dacwad kalena waa Reer Xirsiga halaan dareensiyeey

Dadka waa la wada leynayee wow darreydeene
Dubbihii ku dhacay Bah Ina Cali doogta weli haysa
Waa waxay la dabandeebayaan dakharadoodiye
Waxay dalagga beeraha la qodan waa dagaagnimo
Damal-Aboodi, Deyriyo Afmeer dixida Gaaroodi
Reerahoodu maantey degeen daawo lagu boobyee
Sidii galab dawaar loogu rogey Deleb ma maalaane
Ina Raabbi waa tii la diley waana Reer Dalale
Dumar kuma sagootiyeen kuwii dahay ugaaskiye
Dan baa tidhiye lama duudsiyeen diricii dheeraaye
Aniguba dubkaan uga nixiyo diirka oogada'e
Ma damqanne kuwii dad ugu xigey waa durduriyeene
Ilma Dacarba duul bay indhaha dumug ka siiyeene
Nimankii walaalkood durqumay kama danbaysiine
Degdegsiinyo waatay ciyoon duqaq u laayeene
Ninkii aabbihii diricyo dhalay looma duur-xula'e
Dib baaba looga yaabi iyo inuu kaaga sii daro'e
Dagaalkii Shilaad ugama reyn duulkii Reer Shalace
Dunta boqorka nimankii sitee duubi jirey shaalka
Bal muu duro waxbana yaanu dilin doorarna u leyne
Geerida Hurraha diidayey derejo dhaamaane

Afartaa sidii deleb la ridey maysu daba joojey?
Da'daan kaga bilaabiyo miyaan dealkii ka habawshey?

Ma daleeyey deel-qaafku? Waa kaa dilaa gabaye
Dacwad kalena waa aniga iyo dan iska sheegayga

Maansadan dad wada qoonsadee dire-dire u qaatay
Diin run ah daliilkii sharciga yaan ka daabacaye
Dembi inaanu iga raacihayn daacaddaa furiye
Daahyaale geelii la heley waa kan Deyr dhalaye
Duudweyn ma jiro Haaman iyo Daba-Cadaadeede
Derrinkii, Afkii Daad-Madheedh kama dareershaane
Dahab waa tan iyo qaalmihii deyr cadka ahaaye
Dafuf quruxsanleeyey ma foga dalawadiiniye
Danbarkiiisu weydiin uraa waana dabataane
Iyadoo dil-diliihii bishiyo dacashi haaneed leh
Oo wada dunuunucabayuu idin dul joogaaye
Dubux baaba lagu sii wadaa dararti Baar-Jeexe

Afartaa sidii dalab la ridey maysu daba joojey?
Da'daan kaga bilaabiyo miyaan dealkii ka habawshey?
Ma daleeyey deel-qaafku? Waa kaa dilaa gabaye
Dacwad kalena waa aniga iyo duun u hadalkayga

Nabsigu waa daruuraha cirkiyo sida dabaylaaye
Daa'iradan maantey waddaa duulashii galaye
Dunjugii wax qaatuu la' yahay deynkii godobeede
Xaqa daguugmay duunyada la dhacay dumarka ooyaaya
Naagahan ilmada duugayee diilalyadu hayso
Daa'imo haddaydaan ahayn dagay xaqiinniiye
Dagaal waan jeclaa xaajo aad dib ugu aydaane
Doqon yahay ka kaca meeshan aad dacayda laalaadin

Baar-Looxan Ley **Xarbi Ismaaciil 'Xarbi Dheere'**

[Axmed Aw Geeddi]

Xarbi Ismaaciil wuxuu ku dhashay oo uu ku noolaan jirey deegaanka Awaare iyo Dhagaxbuur, waxaanu dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii sagaal iyo tobnaad. Sababta gabaygan uu u tiriyey waxay ahayd: Ciidan Habar Yoonis ah ayaa geel ka dhacay beel Ogaadeen ah. Xarbi Dheere oo ahaa nin gabayaa ah ayaa markii warkii loo geeyey tiriyey gabaygan calaacalka iyo canaanta ah, waxaanu yidhi:

Buruudiyo biyaha ceelka iyo Shiil-Cas bidixdeeda
Iyadoo bardoodamahayaan Baarqabkiyo goolku
Iyadoo bishey dhali lahayd lagu bushaareeyey
Bisha waaga reeraha haddii weerar lagu boobey
Baxsaw Cali haddii lagu diliyo Baashihii Muxumed
Haddii Ina Bedeysoo is godey booca ka higgoodey
Dhegta baarrinteediyo tawaad labada baac goysey
Bishmihii dibnaha qawlalkuu buledka tuuraayey
Markuu doobta sida bigil la tumey ridayay baaruudda
Uu dhibida baarkiyo miskaha bey isugu yeeley
Boggoo laalmey bay soo baxdaa burunjidiisiiye
Markuu baarqabkiisii nirgaha badow kaxeynaayey
Baarcoodanleeyey markey bari u sii jeeddey
Bad wax galay sidiisii markay wada bidhaameysey
Birmadkeeda oo Reer Isaaq Buuri daba joogo
Boqol meela boqol meela iyo badhiyo qaar meela
Iyo Baashihii Ina Xirsiyo baarigey wadatey
Intaasoo shakado buuxsataa boga dhex taagneyde
Sida qaylo beel kale timi waad barbariseene
Basarka caydhu leedahay nin ogi kama baqeen geele
Ba'ayeyda naaguhuna saw idinma beer qaaddo?

Warka Baar-Dilaacsadey
Xarbi Ismaaciil 'Xarbi Dheere'

[Axmed Aw Geeddi: Waxaannu ka qornay Sheekh Muuse Aaye Faarax.]

Mar labaad ayey ciidankii Habar Yoonis duuleen si ay Ogaadeen geel uga soo qaadaan (ugu soo dhacaan), hase yeeshee waa la jabiyay abbaanduulihii oo Sarhaye la odhan jireyna waa la dilay dabadeed mar kale ayuu Xarbi gabay lib ku faan ah tiriyey.

Warka baaldillaacsiga noqday ee bari ka soo duuley
Ee sida baruureed duxey ee bedenka noo qooyey
Libintaa bahdaa soo gashaa waa badhkaa adiyey
Iyadoo burcada Reydabley bixinki soo daaqday
Iyadoo Bidhaan quruxsaney boodh ku dhaashiyatay
Iyadoo baruuriyo candhaba buuxo haraggeedu
Iyadoo badhkeed gu'ga dhaloo baal-casaa wadata
Barqinkii hadday weerareen bahalihii waashey
Kamay baqane beerkay rasaas ugu balaadsheene
Boqol bay kob wada jiiifiyeen boobtadii hore'e

Ku bigaace Reer Sugullihii badhida weynaaye
Maantana haddii laga badsado waan buki lahaaye
Alleylehe bayuurtii ku tiil weyska bi'yeene
Alleylehe dabkoodii bakhtiyey way bidhbidhiyeene
Alleylehe biyii waalid bay badhax u diideene

II: Maansada Dhaqanka Colaadda Xoojisa

Ma Xayeesh Adhaan Dhacay

Faarax Jaamac 'Faarax Laanjeer'

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ku qabtay bowsi.]

Faarax geel buu soo dhacay; geelii ayaa lagu xidhay. Waa xilligii Ingiriis dalkeenna ka talinayey. Faarax saaxiibkii oo la odhan jirey Xiirey ayaa jeelka ku booqday. Markii lays waraystay ayaa Xiirey u sheegay in Faarax ay dhulka u martay in uu geel xaday, ka dibna lagu xidhay. Markaasaa Faarax Laanjeer gabaygan tiriyey:

Xarbi baari xayraan col iyo xeelad iyo tuugo
Waa ugu xad dhaafaa ninkay Xiis u dagantaaye
Xulufooyinkii horeba way kala xabbaadheene
Xasan iyo Xuseen baa ogaa xeeru leeyahaye
Xinkii Dheeho lagu gawracaan xiisaddii hadhine
Xijigeedu waa qaatil iyo xayn walaalo ahe
Xiitooy ma soo hoysan karo oday xagaystaaye
Meeshii xeryaha looga dhigo xoogsi loo qabaye
Wadaadkii Xadeed iyo fadhiiyey Xalin Daraawishta
Ee xarunta geyn jirey intuu Xamar u heenseeyo
Xaafidal Qur'aan buu ahaa soo xajiyey dhawre
Isagaba xaq iyo baaddil wow kala xarriiqnaaye
Xaaraan hadduu yahay fardaha kuma xaraanseene

Xisaabaadka maantay tahiyo xaq iyo miisaanka
Xasanaad in laysaga qoriyo inuu xumaan doono
Xarafki Loox-Maxfuud lagu dhigiyo Xaakinkaa werine

Ifka lama xujeyn karo ninkii Xiito weerara'e
Xayaabada ka soofeenka iyo xuukadiyo goolka
Tan iyo Xaawa iyo Aadan waa u xumadaysnayne
Xoolaha xaddiidka ah naftaa Xiirayow jecel
Haddii lagu xidho geelu sow xubin rageed maaha
Ma xayeesh adhaan dhacay Burcaad ka xantamayseene?

Habbis

Maxamuud Jaamac 'Maxamuud Daallin'

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ka qoray Ibraahim Salaad Faarax 'Indha Cawlle' iyo Ismaaciil Axmed Gaas.]

Maansada Soomaalida colaadda toos ama dadab u dhiirrigelisa waxaa ka mid ahaa kuwo dulucdoodu ahayd libta dagaalka oo lagu faano, tixaha noocan ah waxaannu tusaale u soo qaadannay tixahan dhawr maanso ee ay kala tiriyeen Faarax-Laanjeer, Maxamuud Daallin iyo Faarax Nuur.

Cidla' geel-jirkoo ula baxiyo canugga mooyaane
Carruurta iyo maatada haddii caano laga siiyo
Cirir baa ku tuumada ninkii caawin weerara'e
Colka ayda laga soo dhuraan cidina noo sheegin
Iyagoo ciyaalkii nirгаа culus ka soocaaya
Cas-casaanka waaberi miyaa nalagu ciireeyey?
Kama cararo Mayliig raggii caanbaxa ahaaye
Ku celceliye dhawr-qaad intay cagaha laabteene
Soolomadow hadday carato waa ciidankii Yurube
Cidhba gogolka liishaanku waa camaladdoodiye
Waa niman cayaarsiis la baray caynka Faransiise
Cishiriin kun oo shiish yaqaan looma caal helo'e
Abtidoonku waa cadow haddii caaro doox dhaco'e
Cadaabkii ma tage Dhuux-Yaraa ceeb ka dhiidhiyaye
Cadceed baa fardaa noo dhashoo waa cawo adduune
Cismaan baa jareeyoo waqaan cududdu naafoone
Cishii baa la doodoo gob bay caadadeed tahaye
Cayn iyo Jaleeloba markuu calan-wallaysiiyey
Cooflii magaaleed miyuu cagidi noo keenay
Cabaadkii afdiinlaha miyaa cidina hayn weydey
'Cara wira!' 'Mar soo roga!' miyaa lagala caalwaayey
Cagaar Kulule, Yayl iyo Dulgaal cagaha maw saarray?
Kaba-Yare colkuu waday miyaa haadku ku casheeyey?
Hadba cuurka soo hadha miyaa fuluhu coosh-cooshey?
Cabbaarkiiba ba'ayeey miyay Canab la soo booddey ?
Cawa-dhacayda naagaha miyaad ciyowgi Hawd mooddey?
Cadiig baa ninkii loola hadhay cunaha weynaaye
Geeddiga casuusta leh miyaa ciiro nala moodey?
Ma shalaa tolkay Cimidh u degey cidhifkii Buuhoodle?
Ma haddaan horweyn Ciid u baxay cidina eegaynin?
Cirka kaa sarreeyo dhulkaan cidi u baannayne

Ciiddiyo baddoo kugu qarxaa caafimaad ma lehe
Maroodigu hadduu cadho is galo looma caal helo'e
Wiyil caratay cuun geeda laa looga cararaaye
Aar soo cargaagtamey wuxuu cunoba naafeeye

Cabdulle Xasan baa nagu yiqiin col iyo laystaane
Cayun Buule waa nagu ogaa Caliyo Haaruune
Calan-Sidiyo Waysaysaniyo Cawro iyo Siigo
Calaa-teri fardii la gala hadhay ciilka muu ledo
Cali Shiriyo Dhahar baa ogaa ceebihii dhacaye
Cumar iyo Dubays ways ogayn ciiro dirirkiiye
Cashadii Gadh baa Reer Garaad nagu ciseeyaaye
Calaamooyin kale buu nafluhu nagu canaantaaye
Wallee dirir nagu caajiyaan caalamkaa jirine.

Cumar Daahir waa lagu yaqaan col iyo laystaane
Ina Caliyo Tuur waa waxaan ciidda hoos marine
Waa waxaan cadaabkiina tegin cudurna naafayne
Cidhifkii Madheedhlay dagaal culus ka geysteene
Cidba nimaan ka dhalanoo horweyn caydhsadaan nacaye
Ma shaluu carceeraa ka ridey cudud-yarow Khaalid
Allaylehe bagaa loo casiley ways cajebiyeene
Cabbaar erigi maadays miyaa curaddo loo toogtey
Jidh-jidh geelka caanka ah markay caaro yari duushay
Caallaan sidanne sow haan-garneyl laguma ciil beelin?

Sardan

Faarax Nuur

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ka qoray cajalad uu duubay Muuse Ismaaciil Galaal.]

Gabaygani wuxuu ka mid yahay kuwa colaadda dhiirri galiya, sababta uu ku yimidna waxay ahayd Ogaadeen baa soo duulay oo wuxuu qaaday geel Sacad Muuse leeyahay, geelaas oo la magac baxay Indha-Badane, kolkay la guryo tageen gabayo badan oo tiigtiiqsi ahna soo tiriyeen, hasayeeshee aan lagaga dabatagin ayaa sannadkaa sannadkii ku xigay waxaa soo masayr duulay colkii Ogaadeen ee geelii Indha Badane ka qaday. Siddeed kadin oo Arab leeyahay ayey qaadeen; hase yeeshee kumay guulaysan ee geelii waa laga dhacsaday; colkii soo duulayna, sida la sheegey, nin kama baxsan. Kadibna Faarax Nuur oo colkaa watay ayaa gabaygan tiriyey:

Dadku inuu samraan moodayee waa sidii weliye
Saaciisu nimuu buuxsamoo sahayda loo qaaday
Inuu socodka hore raacayaa waa sal la hubaaye
Nafta saacad iyo wiig ka hadhay loo sal-dhigi waaye

Saqda dhexe Siyaaxay haddii weerar lagu saydhay
Siddeed kadin haddii lala tagooy siigo kor u duusho
Sargedaha haddii lagala dhacay sararta guudkeeda
Markay gabanta yari saydhantay eddegga siiceysey
Suubeey raggii maali jirey soo sawaxan yeedhye
Saqla orodka goortaa qalbigu naga silloonaaye
Maarraha sannaadhiyo kolkuu sumucu qiiqaabay
Ee siidhigii nala dalbaday sawjar nala moodye

Goortaad suldaankii disheen Sugulle Caynaanshe
Ayaad sun iyo waabeeyadii sare u laacdeene
Sarhayaa ban kugu duudsiyiyo sulubkii dheeraaye

Sinji iyo ab baa nagu ogaa sabada mayd yaalle
Sibreheeda waa oolli jirey soobir qaawaniye
Meeshii saqaafkeedu maro sababi waa taale
Sooryeyney haadkii suddee soommanaan jiraye
Waa kaa waraabii sorkokay saabka buuxsadaye

Sagaalleyda nimankii ku baray sebenka Jiilaalka
Reer Samatar baa Saylac iyo surinka kuu yiille
Daraan lagu suduudeenba way naga sokeeyeene
Sakaaraysataa iyo surtiyo sabaqa ruugtaanba
Saqafaa qortaa iyo okhole suura gadataaba
Sannad baad ku noolaan kartaan sulufka caydheede
Soddonkii fandhaal baad la iman Saaxil waa nabad'e

Wax kaloo safeeyaa ma jiro sadarka feedhaaye
Annaga soortu nama kaafidiyo subagga Dhiin waale
Sangaraaraceeduu qalbigu saakin noo yahaye
Waa sahanka geerida hadday olosho Suudaane
Bagaal lagu sardamay qaalmahaa noo sonkor ahaaye

Kala-Quusasho

Faarax Nuur

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ka qoray cajalad uu duubay Muuse Ismaaciil Galaal.]

Gabaygani waa ka mid yahay gabayada dhiirri-gelinaya colaadda sababta dhalisayna waxay ahayd: mudda dheer ayaa dagaal ka soo dhex socdey labada qabiil ee isku degaanka ah ee Ciidagale iyo Arab. Ka dibna, sida la sheegay, Ciidagale wuxuu la shiray jilibbo Arab ah, si loo heshiiyo loona soo afjaro colaadda raagtay ee aafaysey labada qoloba. Haseyeeshee Faarax wuxuu arrinkaa u arkay heshiis lagu dagayo Arab oo aan Ciidagaluhu daacad ka ahayn. Dabadeedna gabaygan caanka noqday ayuu ka tiriyey, wuxuunna yidhi:

Nimuu qaamudkiisii galoo qalinka loo gooyey
Jeeruu qolfaaluhu nin weyn qadada weydaarsho
Waa qaafil jeeray indhuhu qac u yidhaahdaane
Qabkii weli ma dhigin Ciise Dhamal laysku qoonsadaye
Oo waxay qarqoor leeyihiin waxaan qoyaamayne
Haddaan nabadda loo wada qasdiyin wayska qiil jabane
Waataa raggii qoomanaa qaar xabaal yahaye
Goormaad run uga qaadataan qaan yaraa nabaddu?
Qabdi hadalka lagu laakimaan qaar ka saamiciye
Waa lagu qiyaamaynayaa Arabka qaaroowe
Bal qilaafka daya geeddigaa idin qaddaacaaya
Qayrada xaggee lagu wadaa Qadow ka meerayso?
Qaandhaawohoodii maxaa qoriga loo siiyey?
Qaalmaha rasaastii maxaa loogu wada quudhay?
Qosol been ah fool wada qayaxan qiil an garanaayo
Booraan afkii laga qafiley qabarna hooseeyo
Qusur oodan shebeg laysu qubay qoolad iyo xeelad
Qullaab iyo kullaab iyo lacaaf laysku qabanaayo
Qayaamada kobtaa daahiraan qun ugu soo jeedo
Doqon baa halkii lagu qatali qoorta soo dhigane
Maanaa mindiyo lay qarshaa laygu qali doono
Sidee baan qanboosha u cunaa qabiska waabayda!

Qaafada Ismaaciil Jibriil qoonka Sacad Muuse
Awalkaannu qaadhaanka guud qayb wadaag noqonn'e
Qaaliga Albaasaan ka dhigi qaadhka naylaha'e
Qajajuu ha dilo geelayaga qululka dayreede

Qoorriga Afmeer iyo Si-Godan, Qoda-La'dii Tuurta
Qar-waraabe iyo Boorrintay karantu qoynaysey
Qool-Cadiyo Laan-Dheer halkay qun uga foofaysey
Meeshiyo qiyaamaha intaa qodaxi waa taalle
Ka qamaadney qoolkiyo wankii qarada weynaaye
Qol-qolkaan isaga muuqanniyo qayd la wada ooto
Qadhiidhka iyo daankaannu nahay qaranka Guuleede
In aan haatan kala qusannaa Qaaddir soo rogaye
Qatadeennii kala raysanniyo qaxarki Shayddaane
Waar-yaadha kala qaadane qoommamo la'aada

Miid Fara Yar **Aw Jaamac Gacanlow**

[Axmed Aw Geeddi: waxaan ka qorey Cabdullaahi Aw Jaamac Xaaji Xasan.]

Faydan oo ka mid ah jilibbada ugu yaryar Ciise Muuse, waxay gaashaanbuur ahaayeen Reer Wacays oo ka mid ah jilibbada Ciise Muuse ugu badan, oo suldaankana lahaa. Haddaba Aw-Jaamac Xaaji Xasan oo ku magac dheeraa Aw-Jaamac Gacanlow oo ka dhashay jilibka Faydan, ayaa wuxuu dareemay in aanay Reer Wacays wax tixgelin ah siineynin qoladiisa. Sidaas darteed wuxuu tiriyey gabaygan:

Marka hore ma maagee dadkaan wada murwaadaaye
Marse hadday macaan iyo tollimo muuno kala waydo
Ay murugto xaajadu nimaan maarsan baan ahaye
Maadhiinka goortaan cuskado fule madhoodhowye
Muuqayga goortuu arkuu madaxa laabaaye
Miyirkayga anigoo qabaan magane toogtaaye
Anigoo makalay buu tukuhu muruqyo goostaaye
Halkaasaan maryaha kaga furtaa miilo-gaabyada'e

Minawaar shixnadan oo dagaal lagu malaynaayo
Madaafiicda oo loo calaqqoo macallinkii joogo
Mid yar oo muquraaya baa meel ka dhaawaca'e
Mawjaduhu markaasay liqaan mood wuxuu sidaye
Maroodiga mas laayaana baa maaga oo dila e
Miciyaha libaaxba halyey wow mashxaradaaye
Midh kabriidi meel lagu qabtuu murux ka yeelaaye
Mitid fara yar midhihii bataa kama macaashaane
Kol hadday mishiinnadu qarxaan mawdka loo simane
Ismaroorintaa Reer Wacays mahadin maayaane

Cidi Ma Kuu Sheegtay? **Ismaaciil Xayd Xirsi 'Aflow'**

[Axmed Aw Geeddi: Waxaan ka qoray laba cajaladood oo midna uu duubbey Maxamed Cabdullaahi Ciise 'Singub' oo uu 'Aflow' abti u ahaa, midda kalena uu duubay wiil uu dhalay 'Aflow' oo nasiibdarro magaciisu noo suuroobi waayey inaan helno.]

Ismaaciil Xayd Xirsi oo ku magac dheeraa 'Aflow' wuxuu dhashay 1910. Wuxuu ku noolaa jiidda u dhaxaysa Hargeysa iyo Jiggiga. Wuxuu ahaa nin ku caan baxay gabayga oo aad loogu qadderiyo. Waxaa kale oo uu ahaa nin dagaalyahan ah oo geel dhicid badan. Waxaanu ahaa abbaanduule. Haddaba Aflow mar uu tegey ceelka Bullaale la yidhaahdo ayaa waxa u gabeyniman Ogaadeen ah. Aflow hore uguma jawaabin nimankii ee cabbaar ayuu dhegeystey. Cabdullaahi Ciise oo Aflow seeddigii ahaa, ahaana nin Ogaadeen ah, ayaa intuu sare kacay yidhi: 'Waar Ismaaciil haddee nimanka miyaad ka baqan?' Waxaanu ku xilo furay in haddaanu ragga iska celinin uu xabbad ku dhufan doono (waa sida ay sheekadu odhanayso). Ismaaciil wuu istaagey, waxaanu tiriyey gabaygan la baxay Cidi Ma Kuu Sheegtay. Nasiib darrose aannu qayb yar uun ka helley.

Cismaanaw adeer maansadaan carra-biyeynaayey
Waanigii casiley meesha iyo caydhki karameede
Calaamooyin igu baaridaan kugu casheysiine
Ka curaagta caawaan sidii ceel idiin shubiye
Rag ninkii Camada loo dhigay iyo cadadka Yaasiinka
Cashar-dhigato maal laga helaa waaba caariya e
Cabdi Dheriyo Sheekhaash markaan ceeriga eryaayey
Een caanahoodi genbiyey cidi ma kuu sheegtay?

Colkii xigeyna waataan ka heley culusti Liibaane
Cayuuntiina shaashka leh markaan cadho u qaadaayey
Casarkiiba waataan ku furay calamadaydiye
Caleydh iyo bankii Qeydar baa loo caddaan wadhaye
Markay baarqabadu carranayeen cidi ma kuu sheegtay?

Colkii xigeyna Reer Magan kolkaan coobirka u diirey
Markaan cududo weynow ratiga caymanka u gooyey
Een adhi camuuddaasa heley cidi ma kuu sheegtay?

Colkii xigeyna waataan qabsaday cuurkii Reer Dalale
Rimaydii cagaagtiyo nirkii caga-gubyoonaayey
Cartan oolka goortay sidii culimo eedaantay
'Cara dhiciya!' maantaan lahaa cidi ma kuu sheegtay?

Cusbaleey ninkii garanayaa nama cilaaqeene
Cadraddiina waa tii la waday ciilba waad dhimane
Inaan beel cidaadaha ka dhigay cidi ma kuu sheegtay?

Caydii Jiciir lagu qabtiyo cabashadii gaadhey
Ciyaalkaa ku tuurtuuri jirey gobabkii cawlaayey
Markaad cimilka wada oodateen sidii midgaan caydha
Eed culuqa soo doonateen cid ma kuu sheegtay?

Cukur iyo markii Reer Garaad lagu cayaaraayey
Candho faalladii baa hadhey iyo Reer Cismaanada'e
Haaruun markii lagu cartamay cidi ma kuu sheegtay?

Kolkii Caabud Waaq iyo Xer iyo Gaadsan la cantuugey
Ee Ina Caruusiyo la diley caalimkii dunida
Nin cibaaro lihi kama gabyee cidi ma kuu sheegtay?

Casarkii markay Weehadeey cabasho ooyeysey
Hadday soo ciyeen wiilashii culus xareynaayey
Ragguu haadku ciirada ku rogey cidi ma kuu sheegtay?

Cishiriin nin baan lagu ogeyn cadarkii shiilaaye
Cawlyahanku waaguu firdhaday cidi ma kuu sheegtay?

Niman baannu caadhgoo ahayn Caliyo Haaruune
Cabdullaha Allaa nagu ridiyo Cumar rugtiisiye
Haddaan awrku noo ciidan gelin Camar ma gaadhneene
Cagtu way dalooshaa sidaan Ciid u weeraraye
Caruusada habeedda leh markuu Ciidagale dhaafey
Ee doosha laydiin cuskaday cidi ma kuu sheegtay?

Calle gabayga waxa iigu wacan waa cayimadaase
Nin carceerey baan ahay afkaa laysku calashaayey
Cankana maalin baan idin gashaday sidii cadiimeede
In warkaygu Cawbaarre tegey cidi ma kuu sheegtay?

Kala Gooye

Yawle

[Axmed Aw Geeddi: waxaan ka qoray Gaydhe Saqadhi Baxnaan, Burco.]

Reer Xirsi Cismaan oo reer ahaan ugu badan qabiilka Habar Yoonis, ayaa waxay doonayeen in ay Habar Yoonis ku duusho Ogaadeen si ay geelal uga soo dhacdo. Yawle, oo ka tirsanaa qabiilka Muuse Ismaaciil waxa uu hormuud ka ahaa ragga diiddanaa duullimaadkaas, kadibna si uu u baajiyo in jilibbada kale ee Habar Yoonis duullimaadkaas la galaan Reer Xirsi Cismaan, wuxuu tiriyey gabaygan caanka noqday ee Kala Gooye la baxay, kaas oo uu si mug leh ugu sawirey godobyoo uu ku nuujinayo in ay Reer Xirsi Cismaan ka galeen Habar Yoonis dhammaanteed, kagana go'een. Wuxuuna yidhi:

Irdhaa galay raggii Weeraraw idinku oodnaaye
Afartaa gabyahan bay qabteen sida ugaadheede
Afka Gubato sidii Reer Xuseen loogu wada aasay
Indhahay ka meer-meeriyaan urur aad joogtaane
Intuu inan ka noolyahay ha sugin inay illaaweene

Bah-Dhulbahante adaxaa ka badan eedda loo dhigaye
Ooryahoodii laga qaaday bay la ashqaraareene
Marka ubaxa dayreed da'ee awrta la hayaansho
Waxay edeggan ugu meerayaan amase Oodwayne
Allaa igu og kuma aaminsana laba ayaamoode

Ayaan kaliya waatii Gumbuur oodda loo rogaye
Nimankii ajalay baad tihiiin Aw Cabdiyo Nuure
Amxaarana sidaa Reer Cigaal uma ataasheene

Laba Muuse ubixii cunta'e aaran baa hadhaye
Haddaan bari abaar lagu sallidin kama imaadeene
Udubkayga kama soo rareen Eexo iyo Cayne
Agoonta uma keeneen kuwii aabbahood dilaye

Awal raace Muuse Cabdalena odayadoodiye
Hadduu gu'gu Aboorreey ka da'o imanba maayaane
Idahooda waxay daajiyaan Awdal iyo Sheekhe

Ugaadh Cumar siday ugu dhaceen awrtii Reer Sugulle
Iyaguna intay urursadeen awr ma soo tu'ine

Isaxaaq Afmeer buu galbeed uga arooraaye
Markay idin arkaan geelashaa uubta loo ridiye
Ma ogtahay halkaa wuxuu ku tagay uur-ku-taallada'e?
Ohow kuma xasilo geel hadduu aar u soo dhaco'e
Iman mayso Habar Yoonistaad u alwanaysaane
Eebada shisheeyhuba way idin asqaysiine
Ammaana Allah waydiin bannaan labada ofoode

Allahayow Nin Ii Daran **Ugaas Nuur Ugaas Rooble**

[Axmed Aw Geeddi: waxaan ka qoray *Buugga Suugaanta Fasalka 1aad ee Dugsiga Sare*, Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, Xafiiska Manaahijta, daabacaaddii 1983. Muqdisho.]

Gabaygan oo uu tiriyay Ugaas Nuur Ugaas Rooble wuxuu ku saabsan yahay xeeladaha dagaalka wuxuuna tiriyay ugaasku gabaygan qarnigii 19aad. Wuxuuna ku noolaa deegaanka Boorama iyo Saylac. Inkasta oo uu gabaygu u dhadhamayo in uu tilmaamayo jacaylka nabadda, dulqaadka iyo cadawga oo loo samafalo, haddana ujeeddadiisa dambe waxay u dhacaysaa nabarka dagaalka oo lala gaado cadawga. Waana meesha ay tilmaamayaan saddexda bayd ee ugu dambeeyaa.

Allahayow nin ii daran maxaan daafta hore seexshay
Nin ii daaqsanaayana maxaan daafida u kariyey
Jidhku nin uunan doonayn maxaan hadalka deeqsiyay
Ma degdego'e xaajada maxaan ugu dulqaad yeeshay
Weji debecsan dayma'an dareen gelin dubaaqiisa
Dibna furan dabuub una ka didin deexashiyo muuso
Qosol dibadda yaalloon ka iman dhuunta dacalkeeda
Kanaan degey kanaan doorka biday kani dan baan mooday
Waxaan dood kaftana sheekadaa ugu daleeyaaba
Dabinkaan u dhigay maalintuu dacalka soo saaro
Intiyoon dawaarka u rogoon xeeladda u daadsho
Isagoon digniin qabin maxaan kaga dayaan siiyey!

HORMADA ZAAD: MAANSADA NABADDA

I: Nabadda Tooska Ah

Waar Tolow Colka Jooja Salaan Carrabay

[Ismaaciil Aw Aadan ‘Jaajuumow’: waxaan ku qabtay bowsi, waxaanuu ka saxay Maxamed Jaamac Abokor ‘Oday’ kana tirsan Golaha Guurtida iyo Yuusuf ‘Xiito’.]

Waxa colaadi dhex-martay laba reer oo kala ah Reer Daahir iyo Axmed Faarax oo ka wada tirsan qabiilka Nuux (oo Habar Jeclo ah) muddo dheer ayey colaaddoodu soo jiidantey; cid kasta oo isku dayday inay kala joojisana way ku guul-darraysatay. Ugu dambayn sidii caadada Soomaalidu ahayd waxay ku ballameen labadii reer inay dagaal ku kala sed-qaataan; xillina waa la qabsaday si loo kala adkaado oo reer uun loo muquuniyo. Markaasaa lays ootay, kolka lays ootaana waa marka waan-waan iyo rajo laga quusto. Intii aan dagaalkii bilaabmin, ayaa waxa kala dhex-galay, Alla haw naxariistee, nin la odhan jirey Fiqi Xasan. Fiqigu wuxuu labadii col ee is-hor fadhiyey u daliiliyey aayado Qur’aan ah oo ka hadlaya cawaaqib-xumada dagaalka Muslinka dhex maraa leeyahay, if iyo aakhiroba. Nin la odhan jirey Koore Ducaale oo Reer Daahir ahaa ayaa Kitaabkii Qur’aanka Fiqigii ka laaday; markaasaa Salaan Carrabay oo meesha joogay yidhi: ‘Fiqi, Qur’aankan aad kula hadashay fahmi maayaane, af ay fahmayaan ma kula hadlaa?’ Fiqigii wuxuu ku yidhi Salaan: ‘Haddii aad maanta ku kala baajiso, waxaan daliil ku hayaa in Ilaahay kuu dembi dhaafayo’. Kolkaas ayaa Salaan soo kala dhex galay labadii col isaga oo marba col maqashiinaya, geeraarka caanka noqday ee la magac baxay *Waar Tolow Colka Jooja*. Wuxuuna yidhi:

Sidii awr calasooboo
Caawin dayrta ku qooqoo
Dhibidii ku cillaantoo
Mid kalow caranaaya
Ama cooflaha aarkoo
Cuunka geelal ku laayoo
Ka curaagtay baruuroo
Higgadii cuf ka siiyey
Labadiinnatan cuuree
Isu coobba ridaaya
Cod yar baan u lahaa

Maalintii Cumar Daahir
Isku laayey cayaartiyo
Nin Caloolacad joogoo
Maygaag-Ciidan warqaatay
Wuu cibaaro qabaayoo
Belaayuu curufkeediyo
Cusurteeda dambeetiyo
Cidhibteeda yaqaanoo
Caqii buu taliyaaye
Wada cawdi-billaystoo
Waar tolow colka jooja!

Intii baad cantarteenoo
Cashigii Gubankiiyee
Caalku reerka ku laayiyo
Maydkiinii cammirraayee
Candha-Dheerta dhurwaa iyo
Haaddu ciidda ku jiiddiyo
Cuqdadkii ka baxdeenoo
Dhulka meesha curboon iyo
Caleentii Karamaaniyo
Cosobkii Balanbaalliyo
Cayn baad soo gudhsateenoo
Coodkiinnaa barkhadoobiyo
Caddiintaad wadataaniyo
Cod-codkaad sidataaniyo
Carfigaa nabaddaa lehe
Wada cawdi-billaystoo
Waar tolow colka jooja!

Nin habeenno casheeyey
Cadar aan hadh lahayn iyo
Ceeryaan baysugu toostoo
Inuu caafiyaddiisa
Cabbaar meel la fadhiisto
Cimrigeedba la waaye
Wada cawdi-billaystoo
Waar tolow colka jooja!

Shantii ceeriga tiilliyo
Curadkii habartay iyo
Cali-Fiin ma ilaawin
Rabjaan baydin cayaayir

Caado dhaaf u disheeno
Caday loo jebin maanta
Jaamacii calmanaayee
Codkar noogu horreeyiyo
Canlana waa is ogayn

Cidna waysu xignaa
Ciilna waysu qabnaa
Haddii aad is cuntaanna
Idin caabuddan maynnee
Waa intoon mid la ciidmiyoo
Ka kaleeto ku ciiriyoo
Waa si ay ciddidaydu
Calooshay ku jabtaayoon
Anna ciil iyo way iyo
Cadho aan u dhintaayoo
Cududdaydu laciiftee
Wada cawdi-billaystoo
Waar tolow colka jooja!

Majeerteen canbarkii
Marsaduu cammiraayey
Cashuurtii Hawiyaa
Cukaaskii boqorkii
Calankii laga qaad
Reer Cismaan Maxamuud
Iyo Ciise Riyoole
Cabdallii yar-yaraa
Cigallii ka dhignaa
Cumar waysku itaal
Geedkii caanka ahaayee
Cadceed soo bax guntiisiyo
Qaarkii Raasal Caseyr bay
Ka cawaagsanayaan
Caynkii baydin waddaane
Wada cawdi-bilaystoo
Waar tolow colka jooja!

Garaad Faarax curquuniyo
Carrab aadmi habaariyo
Cawri bay la heleenoo
Cidla weeye Nugaaliyoo
Cawskeedii lama daaqo

Carradaynu degaynayna
Inuu cawlku miroodiyo
Caynkii baydin waddaane
Wada cawdi bilaystoo
Waar tolow colka jooja!

Carrabkaan ku hadlaayo
Nin caleentii caddaatiyo
Calli reero la yaalloo
Is-cufaaya golaayoo
Cararaaya hadhow iyo
Caammadaan garanayne
Marka ciisku rumoobee
Cuurar weyni dhintaanee
Carshigaa talo gaadhaan
Lays canaanan kareyn iyo
Caqad baad ku waddaane
Casho dhaw waxa joogiyo
Aan cawaaqibka eegno

Tolnimo Waa Dugsi **Salaan Carrabay**

[Ismaaciil Aw Aadan ‘Jaajuumow’]

Markuu dhammeeyay geeraarka *Waar Talow Colka Jooja* ayaa nin la odhan jirey Baashe Shabeelle oo ka mid ah odayada dhexda ah, ayaa Salaan ku yidhi: ‘Waar waxaasu gabay ma ahee ragga wax kala dheh ama meesha iskaga tag!’ Ka dibna Salaan wuxuu tiriyey gabayga caanka noqday ee la yidhaahdo *Tolnimo Waa Dugsi*.

Baashoow daliil gabay ma jiro nin igu doorshaaye
Halka doyna laga naadiyaan duunka weriyaaye
Dux markaan ka garan waayey baan daayey waayadane
Kol baan diririyaa sida cirkoo da’i kaliilaaye
Xaluun baan digriyey sida wadaad diin u haajiraye
Dabuubtaan la yeedhona Rabbaa duusha weligeede
Waa daabac aan go’in midkaan duco bilaabaaye
Daad-xoorta iyo mawjaddaan kala dabbaalaayo
Dacartaan wadnuhu hayn karayn daari feedhaha’e
Waa daafa-yaridii horee aan idin deeqsiyo
Dibna waxaan u idhi xaajo waa dux iyo hawraare

Reer Faaraxeer kala durkee kala duddaynaaya
Aan u digo Ducaale iyo Seed ha igu diideene
Duuggeeda belo waa helaa nin u dedaalaaye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Dunjiga Nuux-Ismaaciil tashiga daaha laga saarye
Degaha Reer Axmeda wiilashii timirta diiqaayey
Xasan dabadii Reer Jaamacii kala dabayl raacay
Aroos dama dammaashad iyo naas daawashada geedka
Dibno hadal ka yimid baa Cag-Geel loogu daw galaye
Deelqaaf fagaaraa Ibleys kugu dukhuulaaye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Dalaalkuu laqwiyeey Reer Shirdoon danafsigii eedye
Dalanboobigii Dhamal wuxuu damac lahaa leefye
Bah Gadabiirsi danab baa ku dhacay dimishigii qoofe
Nin dorraad lumiyo naagihii dulube ooyaayey
Sidii Ina Dagaal loo khatalay idinka diimmoone
Reer Geeddigii debedda maray daadi amarkiiye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Reer Sugulle dakhar wiil yar bow siday dubaaqdiye
Waatii degmada laysu furay Dabadi Looyaane
Dulmi hadduu qabsaday Eebbeheen Daayinaa jira`e
Dubaaqi qabriga howga tudho dabaqi naareede
Dummaddii Xirsuu saaran yahay Dubur raggii yiille
Doolaabadii boqor hadduu damacsanaa waaye
Dabar-qaaday Reer Diiriyii damaca waallaaye
Duudsuu ku dhacay Ina Ammaan dib u heshiintiiye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Reer Cali-Geraysugu darraa dil iyo qoomaale
Dakanadii qabaalkii raggii dumayey qoomeeye
Waa dawri Buuhoodlahay dir u lahaayeene
Waaya dambe dabataa fadhidey daallinoo col ahe
Durba waranka waysugu dhakhsaday dooxanaa marane
Ma deg-dego nin dirirtii ogaa dooxadii Garabe
Ku dibsade Daboolan iyo Caday danabadii yiile
Dabkuu Aadan shiday Ina Galaydh durugsigii waaye
Dambarkeeda dhaxal xaajaduu doortay Reer Gorode
Nin dardaarankii Cumar hayaa mudanihiis daaye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Ararsame dulmaa kala qabsaday dirirtii Caymeede
Daaroodba maqal xaajadii daahirka ahayde
Dadku hadduu ka nixi Reer Wacays deleshaxii raacye
Tukaha lagama dedin wiilashii wada daboollaaye
Ma duugine sidii bay lafuhu debed u yaalliine
Deris waxa aqbalay reerihii dawladda ahaaye
Markuu sheekh cilmiga daakiraa fiqi duceeyaaye
Diintana wadaad kama aflaxo xaqa ka doodaaye
Kol ay deeradiyo cawsha tahay doqontu waa quuse
Iyana way is doontaan kolkay kala dibboodaane
Duunyadatan kama liidataan daaqi geedaha'e
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

Dayax soo iftiimiyo qoftaad dahabka moodaysey
Wax Dallaayad laysugu rogmaday darabkii saarraaye
Jeeroo dabriyo lays markaday dooyo iyo weerar
Cali diid halkaan maalintaa dawga ku ahayne
Daaqiyadda mawdkii dhadhami wuu durraansadaye
Bah Idarays ma deyin Reer Jibriil digasho loolkiye
Ninna Faarax kama daawo gelin xaalkii loo dilaye
Dugaag baa hirqaday feedhihii daribta weynaaye
Col dareeray duulkiyo lallabo dirayo Shayddaanku
Danabayska nimankii badnaa duraha Jiilaalka
Dawriyaha Reer Muusihii dad u itaal sheegtay
Daleelii Wareeg baa la dhigay duco qabeenkiiye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha

La dalleensey Nuux-Maxamedkii idinku dayraaye
Daaraha la ridey Soolomadow dumarka ooyaaya
Dugayeyda naagaha hablaha debedda meeraaya
Haddaan deyey dayaca Reer Barroow daran ammuurtaase
War sow kama diqootaan ilmada dibiqle guudkooda
Dalkii waxa xukuma Reer Warsame dixida weynaaye
Imminkay degmada soo fureen darantii Tiigeede
Duddo reerka loo dhigay haddii degel la waaheelo
Duleedkaa mus laga joojiyaa debedda dhawreede
Ragna mudanihiisow dugsiya dah iyo gaashaane
Meeshii dalleenaa libaax daji ka eegtaaye
Magacna waa diboo dhalashadii loo demeli waaye
Yaan idin diq-diqin waano aan durina aafayne
Damba kama leh Reer Faaraxaan docoginaayaaye
Wax belaayo lagu diimiyaa duul ku waajibaye

Colkan Habar-Jeclada loola dudi daw kalow furane
Allow yaa carruurahan durdurin kala dillaameeya

Waxaa la weriyey in markii uu Salaan Carrabay gabaygii dhammeeyey ay labadii col kala dareeen.

Maanta Kala Hoyda

Faarax Nuur

[Axmed Aw Geeddi: waxaan ka qoray Muuse Aaye Faarax.]

Sida ay tixdan gaabani ku timid waxaa la yiri: nin inan-la-yaal ah oo geed loo waabay fadhiya, ayaa waxa u soo galay biciid dhaawaca, dhaawacana waxa biciidka gaadhsiiyey nin ka tirsan qolada Gabooyaha, oo isaguna la yaal jilib Reer Samatar ah. Ninkii inan-la-yaalka ahaa biciidkii u soo galay wuu qashay. Kii ganay oo raadkii daba jooga ayaa yimid meeshii biciidka lagu qashay wuxuuna yidhi: ‘Biciidkan anigaa ganay, waanan daba joogey, sidaa darteed hilbihiisa hallay siiyo.’ Inan-la-yaalkii wuxuu ugu jawaabay: ‘Hilib halkan ka qaadi mayside iska soco’; kiina wuxuu u tegay ninkii uu la yiil ee Reer Samatar oo wuxuu ku yidhi, ninkii Hebel ayaa biciidkaygii iga qaaday. Ninkaasina faras buu soo fuulay oo ninkii biciidka gawracay ayuu shaabuug la dhacay. Reerkii uu la yiil ninka la shaabuugeeyeyna way duuleen. Markii laysu soo gurtay oo aan dagaalkiise bilaabmin, ayaa Faarax Nuur maqley oo faras buu soo fuulay, labadii col ayuu is dhex taagey, wuxuuna mariyey gabaygan:

Anaa mudan anaa midho ku dheer lay hormari maayo
Miyirkaan ku soo qaban intaan madaxa kaa gooyo
Waa wuxu manaayuhu ka dhacay maalintii hore.

Isku madhannay miidhii Cabdiyo midhihii Daa’uude
Iyagana magoorkii ka dhimay magaca weynaaye
Annagana mankii naga idlaa miigganaan jiraye
Wax yaroo la maarayn karaa madhiyey liddoore
Nin mataanta low jaban tah’oo meel ka kici waayey
Magligii afaysnaa markuu kor u mildhaabaayo
Naftu way macaan tahay intaan lays mahoobbiyine
Waad magan gelaysaan haddaad Xaraf ka meertaane
Allow yaa rag waxa loo maldahay maanta garansiye

Imminkaan wax baydiin maqnayn labadii meeloode
Koluun bay masiibadu dhacdaa maanta kala hoyda

II: Maansada Dhaqanka Nabadda Xoojisa

Dib-u-Joogso Qamaan Bulxan

Tixdani waxay ahayd jawaab uu gabayaagu ka celiniyo tixdii Cali-Dhuux ee ahayd Doollo. Qamaan Bulxan wuxuu tixda ku daafacayay mawqifka qabiilkiisa oo uu Cali-Dhuux ku ceebaynayey in dalkoodii laga qaaday ragna laga laayay, geelna laga dhacay, aanayse ka dagaallamin. Isla markaa Qamaan wuxuu Cali-Dhuux ku eedeynayaa in isaga iyo qabiilkiisuba aanay dhibaato ka yar u gaysanin ta uu leeyahay qolo kale ayaa u gaysatey. Dhinaca kale wuxuu Qamaan Bulxan uu Cali-Dhuux ku canaanayaa in uu dad nabadda ah isku dirayo oo uu doonayo inay dagaalamaan, oo ay dhulkana ku kala qaxaan. Dhinac kalena wuxuu daafacayaa qolada uu ka dhashay, uuna muujinayo inay geesiyaal aan laga sed qaadayn yihiin, ciddii godob ka gashana ay ka goosanayaan. Tixdii Qamaan Bulxan waa tan.

Caliyow dabuubtaada gabay Daayinkaa wadaye
Dabaylaha xagaagee dhiciyo daafigaa sidaye
Noo dooji dooggiyo sidii dararta xoolaade
Diirkiyo laftuu xuley hadduu hadal wax daaweyne
Dadkuna uma sinnee reer tolkey dacar ku nooleeye
Anna waan ku diirsadey Ilaah derejo siiyoowe
Daaraan garbaha qoon ku laad damaqday Dhuuxoowe
Dibirrooti buu dhacay raggaad daabaqadiseene
Waa gobol dillaacid iyo ciil dibinta ruugaaya
Iyo gobol rundada oo fadhiya dagada weeyaane
Dib u joogso! Waan kula dacwiyi doodna waan celine

Dab baad ololisaa kumana gubo daayin abidkaaye
Intaad dogob shiddaa baad taqaan diradirayn jaane
Degelkaad fadhido saw gubee dogob ka qiiqaabay

Hadday daacad xaajadu tahoon lagu dambaabeynin
Danbaabudhada naareed haddaan dhinacu dooneynin
Waar seeddow maxaad noogu digan dakharku waa kiinne
Goormayse degmada noo miyeen? Dawgal baa jiraye
Daldhahsiga dinaasaca la mood doog inaan ahaye
Is-daleemintaydaa ninkii dagani eedaaye
Dubbihii ku dhacay Ina Barwaaq dayi ad maysaane
Daadduunka caydheed raggaa debedda meeraaya
Docmo iyo Hartaa lagu ogaa dalawadoodiye
Cali-Geriga Daadhiin shalay naga durduurteene

Waa kaa darfiyey caanihii Degiyo Heemaale
Anna waxaan dibbirey waa dagaal deyro soo xulaye
Nimay gacantu daabburo tiqiin beri hadduu daayo
Uu yara daleensado intii duco san loo yeelo
Danban maayo waagay xubnuhu yara dubaaxshaane
Inaad deysid beel dagan adoon dani ku seeteynin
Dabcigeedba yaa kugu yiqiin digasho mooyaane

Hadday debecco wow hiiliyaa doqon walaalkeede
Diiftiyo ushay garan intaad dayada haysaane
Dunna hadaanad ii tarin maxaad igu dana sheegan?
Duunyada fardaha maalintaad Dalab ku qaadeysey
Sida duul Amxaara ah markaad nagu dabreyneysey
Intaad haatan ii laba dubbleyn muu damqado jiidhku
Daarood Ismaaciil ahaan maad u soo dirirtid?

Daabaca ninkii kugu dhuftee daabka kuu celiyey!
Iyo kii duleeshay ku yidhi wax isma dhoorshaane
Dakanadeyda yaa kaa xigood igu danayn haatan?

Aar soo dib jirey neef hadduu daacuftii geliyo
Uu kaga digsiyuu ilkaha dhiigga kaga daadsho
Dugaaggaa yaryari saw ka cuna duudka hadha maaha?
Aday dilaye goormaa Isaaq Doollo iga qaaday?
Maxaa libinta Daarood lahaa Daba-Cayuun siiyey?
Haddayse Dubu-Xul uga heesayaan dacarna waan siine
Ma wayse haatan daab iyo ul iyo kaga cabbaan dawlis?

Usha daalis oo dibi dhaloon loo danbarineynin
Oo kii lahaa diiday bay sidigtu doontaaye
Kuwaan derisney dooxeer haddan sebenkan daaduunsho
Waxa adiga duug kaaga noqon yeyga degi waayey
Gabdhaha doonan dadabtaan dhisniyo xidid dariiqeynta
Kuwaan dihanay diricay dhaleen waa dareemada'e
Muslinka hayga didin yaan Ibleys dawyo kaa ridine
Darka jabay dilaalkiyo dhulkuu dabadku meeraayo
Deeqlaha Ilaahay dhulkuu xuliyey daadkiisa
War ii daa dugaagiyo Hartey igaga deyraane

Ildoor Dir weeyee hadduu duullan soo bixiyo
Dunji Habar Magaadluhu hadduu dabarka soo goosto
Dunbiqiyo rasaastana hadduu Debecsanuu siiyo
Horta yaa la da' ah way la yaab dawyadaad xuliye

Ogaadeen ka daan iyo ka daan Doollo soo gudubye
Diinkaan akhriyey way ka iman Doy raggii jiraye
Dunji maalintaa waxa qabtaan waan u daahirine
Ma demeniye deynkeyga waan deba gelaayaaye.

Idinkuba darkii Caynobaad deris ku taalliine
Dagaallama rag doorkii la laa duubcaddii Hagare
Amana daa waan wada qabnaa daawashiyo ceebe

Caliyow da'daan ahay waqaa looma duur-xula'e
Duq gaboobey iyo wiil-yar baa loo dedaa hadale
Diirkaan ka garan xaajadaad dabaqa saartaane
Ma dumaalo naagaha ninkay nolol ku deyrshaane
Nin walaalkii doorsaday Ilaah derejo siin waaye
Dalkaad ina adeerka dhigtaad weli degeysaaye
Baadida nin baa kula deydaya daalla kaa badane
Oon dooni heyn inaad heshana daayin abidkiise
Dadkuna moodi duul wada dhashoon wax u dahsoonayn
Dallana ma laha Aakhiro haddii loo Kitaab dayo'e

Dillaaliyo malaal wuxuba waa Carabta diirkeed'e
Dibnihiinna uun baan galoo way duddubiseene
Alley diliye liddoor adaa iiga sii darane

Ragaw Xibirka Waa Lagu Kufaa

Ismaaciil Mire

Ismaaciil Mire wuxuu ka mid ahaa ciidamadii Daraawiishta Ina Cabdille Xasan; sidaa darteed waxa loo tirinayey godobo badan. Markii la jebiyey Daraawiishtii, Ismaaciil Mire waxa lagu qabtay Bad-weyn oo ku taalla Degmada Caynabo, waxa qabtay ciidamadii Xukunkii Ingiriiska; waxana lagu xidhay Berbera isaga iyo rag kale oo ka tirsanaa daraawiish, inkastoo muddo yar ka dib layska sii daayey. Haddaba waxa dhacday in xukunkii Ingiriiska lagu fidiyo degaannadii Daraawiishi ka talin jirtey. Arrintu si kastaba ha ahaatee waxa Laas-Caanood loo beddeley nin la odhan jirey Carab-Dheere oo ka tirsanaa ilaaladii Ingiriiska, ninkaasoo derejadiisu ahayd saddex alifle (*sergeant*). Sida la wariyo Carab isagoo ka faa'iidaysanaya awoodda Ingiriisku siiyey ayuu tacaddi ku sameeyey dadkii degaankaas ku dhaqnaa oo aan iyagu waxba geysan, lagase yaabo ama ay jirteyba in rag qabiilladooda ahi Daraawiishta ka tirsanaayeen. Maalin maalmaha ka mid ah waxa Laas-Caanood soo galay Ismaaciil Mire. Carab-Dheere ayaa

maqley, dabeetona dalbaday in loogu yeedho. Markii loo keenay ayuu ku amray in uu Ismaaciil gabay tiriyo. Dadka qaarna waxay weriyaan in uu Carab aroos ahaa oo uu yidhi: ‘Arooskayga ka gabay’. Hadal iyo murti waxa la isku raacsan yahay in Carab ku yidhi Ismaaciil ‘Gabay’; Ismaaciilna wuxuu Carab ka codsaday, baa la yidhi, in loogu ballan qaado, in aan waxba la yeelin, marka uu gabayga tiriyo. Taana Carab wuu ka yeelay, isagoo, sida la weriyo, weliba dhaar maqashiiyey in aan waxba la yeeleyn. Kolkaasuu Ismaaciil tiriyey gabaygan caanka ah ee la yidhaahdo *Ragaw Kibirka Waa Lagu Kufaa*.

Kulligood addoomaha Rabbow qaybshey kimistiye
Bad kalluun ku jira kolay ku tahay amase koob shaaha
Qof waliba wixii loo katibay waa la kulansiine
In kastuu kallaho ama kabtiyo ama kurdheer fuulo
Ninna inaanu soo korodhsanayn kaa ha la ogaado

Kaa-kici wadaadkii dagaal laguna kaalmeeye
Kuman iyo lag wada duub cad buu keenay Beer Dhiga’e
Wax kabaalkii jabay maalintuu kaday raggiisiiye
Waxna kadabki haawadey markuu kariyey Reer Khayre
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Anaa dunida keligay leh baa Koofil eersadaye
Kashiisaba ma gelin wiil yar baa keebka kuu qabane
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Afxakame karkabadii u ay iyo kulaylkiye
Ka dambee Caluu yidhi intuu Kaaha guursadaye
Kii kalena kaal weyn u tumay karina waabayey
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Cartan dhuurta kooraha markuu kor ugu laalaayey
Garaad Faarax dhay iyo karuur kala macaanaaye
Misna kala qadhaadhaa dhunkaal kulankii goobeede
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Kaysaha adduun Ina Ammaan koos dhan buu helaye
Ragba keeno geli buu is-yidhi waad u korraysaaye
Isba kii arsaa’ilay ma filin kamana yaabayne
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Kalaamkuu lahaa Ina Galaydh kohay gadaalkiye
Kaarkuba ma jooheen hadduu keeno tuluddiye

Baallacad kalyaa kuma jareen kii uu quudhsadaye
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Shanta koose Reer Cali-Geree kaw iskaga siiyey
Kasi waaye wuxu waa qabaal waana kabataane
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Ninkii koob nimco ah fuuqsadee kadin irmaan foofsha
In karuurka uu qubo horey Kaafka ugu tiille
Kulligii waxaa hoday ‘anaa Kiina’ Reer Hagare
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Kama’ Suggule waagii sidii kuray carruureede
Kas xumaa wadaye gabadha way kala fogaayeene
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado

Mid kuwaa ka dhigan baan arkaan kadab u laabnayne
Inta uu kashbacay uu dhergoo kaman wan weyn yeeshey
Ayuu duul karaamiyo colba leh kiish ka buuxsadaye
Ka shib dhaha Islaamow naftaa kii lahaa gadaye

Suldaanoow **Nuur Laangadhe**

[Ismaaciil Aw Aadan ‘Jaajuumow’: Waxaan ka qoray Asad Aadan Faarax.]

Geeraarkan *Suldaanoow* waxa tiriyey nin la odhan jirey Nuur Laangadhe. Waxaa la dooranayey Suldaan Cabdullaahi Suldaan Faarax, waxaana dooranayey qabiilka Ciidagale. Waa xilliyadii xukunkii Ingiriisku dalkan joogey; waqtigaas ka hor ayey Nuur Laangadhe iyo Suldaan Cabdullaahi arrin yar isku seegeen; sidaas darteed isma jeclayn, waa sida la sheegey; hase yeeshee Nuur Laangadhe wuxuu yimi goobtii lagu caleemo-saaray Suldaan Cabdullaahi Suldaan Faarax, wuxuuna ka mariyey geeraarkan, isagoo kala talinaya shan arrimood, maaddaama xil culus loo doortay suldaanka; wuxuuna yidhi:

Suldaanoow addinkaaga
Suldaanoow hal ammaana
Suldaanoow arrinteenna
Suldaanoow arrintaada
Suldaanoow Ingiriiska
Suldaanoow addinkaaga

Ilaal aad murantaan
'Albaabkaan gelayaa'
'Amar layguma siin'
Isimkaagu ka weyne
Xafiiskaa agihiisa
Intaad joogto ilaali

Suldaanoow hal ammaana
Horey kuugu idlaatayoo
Ka awow ka awow iyo
Imminkoo lagu saaray
Wax imaaradda qaata
Ingiriiska walaayiyo
Inagowgu horreyney

Suldaanoow arrinteenu
Halkii ay ka irdhowdey
Inagaysla ogaynnoo
Inaan kuu alalaasiyo
Inaan tayda adkaysto
Intaa waan tashanaayey
Haddaan kaaga ilaawin
Tolnimayga adkaataye
As-salaamu calayku

Suldaanoow arrintaada
Arabkaa garabkeenniyo
Awalkaa na colaadshiyo
Inankaaga Rashiid
Sidaasaad ku aslaaxiye
Garta haw kala eexan

Suldaanoow Ingiriisku
Halkuu awr ku marinaayo
Irbad buu ku dayaaye
Waa belaayo adduune
Haddii aad af-nuglaato
Odayaasha la shawr

Sinnaan Saahid Qamaan

[Axmed Aw Geeddi: Waxaan ka qoray gabaygan Axmed Colaad ‘Qorane’, waxaan ka saxay *Buugga Af Soomaaliga ee Fasalka 3aad ee Dugsiga Sare* manhajkii hore ee af Soomaaliga.]

Waxa la caleemo saarey nin la odhan jirey Ina Afay. Waxa doortay toddoba jilib oo Ogaadeen ah; madalkii lagu caleemo saarayna waxa laga tiriyeey toddoba gabay oo lagu taageerayo; hase yeeshee muddo ka dib ayaa loo garan waayey xilkii loo doortay. Toddobadii jilib ayaa shiray mar kale, waxayna isla go’aansadeen in la tiriyo toddoba gabay oo lagu ridayo. Gabaygani – sida la sheegey – wuxuu ka mid ahaa kuwii goobtaa laga tiriyeey, oo aannu qaybo ka mid ah ka soo qaadannay.

Dubbadow nin maansood i yidhi wuu i moog yahaye
Way iga madoobayd halkiyo maalintii Sirawe
Mijo-Gooye siduu noogu dhacay maagistii dhigaye
Murti iyo adaan kugu ogaa miigganaan hadale
Iga maqal midaan xalay la kacay ama la musooday

Hadba waxa mudh soo odhan adduun hal aynu moogeyne
Maantana maxay noqon sidii Maxamed loo yaabye
Hadday muruqa geeduhu go’aan mileyga Jiilaalka
Mahwiga ceel haddii loo kacoo maalku ku arooro
Mataan waa ka qaybsada tolkii midho wadaagaaye
Malgabyana haddaan layga siin maax la dhuranaayo
Inaan malab rag kale loo shushubi wax uga miideeyo
Meeshana an taagnahay anoon muradna leefeynin
Oo maydhaxaan igu xidhneyn maylimada qaato
Oon waliba mood iyo salaan ula maleegnaado
Saddex magac Allee xaajadaa layma marinsiiyo
Sidii koran xiniinyaha la mudey uma mareeg qaato

Ninkii midho yar baa lagu dagaa yaan la ii muhannin
Hadday sado macaan tahay ninkii maamiyaa cuna’e
Nin mud-muday dharkayn hoosna maray murux inshaalleeye
Miyir waxaad ku weydaan iswaal kuma mahiibtaane
Muslin kuma cabiidsamo walloon madaxa kaa goyne
Muggii weel ma dhaafee Allow mooska yaan jabinin

Masaw aabbahay iyo intaan Magan ka soo gaadhey
Rag waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi

Maso inaannu nahay oo tolnimo meerto noo tahaye
Aan weliba kaga miil caddahay miidhse diiddaniye
Masalaha ninkaan ii dhigayn midig ma saaraayo
Ninkii aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho

Nux-Nux

Saalax Sugulle Maxamed 'Saalax-Lay-Diray'

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': waxaan ka qoray cajalad Muuse Ismaaciil Galaal duubay.]

Saalax Sugulle Maxamed 'Saalax-Lay-Diray', waxaa lagu tirinayaa in uu ka mid ahaa gabayaa badan oo dhashay nuskii dambe ee qarnigii sagaal iyo tobnaad, wuxuuna ku dhashay degaanta Ceel-Af-Weyn ee gobolka Sanaag. Siciid Cilmi Hoorri oo ka mid ah gabayaaga Soomaalida ee wakhtigan xaadirka ah nool wuxuu ii sheegey in uu Saalax-Lay-Diray dhallinyaranimadiisii ka mid noqday askartii Ingiriiska. Wuxuu ahaa nin reer magaal ah oo adduunka dibaddana in badan dhoof ugu maqnaa, dalalku tegey waxaa ka mid ahaa Yemen (Cadan) iyo bariga Afrika, dhulka Soomaalidana meelo badan buu maray. Magaca Lay-Diray, sida la sheegey, wuxuu kula baxay gabay badnaan keentey in lagu yidhaahdo waar gabayga iska daa, ka dibna gabay uu tiriyey ayuu ku soo daray: 'Maxaan gabay isaga daynayaa waaba lay-diraye'.

Gabayga halkan ku qoran waxaannu la kulannay dad badan oo Reer Hargeysa ah oo nagu yidhi: 'Tixdan waxa leh Faarax Nuur, mana laha Saalax-Lay-Diray'; isla markaana dad fara badan oo kale, gaar ahaan gobollada Sanaag iyo Togdheer, waxay rumeysanyihiin inuu tixdan leeyahay Saalax-Lay-Diray.

Annaga oo labada ra'yiba xurmaynayna waxaannu tixdan ka qornay Alle ha u naxariistee Xaaji Muuse Galaal oo ah nin cimrigiisa ku qaatey suugaanta Soomaalida iyo baadhisteeda noqdayna nin maraggiisa lagu kalsoonnaan karo. Sidaas darteed, gabaygan oo aannu cajelad codkiisa ah ka qornay, uuna ku sheegey in uu tixdan tiriyey Saalax-Lay-Diray, waxaannu halkan ku qoraynaa sidaas uu sheegey Xaaji Muuse Galaal. Haseyeeshee, taa ugama jeedno in aanay sida kalena suuraggal noqon karin; waxaannanu qiraynaa in labada ra'yiba wax la rumaysan karo yihiin; runtana Alle uun baa og.

Nasli gabay hadduu leeyihiyo naafac laga dhawro
Naxwihiisa anigaa bartiyo kiisa nuurka lehe
Nah-nahlaa waqay uma tirshiyo naytigaan garane
Niyadda shooqu maantuu galee naas cusubi joogo
Noociisu wuxuu gaadhayaa nudubka feedhaaye

Niishaanka ruuxaan la helo naarigaa diliye
Naafada danbeetuu sidii nabar kacdoomaaye
Rag-uun baa wax nuunaynayoon nooli ku hadlayne
Anse kayga nadarkaad ka garan naaxiguu yahaye
Nin baryadi naf la calaalcalkiyo naago ku ammaanka
Niyadayda waxay daaranyiin nuqul sidiisiye
Waxaan dhab ugu nuuxnuuxsadaa naaqadiidiga'e
Nux-nuxdiyo naxliga beena iyo naqalka Shayddaanka
Namiinshuhu warkuu keenayuu nacas rumaystaaye
Nu'da hadalka naasaca dibnaa nuuska dhegeheenna
Anna nadartu waxan soo arkaan nacam idhaahdaaye
Dhulko nabada weedh laysku naco naadi ma aqaane
Nashwaddiyo nasabad sheegadkiyo nabarradii baane
Mar hadduu tabtaa igu nekedo ama i niib keeno
Anna halu shisheeyuhu ka naxo naqay dharaartaase
Dadka waxaan is noqonaa midkay neeftu qabataaye
Abidkay iskuma sii nab-nabo kaan i naasibine
Nin i neceb nasteexiyo wanaag amase naamuuski
Waa horeeto nidar baan ka galay nuqusi mooyaaane

Daldhammeeye

Maxamed Bulxan 'Maxamed Cawar'

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': waxaan ku qabtay bowsi.]

Wuxuu Maxamed Bulxan tiriyey maansadan gabayga ah xilli lagu qiyaasay qarnigii labaatanaad horraantiisii. Wuxuu ku halqabsanayaa nin magaciisa la odhan jirey Bullaale. Gabaygan iyo kii ka horreeyey ee Salaanba waa gabayada la yidhaahdo *Hoga-Tusaale* iyo *Hawaala-Warran*, waana maansooyinka Soomaalida kuwa ugu qiimaha badan, sababtoo ah waxay xidhiidhiyaan ama wax ka sheegaan saddexda xilliyada is daba yaal ee kala ah: (1) mid tegey iyo dhacdooyinkii lama illaawaanka noqday ee laga soo maray nolosha iyo raadadkii ay kaga tageen bulshada; (2) xilliga jooga iyo arrimaha socda iyo sidii wax looga qaban lahaa; (3) xilliga soo socda iyo sidii looga gaashaaman lahaa dhibaatooyinka iman kara. Gabaygii Maxamed Bulxanna waa kan:

Burhaan gabay Bullaalow beryahan beeg isma lahayne
Waataan ka baalidey sidii beeyo roob helaye
Xaluun baa habeenkoo badh tegey buun la ii tumaye
Aan beyamiyo waataan tixaa buuni ku ahaaye
Nuux Maxamed waatuu is-bulay beri colowgiye

Bixin kuma lisaan qaalmihii boodh-cadka ahaaye
Biyaha Yeesif iyo Aadan wow kala baqaayaaye
Barbaar reero jirataa ka nool labadi beeloode
Batar kama tumaan Muusayaal berendihii Maydhe
Burcadii Ruguuda iyo Xiis way bannaan tahaye
Laas-Qoray buquulkii ma galo bedenki Reer Suure
Basra timirti laga keeni jirey biidna laga waaye
Boosaaso iyo Qawna waa laga baroortaaye
Majeerteen is-bahardaadintii kala bannaan-qaadye
Butiyaalo nimankii fadhiyey waa ka baxayeene
Boqorrada xintamay Reer Cismaan labada beeloodba
Baxsow Keenoddiid wuxu u kacay beled shisheeyaade
Hobyo ugama baaqeen ninkii baho u weynaaye
Biyamaal Baraawiyo fadhiyey webiga baaciisa
Iyana Buundo dabadeed ma cunin bur iyo iidaane
Biddoodkii Kismaanyoodna ways wada bog dooxeene
Bulshadii Garaad Faarax iyo Barina naafowye
Barkad iyo guryii Bahararsame belel ka qiiqowye
Buuhoodle laga waa waxay beri ku haysteene
Boos Caliyo Reer Gorodna way kala birdhiiftaane
Beenowdey Habar Yoonistii bu'aha waallayde
Reer Sugulle gooddiga bankuu baarcaddii dhigaye
Iyana baarax uma soo shiraan beri samaagiye
Arab wuxuu la balawaasayaa boobtadii gu'ga'e
Waatii Bah-Daylona la dhigay bacadki sheedaaye
Makaahiilla boogaha ku yaal waa bukaan weliye
Barqay weerareen reerihii bahosha Kaaf yiile
Baho-Geelle Reer Samatar way ugu billaayeene
Markii baarqabkii laga dilay budulka raaceene
Xabriir iyo Biyays Reer Biniin kuma bariistaane
Waagoo bakaaraa la dilay Biliyo Daa'uude
Boqorrada la wada laayey iyo buuniyada ooyi
Dadka wada bakhtiyey Adari baan bari ka noolayne
Badhaa Seylac waxa joogi jirey wiilal loo bogaye
Beeh iyo Burhaankuu dhalaa beri ku noolaaye
Dadka niman baguugaha mar noqon buugga laga waaye
Barkimooyin lacaguu lahaa haatan baalide'e
Belaayada adduun weli ma iman bohoradeediiye
Buuray ku joogtaa intay reero baabi'ine
Hadba qolada bocor haysataa loo bayamiyaaye
Ninkii baxaya buuraha Jinkaa loo bidhbidhiyaaye
Belaayo iyo kheyrr baysu jira laba bidhaamoode
Banka xoolo lagu foofiyaan biid ka soo hoyane

Waa baadi geerida Isaaq loo bun-dubayaaye
Berri Carabna waa lagu hayaa baashayaal xidhane
Bur sarreen leh hay dubin kuwii beertay laga qaadye

Waysada biyay waxan u kici baydki Nebigiiye
Balkana ii dhig caawaba qalluu hayga sii baxo'e
Adiguna tolkaa baal ka raac bulan xigaalkeene

Afar Iyo Afar(i)

Maxamed Bulxan 'Maxamed Cawar'

Colaadaha jiidamey iyo dagaalada badan ee la iskaga hor yimi, nacaybka iyo cadaawada aad u ba'ane ee naxariis darrada lehna beeray suugaanta laga tiriyey kuwa ugu caansan, waxa ka mid ah, labadan geeraar ee ay is dhaafsadeen Maxamed Bulxan iyo Faarax Nuur, mar ay heshiis wada galeen Arab iyo Sacad Muuse. Geeraarka waxa ku horreeyey Maxamed Bulxan 'Maxamed Cawar', wuxuuna ahaa gaadmo oo Faarax kama sii diyaar noqon. Sidaas darteed, maansada dambe Faarax Nuur wuxuu ku tiriyey, sida la sheegay, gole-ka-fuul. Maxamed Bulxan wuxuu tixdiisa hore ku yidhi:

Arabow afar hal
Haddii aad aragtaan
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Arabow afar hal
Haddii aan aragnana
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Arabow afar hal
Haddii aad aragtaan
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureynee

Hunguri oodda ka dheeroo
Aroortii kula joogoon
Soddahaa ka ajoonnin
Kaa haddaad aragtaan
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Abtirsiiimada guud
Waxan n'ay dad Isaaq ah
Haddii aan 'in ku dheeri'
Abidkey ku idhaahdo
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Dhulka uubku ku yaallo
Adduunkiinna cunaaya
Haddii aan ka uleeyo
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Waxaydaan odhanin
Haddii uunku sameeyo
Asee aan aqballo
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

**** * ****

Arabow afar hal
Haddii aan aragno
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Nimankaynnu is eedney
Haddaad aano ku raacdood
Oodda oodda u geysa
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

'Amminkaa aynu joogno
Afmeer baannu degeynniyo
Idii bayga casaadiyo
Inan baa iga joogtiyo
Adduun baan beri siiyey'
Kaa haddaan aragno
idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Raggaa maanta Umley
Idinkoon uga aarin

Alla haw naxariisto
Aakhiraan kaga soofay
Ilaah baa ku lahaa
Haddii aan aragno
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Afar Iyo Afar (ii)

Faarax Nuur

Faarax Nuur oo sida la sheegey Maxamed Bulxan maansada ku gaaday ayaa isaguna u celiyey geeraar kaa hore la mid ah; waxa uu yidhi:

Geeraar baan awelkiisiyo
Aakhirkiisa hayaayoo
Idaajaa iyo Weyllun
Ardeydaa dhiganeysee
Albaqraan ka aqaanoo
Anoon looxa ka eegin baan
Habeenkii akhriyaa

Rag ninkaan is-abbaarrana
Asad baan ku noqdaa
Ninkaan aamin la qaatana
Axdigaan bojiyaa

Maalintay urur joogtana
Af aqoonka miyi
Anigow iba saaroo
Anaa lay igmadaa

Afartaa afartoodiyo
Dar kaloo la asaaga
Haddii aad aragtaan
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Afartaa afartoodiyo
Dar kaloo la asaaga
Haddii aan aragnona
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Uunku waysu socdaaye
Akhyaartiinna timaadda
Haddaan oodda ka jiiitoon
Meel awaare leh seexsho
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Ugaaskaa Maxamed
Ardaduu la dhashay
Awalow dhammidaa
Dhammaanba oodda Subeer
Ooryaha laysu dhisaayo
Inankay dhali doonto
Jeeruu Eebbe ka qaado
Eed haddaan kugu keenno
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Waxaydaan odhanin
Hadduu uunku sameeyo
Anse aan aqballo
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Nimankaynu is eedney
Haddaan aano ku raacoon
Oodda oodda u geeyo
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

Rag ninkaan is abbaarno
Oof haddaan jari waayana
Annagaa axdigii iyo
Aamminkiiba fureyna

**** * * * *

Afartaa afartoodiyo
Dar kaloo la asaaga
Haddii aan aragno
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Waa maroodi irmaanoo
Geelu ooga ma daayee
Haddaan xeebta ku oodo
Is-nuugtaa dhimaneysee
Marka maalku Afmeeriyo
Oogo noogu dhalaayo
Haddaad noo iman weydo
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Inantaan idin siinnee
Aabiyey ku wanaagsanee
Aabbaheed la yaqaannee
Ubadkiinna xambaartay
Haddaydaan asalkeeda
Abtirsiimo fageyntiyo
Arabeyda ka deynnin
Idinkaa aamminkii iyo
Axdigiiba furaaya

Irda Reer Cabdi Ciise
Dhir aan leyska aqoon iyo
Afmulaax ka macaan bay
Uumiyaa mariyaane
Nimankii afka beena
Awarta loogu raraayee
Dhigihii aslanaa iyo
Indha daalis sabciinoo
Ashkir bayleh la moodo
Kol haddii inantii
Arooskiiba ku diiddo
In adduun laga waayiyo
Abbaartiiba ninkeeda
Haddaydaan ka eryin
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Hadday Saaxil arkaanood
Kursigow oggolaato
Timirtii la alluubee
Isha looga dhammeeyiyo
Eerigii is daraan

Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Ninka gaalka ag joojee
Af-hayeen la yidhaahdo
Ninkaan wiil ka ilaashiyo
Ilmaadeer ku laheyn
Waa la iibsanayaaye
Uubta laysu qodaayo
Haddaydaan naga eegin
Idinkaa axdigii iyo
Aamminkiiba furaaya

Gocasho Weyn Reeb (Guba) **Maxamed Fiin**

Maxamed Fiin, wuxuu ka mid yahay gabayaaga ay isku wakhtiga ahaayeen Cali-Dhuux Aadan, Qamaan Bulxan iyo aynigooda. Wuxuu degaankiisu ahaa gobolka Togdheer. Gabaygan oo ka mid ahaa silsiladdii *Guba*, wuxuu ugu jawaabayey Cali-Dhuux Aadan; wuxuuna ka mid ahaa gabayadii u horreeyey ee dhinaca qabiilka Isaaqa ka yimaadda. Dulucdeeduna waxay ku arooraysaa nabadda.

Calow gu'gakan gabaygaad na tidhi gocasho weyn reebye
Wixii gacal ahaa uumiyaha waa mid kala geynne
Gabadhiyo walaalkeedna way kala geddoomeene
Gardariyo is-yeel-yeel mar buu gubay bilaadkiye
Nin garaad leh baan kugu ogaa gaban ahaantiye
Maantood gu'yaal badan jirtooguudku ku caddaaday
Bal garwaaqso warankaad gantiyo gedaha aad joogto

Guntigii wadaadkii la'eed gebogebeyntiye
Galow baa ka ciyey ceelashaad geesi ku ahayde
Buuhoodle geel looma horin goortii dabadeede
Gammaankii badnaa ugama fulo labada geesoode
Gardhacdiisi bay si' yala garabyo-weyntiye
Geedaha ka baxay lagama cuno gudubyardow dhow'e
God abaaday waa kaa noqdiyo guri-madoobaade
Waxa guul-darradowgu wacan gini colaadeede
Waa gaabsi Reer Cali wuxuu wada gudboonaaye
Ma gu' yara eh see Cali tashigu uga gulaallaaday!

Guhaad laguma falo ruux hadday gogoshu kuu taalle
Gaadiid ku qaadiyo haddaad gelin laxaad weydo
Gur-gur lama shidaystiyo hashii geela ka irmaane
Gunta lagama jaro geed hadduu kuu gabbaad yahaye

Afartaa gummuumaye sidii leebka mow gooyey
Gobo kalena waa erey yaroon godob ka faalleeyey

Gondo Gooye nimankii dhigaad gacal ahaydeene
Cabdi Muxumed gabayuu ka tegey Gorodkii dheeraaye
Geydh iyo waxay cadho qabaan garanba maysaane
Aar soo gondoodsaday wuxuu gaadho wuu diliye
Goonyaha haddii lagaga ciyo guuldarraa dhiciye
Geelii Ogaadeen ninkii goofiyaa tahaye
Geddiga Reer Subeer yahay ninkii gaadhay baa tahaye
Ninkii geed ku xidhay baad ahayd galabtii weyshiye
Gudaa Adari waa laga tirshaa gabayadaadiye
Gaal iyo Islaam nabaddu wow gogol nasteexaade
Marse haddii colaad loo guntado Gorey ma laacdeene
Cid uun baa rasaas kugu gembiyi Giibba ma lahayne
Ogaadeenku wuu gam'asanyee gamasyo haw dhiibin
Godobta ha ogeysiin rag waa ganacyo Shaydaane
Gacallow ka joog meelahaad gacan-togaalaysey
Haddii kale aduun bow go'iyey gabayga aashaada

Hadduu Saakimi Waayo

Faarax Nuur

[Axmed Aw Geeddi: waxaan ka qoray 'Hadraawi' iyo Cabdiraxmaan Faarax Cali 'Girgire'.]

Maansadan waxa lagala soo bixi karaa xidhiidhka ka dhexeeya colaadda iyo nabadda, waxaanay ina tusaysaa in colaaddu timaado meeshii nabad laga waayo.

Rag Sabaan ka Sabaan baan
Salaantow badiyaa
Hadduu saakimi waayona
Sariir baan u goglaayoon
Iska seexo idhaa
Hadduu saakimi waayona
Caanahii hasha Suubbaan

Saddex jeer u lisaayoo
Ku sariigo idhaa
Hadduu saakimi waayona
Summalkii rugta joogiyo
Sogobkaan u qalaa
Hadduu saakimi waayona
Sarreenkii Cadameed baan
Sixinkowgu badshaa
Hadduu saakimi waayona
Gabadh suurad wanaagsan baan
Surrad'owga dhisaa
Hadduu saakimi waayona
Xoolo gooni u soofiyo
Sadadaan ku ladhaa
Hadduu saakimi waayona
Seeddoow Mood iyo Mood iyo
Salaantaan badiyaa
Hadduu saakimi waayona
Salaaddaan lallabaayoo
Maydal seedo madow iyo
Safkii aan ka dhashiyo
Salligaan cuskadaayoo
Sulub eebo ku joogtaan
Sarartaa ku dhufaaayoo
Sanbabkaan ka baxshaayoo
Markaasuu sallimaa

QAYBTA 2AAD: SHEEKOOYINKA

Adduun I Qatal

[Ismaaciil Aw Aadan 'Jaajuumow': Waxaan ka qoray Ismaaciil Axmed Gaas, Axmed Aw Geeddi iyo Ibraahim Salaad Faarax 'Indha-Cawlle'.]

'Markii aan tamarta hayeyna talo ma hayn, hadda oo aan taladii garanayona, tamar ma hayo.'

Reer Cali-Geraysugu darraa dil iyo qoomaale
Dakanadii qabaalkii raggii dumayey qoomeeye
Waa dawri Buuhoodlahay dir u lahaayeene
Waaya dambe dabataa fadhidey daallinoo col ahe
Durba waranka waysugu dhakhsaday dooxanaa marane
Ma deg-dego nin dirirtii oгаа dooxadii Garabe
Ku dibsade Daboolan iyo Caday danabadii yiile
Dabkuu Aadan shiday Ina Galaydh durugsigii waaye
Dambarkeeda dhaxal xaajaduu doortay Reer Gorode
Nin dardaarankii Cumar hayaa mudanihiis daaye
Nimanyahow tolnimo waa dugsiye dunida jeedaasha
(Salaan Carrabay)

Kalaamkuu lahaa Ina Galaydh kohay gadaalkiye
Kaarkuba ma joogeen hadduu keeno tuluddiye
Baallacad kalyaa kuma jareen kii uu quudhsadaye
Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado
(Ismaaciil Mire)

Bulshadii Garaad Faarax iyo Barina naafowye
Barkad iyo guryii Bahararsame belel ka qiiqowye
Buuhoodle laga waa waxay beri ku haysteene
Boos Caliyo Reer Gorodna way kala birdhiiftaane
(Maxamed Bulxan 'Maxamed Cawar')

'Qabaalku kab-kabasho lahaayaa, oo ka tegis lahaayaa.'
(Odhaah caan noqotay).

Gabayadan iyo murtiyahan aannu kor ku soo xusnay iyo kuwo kale oo aannu isla halkan ku xusi doonno dhammaantood waxay ku soo arooreen colaaddii dhexmartay Reer Cali-geri, taasoo markeedii hore ka dhalatay qabaal uu ku cabbayey geel uu lahaa ninka sheekadan ku caambaxay ee magaciisu yahay Aadan Galaydh.

Sida la weriyey, neef ka mid ah lo' uu isla ceelka ka waraabsanayey nin kale oo Reer Cali-geri ah, hase yeeshee ay Aadan Galaydh kala jilib ahaayeen, ayaa jebiyey Qabaalka. Cumar oo ah wiilkii curad ee Aadan Galaydh, ayaa arkay qabaalkiisii oo dacal ka jaban; ninkii lo'da watay ayuu ku yidhi Cumar: 'Waar maxaad Qabaalka iiga jabisey?!'. Kiina waxa uu ku jawaabay: 'Imminka dacal buu ka jaban yahaye, ka soo qaad isagoo gunta ka dhacay. Markaasuuna ku dhuftay qaash uu sitey guntana kaga dalooliyey; Cumarna markiiba ninkii qabaalkiisa dalooliyey ayuu kaw kaga siiyey oo halkii buu ku diley.

Markay intaasi dhacday, ayaa labadii qabiil arrinkii isaga timid, waxaana lagu heshiiyey in diyada (magta) la kala qaato. Markii magtii la qaybsaday ayaa geelii Reer Aadan Galaydh oo dhawr kadin ah ay hali qabatay; markii dhibtu dhacdayna Aadan Galaydh wuxuu ku maqnaa Doollo, halkaas oo uu gabadh ku aroostay. Cumar oo ugu weyn Ilma Aadan Galaydh, isla markaana ah ninkii wax diley ayaa hashii geelooda qabatay. Cumar walaalihii iyo ilma-adeerradii ruma qaarkood ayaa ku khilaafay Cumar iyagoo leh: 'Odaygii oo nool go'aan ma qaadan kartid,' taasoo ay u arkayeen in arrinkaasoo la fuliyaa Aadan oo maqan uu odaygana meel ka dhac ku yahay qabiilkana magac xumo ku yahay.

Si kastaba ha ahaatee, hashii Cumar soo saaray dib baa geeleedii loogu celiyey, waxaana laysla gartay inay lagama maar-maan tahay in Aadan Galaydh la war-geliyo lana sugo intuu imanayo, arrinkii waa loo fadhiistay, Aadanna war baa loo diray. Maalintii dambe ayuu Aadan yimid. Nin ka mid ah guddidii loo xil-saaray xallinta dhibka yaal, ayaa tiraabay, wuxuuna yidhi:

'Aadan waa ku suganney; waxa dhacayna maqashay, in wiilkaaga Cumar nin diley magtiina la doonayo. Markii magta la qaybsadayna geelaagii hal baa qabatay; hashaa mooyee intii kalena waa la hayaa.'

Aadan Galaydh wuxuu shirkii ugu jawaabay:

' "Waa lagu sugayey" waxaan idinka idhi: "Waa isugayseene bilaan idiinka daraa". "Wiilkaagi nin buu diloo mag baa laga doonayaana" waxaan idinka idhi: "Wiilkayga haddii mag la weyddiinayo, muxuu ragga isugu dilayey." "Geelaagii hal baa qabatayna" waxaan idinka idhi: "Geelaygu hal lagu daro mooyee, hal laga saaro uma baahna"; haddiibase ay dhacdo oo geelayga hal laga saaro, summaddii Reer Aadan Galaydh yaa ka bi'inaya?! Sababtoo ah hal summaddii Reer Aadan Galaydh lihi xero kale kama ololayso!' Ka dibna wuu iska kacay.

Wiilkiisii Cumar ayaa ka daba kacay, wuxuuna yidhi:

‘Aabbo hasha inaga bixi: oo saddex halba inooga bixi. Waa marka horee ninka anigaa diley oo ma dafirsani; waa marka labaade waa dhiig sokeeye, dhiigga sokeeyena lama haysto; waa marka saddexaade haddii aad hasha diiddo anigaa lay dili oo dib ii heli maysid.’

Aadan wuxuu wiilkiisii Cumar ugu jawaabey: ‘Waar naga aamus Alla ku dooriye, xagguu ka baqayaa! Ifka laguma ciiline ma uurkii hooyadii baa lagu ciilay’.

Markuu halkaas xaalku marayo ayaa la kala dareeray; nin kastina hashiisii ayuu la noqday; ka dibna waxa guurtey beeshii uu ka dhashay Aadan Galaydh. Meesha la magac baxday Balliga Cumar-Aji oo Buuhoodle u dhow ayaa Cumar oo faraskiisii jeexa ku sii daayey, isna geed hoos fadhiya si kedis ah u arkay col fardooley ah oo ka mid ah qoladii uu godobta ka hayey, kaabigana u soo saaran. Cumar intuu boodey ayuu is yidhi faraska ku dullaal, xagga kaluu u waydaartay oo bawduu ka jabay; colkiina waa soo gaadheen oo warmahaa lagu boobey oo maydnimaa looga tegey. Galabtii ayaa roob yari heley goobtii Cumar la dhigay. Iyada oo walwal yari soo dhacay; Cumarna naftii ka gurmaysa, ayaa koox ka mid ah qoladiisii isa soo dul-taagtay, waxay yidhaahdeen: ‘Waar ninku inoo qaatami maayee aan la dardaaranno,’ waxa caado ahaan jirtey in col kasta uu ku jiro nin gabyaa ah, kiibaa lagu yidhi la dar-daaran ninka nafi kuma jirto inoo qaatami maayee. Gabyaagii wuxuu yidhi:

Cirka da’aya Cumarooow ragbaan calaf u laabnayne
Malahay ciddaba waa la rogi nimanka Ciideede
Oo caara waran baa idlayn nimanka Ciideede
Carrigaaga jiif duul kalaa kuu ciyoon imane

Markaasaa la yidhi ‘la maad dar-daarmin ee ku noqo’, wuxuuna yidhi:

Hadda iyo haddeeda-han haddaan habaqle mayd muuqan
Wixii hagar ah Aakhiraba waad ka hadli doontaaye
Ifka igu habaar Cumar haddaan hibashadaa raagin

Markaasaa la yidhi haddaad la dar-daarantay, colkiina waxay yidhaahdeen Cumar: ‘Maxaad nagula dar-daarmay?’ Cumar oo tii ugu dambeysey ka dig leedahay ayaa yidhi:

‘Inaadeerkay hebel waxaad ku tidhaahdaan, ninkii aan diley ee la ii diley ninkii ay isu jireen inta ayntu isu jirro, markii colkii kale

maydnimo iiga tegey isagu saddex jeer buu igu soo noq-noqdo marba waranka isii xuluuliyey. Walaalkay hebena waxaad ku tidhaahdaan: hilibahaaga ma cuneene, hilibahayga ha cunin. Aabbahay Aadan Galaydhna waxaad ku tidhaahdaan hashii aad diiddey wiil hakuu noqoto.'

Ka dibna Cumar waa ka aguugtey, colkiina iyagoon aasin bay ka dareeren.

Markay arrintu halkaas maraysey ayaa qoladii Aadan Galaydh ergo u dirtay qoladii Cumar dishey ee markii horena Cumar ninka ka diley. Ergada waxa watey nin la odhan jirey Cali Baargooye. Markii ergadii u tagtey qoladii kale, ayaa la wada hadlay; qoladii Cumar dishey iyana ninku ka maqnaa waxay ergadii ku yidhaahdeen: 'Waxaannu idiin haynaa Cumar oo aannu boqol iyo labaatan geela idinka siinno, kaayagii oo aannu duudsi ka soo qaadno iyo tolkoo heshiia'. Ergadii ayaa ku noqotay beeshoodii iyaga oo warkii sida kuna qanacsan farriinta loo soo dhiibey taasoo u ahayd guul weyn marka la eego sida loola macaamilay. Colkii oo fadhiya sugayana ergadii, ayey yimaadeen, waxaana la yidhi: 'Maxaad waddeen?'. Cali Baargooye oo ergada watey ayaa yidhi: 'waxaannu wadno nin waalan iyo nin wedkii galay baa diida', waxa lagu yidhi: 'ararta iska dhaaf oo hadalka jeex,' warkii buu sheegay. Nin la odhan jirey Qoorwaa oo ay Aadan Galaydh is xigaan ayaa shirkii ka kacay oo yidhi: 'Cumar oo nool mala helayaa?!' Maya ayey noqotey, wuxuu yidhi: 'Haddaa nabadna la heli maayo'. Aadan Galaydh oo faraxsan ayaa istaagey oo yidhi isagoo u jeeda Cali Baargooye: 'Ninkow adiga waxaan ku idhi: nacab iga tiirin mayside, waxaad i tari lahayd adigu is tar, adna inaadeer Qoorwaayooow waxaan ku idhi: "rag waad is-beddaane" hadalkaas aad tidhi maanta i dheh oo berri i dheh oo marwalba i dheh!'

Sidaas ayaana lagu kala dareeray; waan-waan iyo nabadina cirkay ku laalantay; qoladii kalena warkii wuu gaadhey; dagaal baana bilowday; fiintaa miratay. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa col Aadan Galaydh ku jiraa qabtay afar nin oo walaalo ah Aadanna xagga hooyada wax iskaga yihiin. Weliba dadka qaarkii waxay weriyaan inay habarro-wadaag run ah isu ahaayeen Aadan iyo nimanka la qabtay. Aadan baa nimankii ku soo haliiley. Markaasaa raggii kale ku yidhaahdeen: 'Waar yaanay habartu goblamin, ee afarta wiilba ha iska raacinnine, mid biyaha u dhaamiya ha loo reebo, oo weliba ugu filroon - waa Cabdi-Tima-Dhaqe'e - ha loo reebo'. Aadan Galaydh baa yidhi: 'Ma intaan Cabdi-Tima-dhaqe sii daayo, ayaan Boos-Illaawe dilaa?' Halkii ayuu Boos-Illaawe ku sii daayey, saddexdii kalena dhegtuu dhiigga u daray iyadoo Boos-Illaawe sii eegayo. Mar kale ayaa haddana labadii reer shir qabsadeen oo yidhaahdeen: 'Wixii dhacayba dhacee arrimaha aan ka heshiinno'; waayo Soomaalidu waxay tidhaahdaa 'Caano daatayba dabadood baa la qabtaa'; xaaladdani hadday sii socotona waxay keenaysaa mid ka sii xun. Shirkii ayaa Boos-illaawe loogu yeedhay.

Markuu arkay Aadan Galaydh oo baanaya ayuu Boos diidey shirkii in uu soo fadhiisto; ka dibna wuxuu u kacay bari, shirkiina waa lagu kala kacay.

Boos wuxuu doontay faras, wuxuu marba qolo u hoydo oo faras weydiiyaba markii dambe waxa loo sheegay faras uu leeyahay Maxamuud Cali-Shire oo ahaa suldaankii qolada Warsangeli. Faraskaas oo la odhan jirey Dab-La-Tuuray ayuu Boos goostey in uu helo. Wuxuu socdoba wuxuu gaadhay Maxamuud Cali-Shire, wuxuuna ku yidhi: 'Maxamuudoow faraskaaga Dab-la-Tuuray wed oo kaa dila iyo rag kaa qaada mooyee waxkale oo aad kaga samri lahayd ma jiraa?' Maxamuud Cali-Shire wuxuu Boos ugu jawaabay: 'Geeliinnu waa intee?' wuxuu yidhi Boos: 'Waa shan iyo labaatankadin', Maxamuud baa yidhi: 'Shan iyo labaatankaas oo aan marba mid u galo ayaan kaga samri lahaa'. Boos wuxuu ku yidhi Maxamuud: 'Ina keen faraskana soo kaxee'. Sidii ayey isku raaceen Boos iyo Maxamuud, sidii ballantu ahayd Maxamuud shan iyo labaatankii kadin ayuu midba mar u galay oo tuu ka doortay kala soo baxay. Markuu shan iyo labaatankii qaalmood oo qori-cad ah ka xushay, ayaa hal igadhi kacday, candhaddeediina labadeeda sibrood isku martay. Maxamuud baa arkay hashii, wuxuuna yidhi 'Hashaa ku soo dar'. Kolkaasaa Boos yidhi: 'Hashaa iska daa, sababtoo ah waxa loo lisaa islaan waayeel ah oo hooyaday ah oo saddex wiil oo ay dhashayna goob lagu wada diley'. Maxamuud baa dhaar ku maray hashaa oo geela lagu soo daro mooyee in aanan faraskaba kaa iibin. Hashii ayuu soo saaray Boos isagoo aan raalli ka ahayn.

Markii lala kala wareegey ayaa Boos yidhi: 'Haddaba faraska dhaliiliihiisa ii sheeg,' Maxamuud baa yidhi: 'markaad ku dagaallamayso haddii uu wisiisiyo ase aanad ku adkeyn, colkuu kuula gelayaa, haddii uu bowdada baqdin ka daremona wuu iska kaa tuurayaa, labadaa cilladood buu leeyahay'.

Maalintii dambe ayaa labadii qolo dagaal u ballantay, waxa layska helay Rawax Xargega, intaan lays guda gelin ayaa qoladii Aadan Galaydh tashadeen, waxayna is weydiiyeen ninkii Boos-Illaawe lagu beegi lahaa. Aadan Galaydh ayaa soo boodey isagoo aad isugu kalsoon, wuxuuna yidhi:

'Anaa ku beegmaya oo saddex arrimood dartoodba ugu beegmayaa. Waa marka horee Boos wuu il la' yahay, anna labada indhoodba waan qabaa. Waa marka labaaade faraskaygu waa Qadow-Laaye, faras ka cararaana kama baxsado, ka eryadaana ma gaadho. Waa marka saddexaade Boos midigta oo qudha ayuu wax ka dilaa, anna laba midiglaan ahay.'

Dagaalkii baa bilaabmay, Boos iyo Aadanna waa is beegen, hase yeeshee waa lays mari waayey, goor laysla daaley ayaa Aadan Galaydh arkay colkoodii oo la jebiyey oo intii la diley mooyee intii kalena la eryanayo. Si

kedis ah ayuu Aadan faraskii jeedal dhuuxa ka arooriyey, jarihiina kor ugu dhuftay, Boos iyo faraskiisiina wuu kala dulboodey, markiibana wuu ka goostay. Boosna jeedal kii la mid ah ayuu faraskiisii ku kiciyey. Booddadii u horreysey ee Dab-La-Tuuray boodey ayuu gaadhay Aadan iyo faraskiisii; Aadanna wuu u qaadan waayey dhakhsaha Qadow-Laaye loo soo gaadhey. Markuu Aadan dib u jaleecayna waxa la kulmay warankii Boos oo kelida ka wareemay ta kalana ka baxay.

Aadan oo dhulka yaalla ayuu Boos is dul taagey; nabar dambena uma celin. Colkoodii ayaa soo gaadhay Aadan Galaydh oo naftii ka gurmaysa. Markaasaa la yidhi: ‘Aadan bal warran,’ wuxuu Aadan maalintaa ku jawaabay murtida hal-qabsiga caanka ah noqotey ee ah: ‘Adduun i qatal. Maalintii aan taagta hayeyna talo ma hayn, maanta oo aan talo hayana taag ma hayo’. Sidii baa naftu kaga baxday.

Qoladii Boos-illaawe ka dhashay ayaa su’aal weydiiyey Boos, ka dib markay guuleysteen, waxayna ku yidhaahdeen: ‘Boosow maanta ma ciil qabtaa?’ ‘Maya’ ayuu yidhi. Waxa la yidhi: ‘Waayo?’ wuxuu yidhi Boos:

‘Eegmo eegmaan ku illaawey. Booddona booddaan ku ilaawey. Shirna shir baan ku ilaawey.

Maalintii saddexdeyidii walaal anoo eegaya la bireeyey, waxaan ku illaawey, maanta markaan Aadan Galaydh waranka labada kelyood iskaga saaray ee aan faraska kaga tuuray, ka dibna is kor taagey isagoo dhulka geylaansan ee uu isagoo naf-la-caariya i eegey. Maalintii hashii igadhka ahayd ee hooyaday loo lisi jirey booddey, Maxamuud Cali-Shirena arkay, ka dibna dhaartay in iyadoo hashaa geela lagu daro mooyee aanu faraskaba iga iibin, waxaan ku illaaway maanta markii faraskii Aadan iga goostey booddadii u horraysey ee uu faraskaygii Dab-La-Tuuray ku gaadhay.

Maalintii la shiray iyada oo saddex walaalladay ahi mootan yihiin, ee Aadan oo bireeyey shirkii ka baanay, anna aan shirkii iman waaye, waxaan ku illaaway, maanta oo aynu maydkiisii ku dul shirayno.’

Halkaas ayaa sheekadii Aadan Galaydh iyo kibirkiisii ku dhammaatay.

Caddaaladdii Suldaan Diiriye, Kibirkii Xuseen Xasan iyo Guul-Ku-Faankii Xirsi Cabsiiye

[Rashiid Sheekh Cabdillaahi Xaaji Axmed: Waxaan ka qoray Muuse Cali Faruur.]

Waxaa jirey dagaal daba-dheeraaday oo dhex maray labada qolo ee Reer Guuleed iyo Cabdi-Bari oo labaduba isku yihiin Reer Cabdi Ciise (lafta ugu weyn qabiilka Ciidagale, Isaaq). Reer Guuleed waa reerka suldaanka Ciidagale lahaa, waxaana ka dhashay Xuseen Xasan oo ahaa dagaalyahan geesi ah, oo aan lagu qordin jirin jagada abbaanduulaha dagaalka, iyo aftahan gabayaa ahaa, kana mid noqday gabayaagii waagaa kuwooda caan baxay ee gabayadooda ilaa maanta la xusuusto. Xirsi Cabsiiyana wuxuu ahaa aftahan gabayaa ah, dagaalyahan iyo hoggaamiye ka mid ahaa ragga u xaajo qaada ee u taliya qolada Cabdi Bari, oo ka kooban laba iyo toban ilma Cabdi Ciise ah.

Suldaan Diiriye Suldaan Guuleed, waa suldaankii qabiilka Ciidagale ee wakhtigaas, wuxuuna ahaa nin isku darsaday miyir iyo maan garasho iyo mawqif ku dhisan taladasan ee tolkiis iyo beelaha kale ee la degaanka ahba.

Dagaalka labada reer ee ahaa ilma-adeerta isku dhow wuxuu leeyahay qiso dheer oo ilaa wiil iyo awowgii iska soo gaadheen; waxaannuse ka soo qaadannay dhammaadka dagaalkaas oo laga arkayo saddexda nin ee kor ku xusan iyo mid waliba mawqifka uu taagnaa iyo wixii la qiimaha weynaa ee uu xeerinayey: (1) Suldaan Diiriye oo xeerinaya tolliimada Ciidagale iyo midnimadiisa, taas oo ay kaalintiisa suldaannimo u yeedhinaysay; (2) Xuseen Xasan oo matalayey qabkii iyo isla-weynida Reer Guuleed iyo (3) Xirsi Cabsiiye oo sharafta iyo dhegta Cabdi Bari ilaalinayey.

Waxa la yidhaahdaa, Suldaan Diiriye ayaa Ciidagale soo shiriyey si uu arrimihiisa uga wada tashado; waana sidii uu dhaqanku ahaa, in suldaanku markii muddo la joogaba guurtida qabiiladiisa la tashado. Dagaalka raagay ee gudaha Reer Cabdi Ciise ayaa shirkii lagu soo qaaday oo war iyo doodiba ka furantay. Waxa suldaankii lagu yidhi: ‘Haddii aanad Reer Cabdi Ciise gacan ku haynin oo ay dagaal hubka isla dhacayaan, waa maxay talada aad Ciidagale u haysaa? Suldaan arrintaas gal, oo naga dhammee.’ Ka dibna, sidaas ayuu Suldaan Diiriye arrintii ku galay. Reer Guuleed iyo Cabdi Bari ayuu isu keenay. Markii la gaadhay waxa labada reer ku kala maqan waxa la yidhi: ‘Reer Guuleedna waxa ku maqan, toddoba nin oo ay dileen, qolada Cabdi Barina lix nin oo Reer Guuleed ah ayaa ku maqan’.

Markii lix nin iyo lix nin la isu tuuray, nin dheeraad ah ayaa loo raacay Reer Guuleed, magtiisiina lagu yeeshay. Suldaan Diiriyana, sidaas darteed, wuxuu guddoomiyey in Reer Guuleed ninkaas magtiisa keenaan. Hayeeshee, Xuseen Xasan ayaa go’aankaas ka hor yimi oo diiday, in Reer Guuleed

magtaas bixiyo. Gabay uu halkaas ka tiriyey waxa ka mid ahaa:

Lix nin oo mankiyo shaalka iyo midhaha Guuleed ah
Oo wada ma dhaafta ah raggii ugu maloongeeeyey
Inaan waliba maal ugu daraa waa masalo dhaafe
Waligeed markaha looma culin magannu soocnaaye
Waa waxaanay dhagahaygu maqal maanta ka horoowe
Inaanaan cayuun soo madhayn mudhayo dhaadheer leh
Haddaynu Reer Mataan nahay sidaa waydun maan garane

Markii uu Xuseen Xasan sidaa yidhi ayuu Reer Guuleed iska dareeray.

Suldaankii si uu arrinta magtaas u dhammeeyo, waxay noqotay in uu marka hore Xuseen Xasan si kale isaga farsameeyo. Wuxuu u diray Berbera oo Ingiriis fadhiyey, wuxuuna ku sii war geliyey in laga xidho; Ingiriiskiina sidaas ayuu ku xidhay Xuseen Xasan. Hayeeshee Xuseen xabsigii laguma raajine waa la soo daayey, wuxuuna soo gaadhay degaankii Ciidagale iyadoo shirkii loo fadhiyo, oo uu wali socdo. Xuseen Xasan oo ahaa nin qiimaha naftiisa weyneeya oo aad u qab weyn, wuxuu ka cadhooday shirka la qabtey isaga oo maqan lana ogaysiin, ee uu waliba suldaankiina dhex fadhiyo. Sidaas darteed, wuxuu meeshii ka tiriyey gabay. Waxaa ka mid ahaa gabaygaas:

Shir la wacay haddii Ciidagale qayb walba u joogo
Qoqob iyo haddii lagu ballamo qoolasha agtooda
Qalloociyo markii baanisaa nadigu qawleeyo
Inaan ugu qab weyn ahay wax fura Qoobcadiyo Nuure

Intaanay hadal Qoobcadiyo Nuur ayaa suldaankii yidhi: ‘Waa runtiisee isagaa noogu qab weyn’.

Markanna Suldaan Diiriye waxa hor timi caqabaddii Xuseen Xasan. Wuxuu fursad u helay in uu mar kale iska diro Xuseen Xasan. Wuxuu raaciyey nin dhul-mareen Ingiriis ahaa, oo la odhan jirey (sida soomaalidu u tidhaahdo) Lord Dalamiye. Ninkaas oo suldaanka weydiistey gadh-wadeen dhul-mariya, ayuu Xuseen Xasan raaciyey oo ula kacay xaggaa iyo Kiiniya.

Ka dib markii uu Xuseen Xasan iska diray ayuu Suldaan Diiriye, isugu yeedhay labadii qolo ee Cabdi Bari iyo Reer Guuleed. Haddii la isu yimina, wuxuu yidhi: ‘Reer Guuleedow keena magtii ninka Cabdi Bari’; Cabdi Barina wuxuu ku yidhi: ‘ligu dhaarta in aanu Xirsi Cabsiye gabay tirin doonin!’ Xirsi Cabsiye, ayaa markaas saddex Walle-Bille iyo xilo-fur ku maray in aanu tirin doonin gabay cusub.

Magtiibaa la keenay; waxaana lagu kala qaatay dooxan Hargeysa oo markaas aan ahayn magaalo, oo ahaa waabab iyo tiindhooyin. Markii magtii la mariyey ee la kala qatey ayuu Xirsi Cabsiye inta uu goobtii laba halaad ku gawracay yidhi: ‘Haddaan gabayayaaye ha la i dhagaysto’. Gara oo

awalba wuxuu ku dhaartay in aanu gabay cusub oo markaa uu dhaaranayey aan tirsaneyn tirin doonin. Hadal iyo dhammaantii, meeshii gabayga uu Xirsi ka mariyey ee laga dhegeystey waxaa ka mid ahaa:

Labadii tunnaa iyo markaan teeriyada qaatey
Tartarrada billaawaha markaan toos isugu giijeey
Goortaan gundhowrka u tuntumay turuska gaashaanka
Qabiil tabiyo xeel badan arrini waa u wada toose
Markii laysku taagsaday arrini tayda ma ahaatay
Guuleed miyaan tolay sidii igadh tarriiqaaya
Tartarkooda maw qoray haddaan toobbad kale weyney
Inna tiirsimaad Ciidagale tahanna maw diiday
Ma ku tuuray meel dheer waa kaa tegey Ogaadeene
Sida cawlo tuur lagaga hadhay ma isku tuuteeyey
Taandhooyinkii Herer wixii tiro Isaaq joogtey
Gobabkii tilmaannaa markay Taani ololaysay
Tiftii dayrta boqol tiici oo timo-cad may keentay
Af-tayaaga meel lama dhigee taa wax ku hagaaji

Waxa la yidhi baydkaa u dambeeyey wuxuu raaciyey ‘Xuseenow!’

Xuseen Xasanna markii uu soo noqday ayaa lagu yidhi: ‘Magtii la bixi’; markaas ayuu isna yidhi: ‘Oo Xirsi Cabsiiye ma gabayey’; waxa loogu jawaabay: ‘Haa’; gabaygiinna waa loo mariyey. Waxa la sheegay, Xuseen Xasan inta uu suldaankii caayey in uu ku yidhi: ‘haddaba waa taase wax ka dheh!’

Goobtaasi, Xuseen Xasan mooyee labadii nin ee kaleba toodii way u hirgashay.

Suldaanow Kuma Caayin (Cismaan Haayirey)

[Axmed Aw Geeddi: Waxaan ka qoray Sheekh Maxamed Maxamuud Shire.]

Col Ciidagale ah oo geel doon ah ayaa ku duuley beel Ciise Muuse ah, colkii oo meel dhexe maraaya ayaa waxa ku biirey wiil uu dhalay suldaankii Habar Yoonis ee xiligaa, wiilkaa ujeedadiisu waxay ahayd inuu geela la soo dhici doono saami ka helo. Haseyeeshee markii ay colkii beeshii galeen ee ay geeliina qaadeen iyagoon laba fogaan ayaa laga daba gurmaday, geelii waa la dhiciyey ragna waa laga laayey. Ragga meesha ku dhintay waxa ka mid ahaa wiilkii uu dhalay suldaankii Habar Yoonis. Ka dib suldaanka markii loo sheegey geerida wiilkiisa, waxa uu u tegey beeshii Ciise Muuse. Waxaanu weydiistey magtii inankiisa maadaama aanay Habar Yoonis soo duulin

ee wiilka caqli-xumo uun soo raacisey col kale. Hase yeeshe Ciise Muuse way diideen waxaanay ku doodeen in inankiisu gardarro ku soo weeraray iyaguna iska difaaceen; xeerna aanay aheyn nin duullaan ah oo la diley in mag laga bixiyo.

Suldaankii arrinkaa ma gareysan ee wuxuu ergo ugu tegey suldaankii Habar Awal si uu arrinka u soo dhex galo, magna u siiyo. Ka dibna suldaankii Habar Awal wuxuu go'aamiyey in suldaanka Habar Yoonis mag la siiyo; magtana Sacad Muuse iyo Ciise Muuse loo qaybiyo. Hase yeeshee Ciise Muuse gaashaanka ayey ku dhufteen, waana kii Cismaan Haayirey ku gabyey:

Ninka Qaaliya joogee
Ka qoteysta hadhuudhkiyo
Ninka geeri qodaayiyo
Ka qasaalaya geela
Suldaanaw bal qiyaasoo
Wax ma qaybsan karaan?

Mar kale ayuu Cismaan Haayirey lahaa, isagoo haaraamaya suldaanka magta oggolaadey:

Suldaanow kuma caayin
Ku canaannana maayo
Ceebna kuu gudi maayo
Calafna kaa sugi maayo
Cuudkii aannu ku siinniyo
Cadradii gabadhiinna
Marnaba kaa celin maayo
Ceynkaagaa rag ahaayoon
Caleentii boqor saarray baa
Cuurkii Muuse Subeer
Aakhiro u celinaaya

Ka dibna Cismaan Haayirey iyo raggiisu way ka tageen suldaankii, waxaaney samaysteen suldaan beeshooda u gaara (Ciise Muuse).

Faadumo

[Axmed Aw Geeddi: Waxaan ka qoray Xasan Axmed Faarax ‘Boobe’, Hargeysa.]

Sida la weriyey Faadumo Wacays Faarax oo ahayd gabadh qurux lagu majeertey; waxay ka dhalatay Reer Caynaanshe (Habar Yoonis), waxayna ooriidiisa ahayd oo ay u dhaxday Maxamed Jaamac Caymar oo Xasan Maxamed ah (Ciise-Muuse). Muddo bilo ah markii ay guri laheyd ayaa waxa xoog ku kaxaystey nin la odhan jirey Guun oo Reer Axmed Nuux ah (Sacad Muuse), oo ay Faadumo ilma-abti ahaayeen, Guun wuxuu Faadumo ka kaxaystey Banka Aroori ee Burco kanbalkeeda ah. Wuxuu ku qaatay faras dheereeya, waxaanu la tegey Bulaxaar. Dabadeedna wuu gabyey. Wuxuuna yidhi:

Xasan Maxamed xoog iyo laf iyo ma’u xiniin sheegtay
Xaf-ma siiyey Faadumo intaan Xamar u heenseeyey
Xiniinyaha ma jaray tuugaggii xabagta miisaayey

Gug baa laysku yidhi; afkaa gacanta la saaray; hibashaa la giirtey; ninkii gabadha laga dhacay iyo beeshoodiiba cadhay go’een, waxayna la ahaatay in karaamadoodii iyo dhegtoodiiba dhulka lagu dhuftay. Guddi baa la saaray; waxaana la go’aamiyey in ergo loo diro nimankii gabadha qaadey. Guun oo aroos ah ayey ergadii u tagtey, garawshiiyose ma bixine gawdh iyo af-lagaado ayuu ku jawaabay. Markii ergadii fara-madhnaan la soo noqotey, guluf baa la abaabuley; waxaana ciidanka abbaanduule u ahaa Cali Jaamac Haabiil. Waa kii lahaa, markii uu ciidanka uruursanayey, isagoo u gooddiyaaya nimankii Faadumo dhacay:

Goodiyo abeesaan sidaa garanse maysaane
Guddidiin xumaataye sun baa gawska dhigateene
Gunse waxa ah keenney ilmadu gobo’ tidhaahdaaye

Qal-qaaladii ciidan markii ay dhammaatey, guuto cago-madow ah ayaa la soo dareeriyey; galbeed iyo Buula-Xaar ayaa afka la soo saarey. Dhexda intii lagu sii jirey gabayo badan ayuu Cali Jaamac Haabiil tiriyey; waxaana ka mid ahaa geeraarkan uu faraskiisa u tiriyey oo dhawrkan tuduc laga hayo:

Haddaanan dhebi qaadhey
Dhag intaan kugu siiyo
Dhuunta kaaga aroorin

Haddaanan bir la dhaabey
Afka kuugu dhammeynoo
Dhareer kaa tifiq leynin

Dhabbo geel ka carraabay
Haddaan Siig dhitinaayiyo
Lagu moodin dhurwaa

Duhur dabadii ayaa weerar qabax laysku siiyey. Cali Jaamac wuxuu faraskiisii jiidhsiyeey gurigey Faadumo ku jirtey. Markii uu gurigii dumiyeyna Faadumo ayuu cududda ku dhegey, waanu soo fan-gashadey (faraskiisii ayuu xagga dambe soo saarey).

Dabadeedna wuxuu ku tiraabay:

Is wadhaan-wadhkii Faadumoy wadhi ma kaa raacdey?

Maalintaa ayey la baxdey Faadumo Wadhi oo beryihii dambe lagu naaneysi jirey.

Ciidankii markii ay Faadumo gacantooda gashey wey ka jeedladeen waxaaney tageen magaalada Berbera; oo Reer Axmed Nuux aad u joogey. Dhoola-tus iyo is-muujin ka dib, Cali oo Faadumo sitaa faraskii ka soo degey, oo ka hor geeraarey nimankii, wuxuuna yidhi:

Cali-raan isha day
Guuna oohinta day
Ildab hiimada day
Ud-uduufka bahdoodiyo
Idilkii Axmed Nuuxna
Aqoon gaabnida day
Eebadaan sitiyo
Xamarna aabiga day

Aadan-Jugle

Sheekooyinka layaabka leh ee xagga dumarka ka dhacay, waxa ka mid ah arrintan naxdinta iyo murugada weyn yeelatay isla markaana suugaan tiro badani ku soo aroortay.

Aadan-Jugle oo ahaa Habar Yoonis (Reer Wayd) ayaa waxa gabadh weydiistey nin uu abti u yahay, ninkaas oo la odhan jirey Nabadshe oo ahaa Arab (Reer Cali). Qabiilka Reer-Cali waxay la degi jireen iskuna dhaqan ahaayeen Habar Yoonis. Aadan-Jugle ayaa Nabadshe ku yidhi: ‘Gabadha

waan ku siiyey ee konton halaad ii keen, laba sanona iga maqnow, markaa ka dib ayaan kuu dhisi doonaaye'. Ka dibna Aadan-Jugle gabadhii nin kale ayuu siiyey oo uu kaga yarad qaatay. Labadii sano markay dhammaadeen ayaa Nabadshaha u yimid abtigii, wuuna ku hungoobey.

Nabadshaha markuu ogaaday in gabadhii la dhaafiyey oo nin kale lagaga xoolo qaatay, ayuu weydiiyey abtigii sidey wax u dhaceen. Wuxuu yidhi abtigii: 'Abti waxba ma aha' e inanta ku xigta iska sug sannadka soo socda ayaan kuu dhisayaaye'.

Nabadshaha arrinkaa wuu ka yeelay abtigii; hase ahaatee, markii Nabadshaha dhaqaaqay ayuu Aadan-Jugle inantii nin kale siiyey oo konton geela kaga yarad qaatay. Markuu Nabadshaha ogaadey in inantii labaadna la dhaafiyey ayuu wixii odayaal deegaanka ahaa u sheegay sida xun ee abtigii ka yeelay. Odayadii waxay u yimaadeen Aadan-Jugle, waxaanayna ku yidhaahdeen: 'Waaryaa Aadan waa maxay waxan aad samaysay?! Inanka walaashaa dhashay ee aad kontonka ka qaadatay, ee aad gabadhii dhaafisay, ee ta kale u ballan qaaday ee tiina dhaafisay, waa ceeb weyn oo aan hore loo arag, waana taariikh xune ee maxaad damacday?!'

Aadan-Jugle wuxuu odayadii ku yidhi: 'Meel baan ka dhacay, nin oday ahna waan ahay, waanan hunguri xumooday, ee haatan waxba yaan lay fadeexadayne, inanka waxaan siiyey inantaa saddexaad; haddii aan ka bixiyona anigaa dembiga leh.'

Odayadii ayaa u yeedhay inankii oo ku yidhi: 'Adeer markaan xaalkii eegnay, abtigaa wuu qirtay inuu qaldamay oo uu meel kaaga dhacay, wuxuuna ballan qaaday inuu gabadhaa saddexaad kuu dhisayo; haddii aannu odayaasha nahayna waxaannu garannay intii horeba dulqaadataye, inaad doorkanna iska samirtid, inantaa kalena sugtid, ee sidaa yeel waannu kuu ducaynaaye'.

Nabadshaha, taladii odayaasha wuu yeelay. Inkasta oo odayaashii aad ula dardaarmeen Aadan-Jugle haddana ballantii muu oofin ee inantii saddexaadna nin kale ayuu siiyey oo konton halaad kaga qaatay. Nabadshaha kolkuu ogaadey in inantii saddexaadna la dhaafiyey, ayuu waran soo tuntay, ka dibna wuxuu habeenkii dambe u soo hoydey abtigii Aadan-Jugle. Aadan oo gogoshii bannaanka guriga loo dhigay ayuu Nabadshaha, markii la seexday warankii oo afaysan beerka kaga turqay, halkaasuuna odaygii ku dhintay. Nabadshaha waa baxsaday, inkasta oo markii dambe Ingiriisku soo qabtay, oo del-delaad lagu xukumay. Kolkii la xukumay Nabadshaha ayaa lagu yidhi: 'Maxaad maxkamadda ka codsanaysaa,' gabay aannu saddexdan bayd ka haynno ayuu Nabadshaha tiriyey, wuxuuna yidhi:

Kelyo nimaan laheyn baa baqee kani adaygayga
Iyo Aadan kaalkaan la dhacay kari ogaantiisa
Iyo sidanan uga kaadinine ugaga kow siiyey

Intaa ka dib, ayaa labadii reer shir nabadeed isugu yimaadeen. Dadka meesha yimidna waxa ka mid ahaa wadaad Reer Wayd ahaa oo laga filayey in uu wixii shareecada Islaamka ku saabsan labada reerba kula taliyo. Hayeeshee, sida la sheegay, wadaadkii xaggii Kitaabkaba uma kicine wuxuu meeshii ka tiriyeey gabay colaadeed, wuxuuna yidhi:

Magligaan callaaqaha hayaa cadho daraadeede
Curcurkaan ku hadateeliyaa cadowga gaashaane
Caska waxaan la sare joogsadaa caara yuubada'e
Cirka saalis baa inan u kaco layga celiyaaye
Ceebowday Habar Yooniseey cududahaagiye
Kala culus nin Reer-Caliya iyo Reer Xirsi Cismaane

Markii gabayгаа la maqlay baa dadkii oo dhammi yaabay, iska daa ummaddii kale oo Reer Waydkii baa ku yidhi: 'Indhaha Alla kaa ridye, annagaa gabyi lahayne adigu dadka sheekhoodii baad ahayde maxaa gabayga kuu geeyey?!' Wadaadkii baa yidhi: 'Maxaa ii geyn waayey sow inadeerkay Aadan-Jugle lama dilin, miyaan ka samrayaa?!'

Faarax Nuur markuu maqlay gabayгаа wadaadka ayuu isna gabay tiriyeey. Wuxuu yidhi:

Bal arko addoomaha qofkii la ibtilaynaayo
Kolka horeba naar oogan baa or uga yeedhaaye
Isimkii wadaad wow eg yahay Awna lagu sheegye
Bal amaaradii culimadii waa ku aragnaaye
Eedaanna waa laga maqlaa oogta waaberiye
Indha-Hamille iyo Hoobal baa aayadow dhiga'e
Waa aaladdii Bucur-Bacayr tuu ku aakidaye
Adna orodday looxiina waa ku abhinaayaaye
Aakhiro Kitaabkaagu sow ku ashkatayn maayo

Wadaadkii cid dambe kuma daba tukan, saddexdii magacna waa loo bixiyey, ee kala ahaa: Indha-Hamille, Hoobal iyo Bucur-Bacayr.

Waa Dharaare Dhacso

Lama tirin karo colaadaha Soomaalida xilliyadii soo jireenka ahaa ka soo dhici jirey; inta badanna waxay u dagaallami jireen siday isugu ood xigeen. Sheekadanina waxay ka mid tahay sheekooyinka la xidhiidha colaadda iyo nabadda; waxayna tusaale u tahay dagaal dhex maray beesha Ciisaha iyo beesha Habar Awal, muddo qiyaastii laga jooga laba boqol oo sano. Wuxuu dagaalku ka dhacay Lughaya; sababta dhalisayna waxay ahayd nin

la odhan jiray Faarax Badhcun ayaa ku ducaystay in Ilaahay geel siiyo, wuxuu soo abaabulay col ka dibna waxa soo duulay qabiilka Ciisaha, ciidanka Ciisaha waxaa abbaanduule ka ahaa Faarax Badhcun. Colkaasi wuxuu dagay meesha la yidhaahdo Duurre, halkaas oo uu ka qaadey duulimaadka. Marka laga reebo qayb ka mid ah Ciise Muuse (Maxamed Ciise) oo aaney dagaan isku gaadhin Ciisaha. Colkii Ciisuhu markay siddeed jeer weerareen Habar Awal oo ay wixii geel ay heleenna gacanta ku dhigeen, wixii rag ay arkeenna dileen, ayey subixii danbe go'aansadeen in ay meesha ka tagaan.

Ninkii abbaanduulaha ahaa ee colka Ciisaha watay oo la odhan jiray Faarax Badhcun ayaa yidhi: 'saddexdii ciidan ee aynu ka koobnayn waxa jooga laba waxaana maqan mid; sidaas darteed, waa in aynu sugno ilaa laysu soo wada dhammaado'. Markay isu soo dhammaadeen oo aanay wali anba bixin ayaa qoladii Habar Awal ergo soo dirtay waxay u yimaadeen colkii Ciisaha oo geelii ay soo qaadeen haysta. Waxay yidhaahdeen 'Waxaannu u soconney in aad geela noo celisaan'. Haseyeeshee qoladii Ciisuhu waxay ku jawaabeen geeraarkan caanka noqday:

Waa taa Dhuub ololaysa
Waa taa Dheega suntan
Hadow bay murantaa
Ma dhex joogin tidhaaye
Waa dharaare dhacso

Haddaydaan dhacsananayn
Dhakhso nooga dareera
Karti dhoof lagu keenay
Oo saaka dhuunyanayey
Iyo wiil Isaaqba dhammaa

Waa taa Dhuub ololaysa
Waa taa Dheega suntan
Waa dharaare dhacso
Haddaydaan dhacsananayn
Dhakhso nooga dareera

Ergadii qoladii Habar Awal iyagoo fara madhan bay halkii ka noqdeen; qoladii Ciisena libintii la hoydeen.

INTRODUCTION TO THE ENGLISH TRANSLATION

By Martin Orwin

Somali language

The Somali language is spoken in the eastern part of the Horn of Africa east of a line running roughly south south west from Djibouti to the River Tana in Kenya. The language is a member of the Cushitic family of languages and the number of speakers might be estimated at around eleven million. Given the great upheavals of recent times, there has been a large increase in the numbers of people living outside of the Horn of Africa, with diaspora communities in the UK, the US, Canada, the Gulf States, Yemen, Scandinavia and elsewhere.

